



**DOWLAD G. PUNTLAND EE SOOMAALIYA**  
**Wasaarad Arimaha Gudaha, Federalka Iyo Dimuqraadiyeynta**

**PUNTLAND STATE OF SOMALIA**  
**Ministry of Interior Affairs, Federal and Democratization**

---

**Tabobarka Hagaha Degmada ee Qorshaha Ka-qaybgalka Ku Salaysan iyo Miisaaniyadda**  
**(DPP&BG)**

# **Buugga Guudmarka**

**Buugga Ka-qaybgalaha** (dhamaystiran)

June 2019





## Tusmada

<b>Hordhac.....</b>	<b>6</b>
<b>Kulan isbarasho: Ibofur (Khajil-jebin) .....</b>	<b>9</b>
<b>Kulanka 1aad: Waa Maxay Mareegta DPP&amp;BGka ee Degmadu? .....</b>	<b>10</b>
<b>Kulanka 2aad: Qorsheyn iyo Miisaaniyad-Dejin.....</b>	<b>19</b>
Tallaabooyinka Qorshaynta Iyo Miisaaniyad-Dejinta oo Faahfaahsan. <b>Error! Bookmark not defined.</b>	
Qaabka Guud ee Horumarinta Degmada Ee 5ta Sanno .....	33
Geeddi-socodka Qorsheynta Iyo Dejinta Miisaaniyad-Sanadeedka .....	44
<b>Kulanka 3aad: Dhaqangelinta iyo Fulinta Miisaaniyadda .....</b>	<b>59</b>
Faahfaahinta Tallaabooyinka Fulinta iyo Maareynta Miisaaniyadda .....	62
<b>Kulanka 4aad: Warbixinta Xisaabaadka iyo Maaliyadda .....</b>	<b>73</b>
<b>Kulanka 5aad: Hantidhowrka iyo La-socodka &amp; Qiimeynta (L&amp;Q) .....</b>	<b>79</b>
Hantidhowrka Gudaha ee Degmada .....	82
La-socodka iyo Qiimaynta (L&Q) Degmada .....	86
<b>Kulanka 6aad: Gebogebo.....</b>	<b>91</b>
Cutubka oo Kooban .....	91
Daraaseyn iyo Qiimayn ( <i>assessment and evaluation</i> ) .....	91
Qaamuuska Ereybixinta .....	92
<b>Akhris dheer ah.....</b>	<b>94</b>
<b>Lifaaqyada.....</b>	<b>95</b>
Lifaaqa 1aad: Shaqooyinka Waaxaha Degmada iyo DPP&BG-ka .....	96

## Ereyo la soo gaabiyey

AIMS	Accounting Information Management System (Nidaamka Maareynta Xogta Xisaabaadka)
AWP	Annual Work Plan (Qorshe Hawleedka Sanadlaha ah)
CMG	Community Monitoring Group (Kooxda Bulshada ee La-socodka)
DBFP	District Budget Framework Paper (Warqadda Qaab-dhismeedka Guud ee Miisaaniyadda Degmada)
DDF	5 year District Development Framework (Qaabka Guud ee Horumarinta Degmada ee 5ta sanno - <b>DDF</b> )
LEA	Local Economic Assessment (Qiimaynta Dhaqaalaha Maxalliga ah)
LED	Local Economic Development (Horumarinta Dhaqaalaha Maxalliga ah)
M&E	Monitoring and Evaluation (La-socodka iyo Qiimaynta)
MoF	Ministry of Finance (Wasaaradda Maaliyadda)
MOI	Ministry of Interior (Wasaaradda Arrimaha Gudaha)
MoP	Ministry of Planning and National Development (Wasaaradda Qorshaynta iyo Horumarinta Qaranka)
NGO	Non-Government Organisation (Hay'ad Aan Dawli Ahayn)
O&M	Operations and Maintenance (Hawlgallada iyo Dayactirka)
PER	Public Expenditure Review (Dibu eegista Kharashaadka Dowladda)
DPP&BG	District Participatory Planning and Budget Guideline( Hagaha Degmada Maamulka Qorshaynta laga wada qaybgalo &Miisaaniyadda
ToTs	Tababaraha Tababarayaasha
VC	Village Council/Committee (Golaha/Guddida Tuulada)

## Gogoldhig & Mahadnaq

Waxa farxad weyn ii ah in aan idiin soo bandhigo buuggan cusub ee hadda la dhamaystiray, kaasoo kaw ka ah taxane ku saabsan manhajka 'Qorshaynta laga wada qaybgalo iyo Maareynta Maaliyadda Dowladda' (DPP&BG) ee Dowladaha Hoose ee Somaliland. Buugan iyo kuwa kale ee ka mid ah taxanaha waxa lagu baran doonaa Mac-hadka Dowladda Hoose, iyada oo gacanna laga helayo Wasaaradda Arrimaha Gudaha.

Buuggan Guudmarka ahi waxa uu aragti guud siin doonaa dhammaan shaqaalaha Dowladda Hoose iyo xubnaha Golaha Degaanka, oo ay ku jirto Fulintu. Diiradda waxa la saari doonaa tallaabooyinka mareegta DPP&BG Dowladda Hoose (iyada oo lagu salaynayo mareegtii 'PEM'ka ee hore loo adeegsaday), oo ay ku jiraan Qorshaynta iyo Dejinta Miisaaniyadda, Dhaqangalinta Miisaaniyadda, Xisaabaadka iyo Warbxinta Maaliyadda, iyo Hantidhawrka iyo La-socodka iyo Qiimaynta (L&Q).

Ujeeddadu waxa ay noqon doontaa in dhammaan shaqaalaha iyo xubnaha Golaha Degaankuba fahmaan mareegta guud, iyo waxa ay noqonayaan doorarkooda kala duwan ee ay ku leeyihiin geeddi-socodyada kala duwani. Intaa ka dib, tababar farsamo oo ka sii faahfaafsan ayaa la sii siin karaa shaqaale gaar ah, iyada oo lagu salaynayo doorarkan.

Waxa aan jeclahay in aan uga mahadnaqo taageeradii barnaamijka JPLG, iyo sidoo kale degmooyinkii la bartilmaameedsanayay ay ka geysteen diyaarinta buugan.

Wasiirku wuxuu u mahadcelinayaa UNDP/JPLG caawimaadooda dib u eegista buugii hore (PEM) iyo sameynta buuga dib loo eegay oo loogu macagdarey (DPP&BG), sidoo kale wasiirku wuxuu u mahadnaqayaa la taliyahaha UNDP/JPLG Marwo Rabecca oo dadaalkeeda iyo kartideeda la'aantood aan howshaani (PEM) suurtagal noqoteen, sidaa si la mid ah wuxuu wasiirku Mahad u jeedinayaa la taliyaasha degmooyinka iyo agaasimayaasha qorsheynta qeybtii libaax ay ka qaateen dib u eegista PEMka, ugu danbeyn wasiirku wuxuu u mahadcelinayaa kooxdii Wasaaradda ee dib u eegista oo kala ahaa: Mohamed Ali Nor (Agaasimaha Guud) Maxamed Yuusuf Muuse ( Khabiir), Sa,ad Abdulkadir Mohamud ( Iataliye Sare), iyo Yuusuf Ahmed Mohamud ( Agaasimaha Waaxda Qorsheynta), wadashaqeyntoodii iyo gacantii ay ka geysteen dib u eegista DPP&BG ga Buugaan guudmarka DPP&BG ga waxaa loo qaabeeyey looguna talagaley dowladaha hoose si ay ugu isticmaalaan hage dhinaca qorsheyntooda iyo miisaaniyad sameysadkooda, sidaa darteed wasiirku wuxuu u soo jeedinayaa ama farayaa in degmooyinku ay ku dhaqmaan buugaan in uu ku hago qorsheyntooda, miisaaniyadooda iyo dhinac kasta oo ku saabsan maamulidooda dhinaca maaliyadda si ay u xoojiyaan isla xisaatanka iyo hufnaantooda.

### Maxamed C/raxman Dhaban-cad

Wasiirka Wasaaradda, Arrimaha Guddaha Federalka iyo Dimuqraadiyeynta

# Hordhac

## Ahdaaf iyo Ujeedooyin

'Buuggan guudmarka ahi' waa ka koobaad ee taxane buugaag ah oo lafdhabar u ah Manhajka Hagaha Degmada ee Qorshaynta Laga Wadaqaybgalo Iyo Miisaaniyadda (DPP&BG) (eeg lifaaqa 1: manhajka DPP&BG)

Buuggan hadafkiisu waxa uu yahay in uu siiyo ka qaybgalayaasha aragti guud oo ku saabsan mareegta DPP&BG degmada oo dhamaystiran, si ay u garan karaan doorarka ay kala leeyihiin inta lagu guda jiro geeddi-socodyada kala duwan, una arkaan sida ay xiriir ula leeyihiin 'sawirka guud' ee mareegta guud ee DPP&BG-ka.

Dhamaadka buuggan, ka-qaybgalayaasha waxa laga filayaa in ay:

- Fahmaan doorka iyo masuuliyadda ka saaran mareegta DPP&BG.
- Tilmaan ka bixiyaan sida doorarkooda iyo masuuliyadahoodu ula xiriirsanyihiin hawlaha ku jira mareegta DPP&BG, iyo sida ay ula jaanqaadayaan daneeyayaasha kale.
- Uga soo baxaan doorarka ay ku leeyihiin mareegta DPP&BG ka iyo masuuliyadaha hab waafaqsan sida ku cad mareegta.

## Yaa loogu talogaley buugga?

Buuggan waxa loogu talaglay dhammaan shaqaalaha maamulka degmada iyo xubnaha Golaha Degaanka, gaar ahaan:

- Fulinta (Duqa, Ku-xigeenka Duqa, Xoghayaha Fulinta)
- Golaha Degaanka iyo Guddi-hoosaadyadiisa
- Agaasimayaasha Waaxaha Degmada
- Dhammaan shaqaalaha Waaxaha Degmada
- Shaqaalaha kale ee degmada ee ay khusayso

Buuggu waxa kale oo uu muhiim u yahay kooxaha kale ee daneeyayaasha ah, oo ay ka mid yihiin:

- Wakiillada gobollada sida saraakiisha waaxaha ee ka hawlgala heer degmo, iyo isuduweyaasha gobollada.
- Daneeyayaasha heer qaran oo ay ka mid yihiin WAG, WQ & H, WM, iyo kuwo kale.

## Habka Gudbinta Casharada Buugga

Buuggan ka-qaybgalaha ee buugga guud ee DPP&BGka waxa loo qaabeeyey in loo bixiyo hab fool-ka-fool ah. Si kastaba ha ahaatee, waxa la filayaa in wixii looga baahdo lagu bixin karo hab internetka loo marayo. Taa waxa dheer, habab kale oo tababar oo sii xoojin ah ayaa la aburi doonaa, kuwaas oo ay ka mid noqon karaan tusaale ahaan, kooxo *facebook*, kooxo WhatsApp ah, Webinars, iyo fiidiyayaal gaagaaban oo la galiyo YouTube-ka. Hababkan kale waxa ay isku dayi doonaan in ay siiyaan ka qaybgalayaasha habab kale oo la xidhiidha dhinacyada DPP&BGka ee xallinta dhibaatooyinka, falanqaynta fikradaha iyo ururinta falcelinta asxaabta.

## Guudmar ku Saabsan Buugga iyo Jadwalka Wakhtiyada

**Wakhtiga Buugga:** 8 saacadood oo tababar ah

**Lagu bixinayo:** 2 maalmood, lagu salaynayo ku dhawaad 4 saacadood oo tababar ah maalintii

Kulanka	Wakhti tilmaan ah	Nuxurka
<b>Kulan Isbarasho: Ibofur (Khajil-jebin)</b>	<b>0.5 saacad</b>	<ul style="list-style-type: none"> <li>Su'aalo sii tijaabin ah</li> <li>Isbarasho iyo ibofur (Khajil-jebin)</li> <li>Ahdaaf iyo Ujeeddooyin</li> <li>Filashooyin iyo Xeerar</li> </ul>
<b>Kulanka 1: Waa Maxay Mareegta DPP&amp;BGka Degmadu?</b>	<b>saacad</b>	<ul style="list-style-type: none"> <li>Qeexda DPP&amp;BG</li> <li>Ujeeddooyinka DPP&amp;BG</li> <li>Mareegta DPP&amp;BG</li> <li>Doorarka iyo Masuuliyadaha DPP&amp;BG</li> </ul>
<b>Kulanka 2: Qorshayn iyo Miisaaniyad-dejin</b>	<b>2 saacadood</b>	<ul style="list-style-type: none"> <li>Qorshaynta iyo Jadwalka Miisaaniyadda</li> <li>Daneeyayaasha Qorshaynta iyo Miisaaniyad-dejinta</li> <li>Dokumentiyada Qorshaynta iyo Miisaaniyad-dejinta</li> <li>Tallaabooyinka Qorshaynta iyo Miisaaniyad-dejinta</li> </ul>
<b>Kulanka 3: Dhaqangalinta Miisaaniyadda</b>	<b>1.5 saacadood</b>	<ul style="list-style-type: none"> <li>Adeeg-daadajinta</li> <li>Horumarinta Kaabayaasha</li> <li>Kharashaadka iyo Sunsunka Lacagta Kaashka ah</li> <li>Dibu-eegista iyo La-socodka Miisaaniyadda</li> <li>Wax iibsiga</li> <li>Maareynta Hantida, Maareynta Deynta</li> </ul>
<b>Kulanka 4: Xisaabinta iyo Ka-warbixinta Maaliyadda</b>	<b>saacad</b>	<ul style="list-style-type: none"> <li>Mabaadi'da Xisaabaadka Degmada</li> <li>Nidaamyada Xisaabaadka</li> <li>AIMS/BIMS iyo IFMIS</li> <li>Jaantuska xisaabaadka (<i>Chart of Accounts</i> (COA))</li> <li>Shuruudaha warbixinta xisaabaadka</li> </ul>
<b>Kulanka 5: Baadhista iyo L&amp;Q</b>	<b>1.5 Saacadood</b>	<ul style="list-style-type: none"> <li>Waaxda Hantidhawrka Gudaha ee Degmada</li> <li>Guddida hanti dhawrka gudaha ee</li> </ul>

		degmada
		<ul style="list-style-type: none"> <li>• Hubinta wax iibsiga/hanashada</li> <li>• Qaab-shaqeedka Q&amp;L degmada</li> </ul>
<b>Kulanka 6: Gunaanad</b>	<b><i>0.5 saacad</i></b>	<ul style="list-style-type: none"> <li>• Nuxurka Buugga</li> <li>• Tallaabooyinka Xiga</li> <li>• Qiimayn</li> </ul>

## Kulan isbarasho: Ibofur (Khajil-jebin)


### Ujeeddooyinka Kulanka:

- Abuurista deegaan waxbarashada ku habboon isla markaana dhiirrigalinaya.
- Bixinta aragti guud oo ku saabsan tababarka, oo ay ku jiraan ahdaafta iyo ujeeddooyinka.
- Fahamka filashooyinka ka qaybgalaha tababarka.
- In laysku afgarto xeerarka iyo nidaamka tababarka

Waa kuwan qaar ka mid ah arrimaha tababarahaagu kaga hadli doono kulankan:

- Soo dhawayn, Isbarasho, iyo Nidaaminta Fasalka
- Ahdaafta iyo Ujeeddooyinka Tababarka
- Filashooyinka iyo Xeerarka
- Su'aalo Hordhac ah

*'Webi ba taagtii buu rogmadaa'*



### Su'aalo ibofur (khajil-jebin) ah

Akhri odhaahda Cali— sideed u malaynaysaa in arrintani xidhi maareynta wanaagsan ee maaliyadda dowladda?

Isla falanqeeba qofka ku agfadhiya intaa ka dibna gole-keen. Waxa aynu kulanka dambe si dhaw u eegi doonaa waxa ay tahay maareynta wanaagsan ee maaliyadda dowladdu.

# Kulanka 1aad: Waa Maxay Mareegta DPP&BGga ee Degmadu?

## Ujeedooyinka Kulanka:

Dhammaadka kulankan, ka qaybgalayaashu waxa ay awoodi doonaan in ay:

- Tilmaamaan ujeedooyinka iyo yoolka nidaamka DPP&BGga.
- Sharxaan tallaabooyinka muhiimka ah ee mareegta DPP&BGga, iyo hawlaha la qabanayo.
- Soocaan/tilmaamaan daneeyayaasha muhiimka ah ee PPPFMka degmada iyo doorarkooda iyo masuuliyadahooda.

## Qeexid iyo Ujeedooyin

DPP&BGu wuxuu ku salaysan mabaa'dii iyo ujeedooyinka **Maamulka Maaliyadda Dowladda**, kaas oo tixraacaya sharciyo,xeerar, nidaamyo iyo habraacyada ay dowladdu isticmaasho si ay u urursato dakhli, u qoondeyso maaliyadda dowladda, u swameeyso kharash bixin , u xisaabiso maaliyada iyo hanti-dhowrto wixii la helay ama baxey.

Waxa ku jira hawlo ka ballaaran maareynta lacagta oo kaliya, taasoo aan u adeegsanno weedha 'DPP&BG'— **District Participatory Planning and Budget Guideline**— si aan carrabka ugu adkayno muhiimadda doorka qorshaynta laga wada qaybgalo, taasoo ah tallaabada koobaad ee ka horaysa dejinta miisaaniyadda iyo hawlaha kale ee maaliyadeed .

Isha: <http://www.qsdrc.org/professional-dev/public-financial-management/>



## Kala mudnaansiinta ku salaysan istiraatiijiyad

=  
**Qorshe, Miisaaniyad, iyo in lagu kharash gareeyo halka loogu baahi badanyahay, iyada oo laga heshiinayo qaabka kala mudnaansiinta ah**

**Taa waxaa dheer, nidaam DPP&BG oo wanaagsani waa in uu noqdo mid hufan, xogtiisana dadwaynuhu heli karo, isla markaana ay jiraan hab is xakamayn ah oo lagu hubiyo islaxisaabtanka**



## Layliga 1aad: Xaalado la xiriira DPP&BG-ga

Xaaladaha soo socda waxa lagu iftiiminayaa arrimaha ay tahay in fiiro loo yeesho dhanka maamulka dowladda hoose marka ay noqoto arrimaha kharash-gareynta lacagaha dowladda, hab waafaqsan mabaa'diida DPP&BG. Akhri xaaladahan soo socda islamarkaana iskula falanqeeya su'aalaha idinka oo kooxo yaryar ah. Tababaraha ayaa idin hagi doona inta aad hawshan waddaan.

### Xaaladda 1aad

Degmada Abyan waxa ay qayb weyn oo ka mid ah miisaaniyaddeeda horumarinta ee sanadka 2016 u qoondaysay barnaamijka maareynta qashinka magaalada, kaasoo loo maalgelin doono hab sanadle ah ilaa sanadka 2018.

Dhammaadka sanadka 2018, bulshada ayaa la weydiiyay sida ay u arkaan guusha barnaamijka. In badan oo ka mid ah bulshadu waxa ay tilmaameen in aanay arag wax isbeddel ah oo la taaban karo dhanka maareynta qashinka 3<sup>dii</sup> sano ee u dambeeyey, waxaana ay isweydiinayeen sida lacagta loo isticmaalay.

Degmada Abyan lafteedu si wanaagsan la-socod uguma sameyn horomurka barnaamijkan, sidaa daraadeed, inkasta oo ay tilmaan ka bixin kartay sidii lacagta loo isticmaalay, haddana sharaxaad kama ay siin karin waxa faa'iidada barnaamijku ahayd, iyo in lacagta si wanaagsan loo adeegsaday iyo in kale.

1. Marka la fiiriyo xaaladdan, waa kuwee 3<sup>da</sup> mabda' ee DPP&BGka ee arrintani xiriir la leedahay:
  - Kala ahmiyadsiin ku salaysan istiraatiijiyad?
  - Anshax Maaliyadeed?
  - Qiimihii lacagta?
2. Maxay degmada Abyan wax ka beddeli kartey si natiijadu intan uga roonaato dhanka barnaamijka maareynta qashinka?

### Xaaladda 2aad

Marka la sameynayo qorshaha sanadlaha ah iyo miisaaniyadda sanadka 2017, Maamulka Degmada Abyan waxa uu isku raacay in ay wanaagsan tahay in la dhiso dugsi hoose/dhexe oo kale oo laga sameeyo xaafadaha danyarta ah ee degmada. Marka la dhammeystiro, dugsi waxa furi doona Duqa, waxaana uu u suuragelin doonaa carruur badan oo aan hadda dugsiyada dhigan in ay dugsi aadaan.

Markii miisaaniyad-sanadeed qabyo qoraal ah iyo qorshe-hawleedkii sanadlaha ahaa lagu soo bandhigey shirkii dadweynaha ee Oktoobar, dadkii xaafadda ka soo jeeday waxa ay sheegeen in arrinta ay iyagu doorbidayaan ahayn dugsi. Waxa ay sheegeen in iyaga biyo u daran yihiin, arrintaas oo ay si cad ugu faahfaahiyeen intii wadatashigu socday. Waxa ay ku dareen in hay'ad weyn oo caalami ah qorshaynayso in ay dugsi hoose/dhexe ka dhiso halkaa sanadka 2017<sup>ka</sup>, taasoo ay ahayd in Golaha Degaanku ka warhayaan, ka hor dejinta miisaaniyadda iyo qorshe hawleedkaba.



### Layliga 1aad: Xaaladaha DPP&BGga (sii socda...)

1. Marka la fiiriyo xaaladdan, waa kuwee 3<sup>da</sup> mabda' ee DPP&BG-ga ee arrintani xiriir la leedahay:

- Kala ahmiyad siin ku salaysan istiraatijiyad?
- Anshax maaliyadeed?
- Qiimihii lacagta?

2. Maxay degmada Abyan wax ka beddeli kartaa si ay u sii hagaajiso habka go'aan-qaadashada ku saabsan waxa la maalgalinayo sanadka 2017<sup>ka</sup>?

#### **Xaaladda 3aad**

Degmada Abyan waxa ay diyaarisay miisaaniyaddii 2016. Intii ay waddey saadaasha dakhliga iyo kharashka kadib, waxa caddaatay in kharashaadka la qoondeeyey ka badan yihiin dakhliga la filayo in la helo.

Markii Guddiga Miisaaniyaddu arrinta kala hadleen Fulinta, Duqu waxa uu yiri *"Aan rajeyno in aan helno dakhli aan la fileyn inta lagu guda jiro sanadka si aan u daboolno kharashaadka. Haddii aanay tani dhicin, waxa aynu qaadan doonnaa deyn aan ku bixinno kharashka dheeriga ah"*.

1. Marka la fiiriyo xaaladdan, waa kuwee 3<sup>da</sup> mabda' ee DPP&BG-ga ee arrintani xiriir la leedahay:

- Kala ahmiyad siin ku salaysan istiraatijiyad?
- Anshax maaliyadeed?
- Qiimihii lacagta?

2. Ma ku raacsantahay Duqa Degmada Abyan? Talo nooc ah ayaa ay Guddiga Miisaaniyaddu siin karaan Duqa?




### Layliga 2aad: Mareegta DPP&BGga

Tababaruhu waxa uu soo bandhigi doonaa mareegta DPP&BG-ga ku muujisan **Jaantuska 1** ee hoose. Intaa ka dib, waxa lagu weydiin doonaa in aad habeeyso tallaabooyinka kala duwan, intaa ka dibna soocdo hawsha raacda tallaabo kasta oo ka mid ah mareegta.

Tababarahaagu waxa uu ku siin doonaa tilmaan dheeri ah, taasoo lagu samayn karo golaha guud ama hab kooxo ah.

## Jaantuska 1aad: Mareegta DPP&BG-ga Degmada



## Golaha Degmada, Fulinta iyo Maamulka Degmada

### Golaha Degmada

- Dejinta ujeeddooyinka siyaasadeed iyo go'aaminta bartilmaameedyada horumar ee degmada.
- Falanqaynta, dib-u-eegista, iyo ansixinta lacagta horumarinta degmada ee 5ta sano, miisaaniyadda degmada iyo Qorshe Hawleedka Sanadlaha ah.
- La-socodka horumarka laga sameeyey dhanka hirgalinta miisaaniyadda degmada hab waafaqsan sida arrimuhu u kala

### Duqa

- Bixinta hoggaaminta siyaasadeed iyo tan maamul ee hirgalinta geeddi-soocodka DPP&BG-ka.
- Matalidda maamulka heer degmo ee goobaha iyo wadatashiyada bulshada, iyo la macaamilka hay'adaha qaran iyo kuwa heer gobol.
- U gudashada waajibaadka hab waafaqsan Sharci Lambar 7.

### Xoghayaha Fulinta

- P Bixinta taageerada fulineed iyo ta maamul iyo isku dubba ridka waaxaha degmada.
- Korjoogtaynta diyaarinta iyo hirgalinta DPP&BGka heer farsamo.
- U gudashada waajibaadka hab waafaqsan Xeer. Lr. 7.

### Agaasimayaasha Waaxaha Degmada

- Qaabaynta hawlaha waaxdooda iyo qaybaha sanduuqa horumarinta degmada ee 5-ta sano.
- In ay aragtida waaxahooda ku daraan qorshe-sanadeedka iyo miisaaniyadda.
- Mas'uuliyadda hirgalinta adeegyada khuseeya waaxahooda, (eeg **Lifaaqa 1** ee Hawlaha Waaxaha Degmada).

### Fulinta/Guddiga Joogtada ah

- Dib-u-eegista Qaab-dhismeedka Guud ee Horumarinta Degmada ee 5ta sanno
- Dib-u-eegista hawlaha sanadlaha ah ee degmada ee qiimaysan.
- La-socodka hirgalinta Siyaasadaha Golaha Degmada.

### Guddiga Miisaaniyadda

- Diyaarinta miisaaniyad qabyo qoraal ah oo ay tahay in la dheelitiro.
- Bixinta talo farsamo si loo samayn karo odoroska dakhli.
- Gacansiinta diyaarinta miisaaniyadda waaxaha iyo qorshe hawleedka.
- Hubinta in waaxaha degmadu dhawraan shuruudaha rasmiga ah ee miisaaniyadda, oo ay ku jiraan wakhtiyada kama dambaysta ah

## Heer Qaran iyo Heer Gobol

### WAG (MOI)

- Tilmaanta shuruudaha qaran iyo siyaasadaha si loogu daro qorshe hawleedka degmada iyo miisaaniyadaha.
- Bixinta kaalmo farsamo iyo losocodka Qaabka Guud ee Horumarinta Degmada, miisaaniyadda iyo diyaarinta Qorshe-hawleedka Sanadlaha ah iyo diyaarinta dokumentiyada.
- Ka qabashada Qaababka Guud ee Horumarinta Degmada, miisaaniyadaha, Qorshe-hawleedyada iyo warbixinaha maaliyadeed degmooyinka.
- Isku dubbaridka iyo korjoogtaynta kobcinta itaalka horumar iyo fududaynta shaqaalaha degmada.

### Wasaaradda Qorsheynta

- Hagitaanka heer qaran ee qorshaynta iyo isdhexgalinta qorshayaasha heer degmo iyo waafajintooda himilooyinka iyo qorshaha qaran.
- Siinta kaalmo farsamo qorshaynta heer degmo.
- Hubinta in kaalmada deeqbixiyayaasha caalamiga ahi waafaqsantahay Qaababka Guud ee Horumarinta Degmada.
- Ka ururinta xogta degmooyink si loogu adeegsado Qorshaha Horumarinta Puntland iyo in uu xog iyo malcuumad siiyo arrimaha mudnaanta la siinayo iyo qorsheyaasha.

### Wasaaradaha Kale (t.a. Caafimaadka, Waxbarashada

- Talo ku darsiga waxyaalaha ahmiyadda la siinayo heer qaran/qaybeed, si ay u hagto sameynta Qaabka Guud ee Horumarinta Degmada ee 5ta sano iyo geeddi-socodka dejinta qorshe-sanadeedka.
- Bixinta tilmaanta qoondaynta ilaha looga sameeyey degmooyinka wixii ka khuseeya waaxda iyada oo qayb ka ah habka dejinta miisaaniyadda.
- Kaalmo farsamo iyo gacansiinta meelo gaar ah dhanka qorshaynta, hirgalinta mashaariicda iyo bixinta adeegyada.
- Daadejinta shaqooyinka heer degmo, hab waafaqsan Siyaasadda Maamul-daadejinta iyo Khariidadda Waddada ee

### Wasaaradda Maaliyadda

- Hubinta in lacagaha loo bixiyo hab waafaqsan hawlaha loo daadejiyey heer degmo.
- Mas'uuliyadda xil iska saarista yareynta haista amaanada ee heer degmo.
- Hagidda miisaaniyad-dejinta degmada, iyada oo bixinaysa xog sax ah oo ku saabsan sida wax loogu qoondeeyey degmooyinka.

### Maamullada Gobollada

- Iskuxirka qorshaynta heer degmo iyo heer qaran.
- Isku duwayaasha gobolladu in ay isu-keenaan qorshayaasha degmooyinka isku gobolka ah.
- Saraakiisha waaxaha ee gobolku in ay gacan siiyaan maamul-daadejinta ka socota heer gobol (t.a. Waxbarashada, Caafimaadka). Iyadoo la tixgelinayo siyaasadda maamul baahinta , khariiradda fulinta siyaasadda iyo qorshaha fulinta siyaasaddaasi.

**Hanti-dhowraha Gudaha ee Degmada/Gudiga Handhowka Degmada**

**Heer Bulsho**

- Madaxa Hanti-dhowrka degmadu wuxuu masuul ka yahay si waxtarle/ wax ku oolnimo leh u shaqeynta ee hanti-dhowrka degmada, oo ay ka mid yihiin qorsheynta hanti-dhowridda, sameynta nidaamka hanti-dhowridda iyo hanti-dhowridda raacista nidaamka hanti-dhowrka i Gudiga hanti-dhowrku wuxuu masuul ka yahay in uu korjoogteeyo qeybta hanti-dhowrka Gudaha iyo in dabagal iyo tayo hubin ku sameeyo shaqada hanti-dhowrka Gudaha, si uu u hubiyo in qeybta hanti-dhowrka guduuhu in ay heysato shaqadeedii si wafaaqsan hagaha hanti-dhowrka.

**Golayaasha/Guddiyada Tuulada**

- Ka qaybgalka iyo xiriirinta wadatashiyada bulshada iyada oo qayb ka ah Qaabka Guud ee Horumarinta Degmada ee 5ta sano.
- Hubinta dokumentiyada Qaabka Guud ee Horumarinta Degmada iyo ka warbixinta miisaaniyad sanadeedka degmada iyo qorshe hawleedka
- Xiriirinta degmada iyo bulshada degaanka ku dhaqan.

**Kooxaha La-socodka ee Bulshada Degaanka**

- La-socodka mashaariicda iyo adeegbixinta degaanka ka socota.
- Ku warcelinta Golaha Degaanka iyo Duqa wixii ka soo baxa hawlaha la socodka.

**Xubnaha Bulshada**

- Ka qaybgalka wadatashiyada bulshada iyo kulamada dadweynaha ee la xiriira DPP&BG-ka.
- Ka qaybgalka waxbarashada madaniga ah iyo hawlaha wacyigalinta ee ku saabsan DPP&BG.
- La-xisaabtanka dadka matalaya degmada iyada oo loo marayo hay'adaha sida Golayaasha/gudiyada Tuulada iyo



### Layliga 3aad: Ku Lug Lahaanshaha Bulshada ee Mareegta DPP&BG

Waxa muhiim noqonaysa in la hubiyo in haweenka, dhalinyarta iyo kooxaha kale helaan fursad ay si buuxda ugaga qayb qaataan tallaabooyinka kala duwan ee mareegta/meertada DPP&BGga, gaar ahaan tallaabooyinka Qorshaynta iyo Miisaaniyad-dejinta, kuwaasoo ay ku jiraan la tashiga bulshada ee Qaabka Guud ee Horumarinta Degmada ee 5ta sanno. Eeg **Jaantuska 2aad** ee hoose. Waa kuwan qaar ka mid ah caqabadaha haweenku sheegeen in ay wajahaan marka ay timaaddo in ay si buuxda uga qaybgalaan wadatashiyada bulshada:

*"Wakhtiga la qabanayo wadatashiga ayaa dhibaato ah iyada oo sababtuna tahay in haweenku ku mashquulsan yihiin hawlaha aqalka."*

*"inta wadatashigu socdo haweenka waa la cadaadiyaa iyada oo aan inta badanna raggu u oggolaan haweenka in ay hadlaan."*

*"Gudiyada tuulooyinku waa qaar rag u badan yihiin, waxa laga yaabaa in ay haweeney keliya ku jirto."*

Isha: Warbixintii Aqoon-is-weydaarsigii Haweena Ku Jira Dowladaha, UNDP-JPLG Jan 2016


U shaqeeyo koox-koox kana munaaqashoda:

*Maxay yihiin arrimaha soo wajahi kara haweenka iyo kooxaha kale ee la fogeeyo marka ay timaaddo ka-qaybgalka buuxa ee mareegta DPP&BG. Maxaase wax looga qaban karaa arrimahaas?*

Tababarahaagu waxa uu kugu dari doonaa koox diiradda saari doonta mid ka mid ah arrimahan:

- Haweenka
- Dhallinyarada
- Dadka naafada ah

## Jaantuska 2aad: Kaqaybgalka Bulshada ee Mareegta DPP&BG Degmada



## Kulanka 2aad: Qorsheyn iyo Miisaaniyad-Dejin

### Ujeedooyinka Kulanka:

Gebogabada kulankan, ka qaybgalayaashu waxa ay awoodi doonaan in ay:

- Tilmaamaan sida ay isugu xigaan tallaabooyinka Qorshaynta iyo Miisaaniyad-dejinta Degmada dhanka jadwalka, hab waafaqsan marka ay tahay in hawlaha kala duwani qabsoomaan.
- Soocidda daneeyayaasha muhiimka ah ee tallaabooyinka Qorshaynta iyo Miisaaniyad-dejinta, iyo mas'uuliyahooda iyo waajibaadka saaran.
- Tilmaamaan Dokumentiyada muhiimka ah ee Qorshaynta iyo Miisaaniyad-dejinta ee ay tahay in degmadu soo saarto, iyo sharaxaadda sida mid kasta xiriir ula leeyahay Qorshaynta iyo Miisaaniyadda-dejinta.

### Qorshaynta iyo Miisaaniyad-dejinta

Waxa ku jira:

- Qaabka Guud ee Horumarinta Degmada ee 5 sanadlaha ah (Sanadka 1aad oo keliya)
- Geeddi-socodka Qorshaynta iyo Miisaaniyad-dejinta Sanadlaha ah ee Degmada
- Abaabulka iyo Uruurinta Dakhliga
- Daraasado, Qorshaynta Iibka, Qorsheynta Hawlgalada iyo Dayactirka



### Maxaa ku jira tallaabadan?

- Tallaabadan ka tirsan mareegta DPP&BGga waxa ku jira dhammaan hawlaha ay tahay in degmadu qabato si ay u hubiso habsami u socodka qorshaynta, taasoo ka turjumaysa baahiyaha bulshada ku dhaqan degmada.
- La-shaqeynta bulshada, oo ay ka mid tahay adeegsiga tabaha waxbarashada madaniga ah ayaa ah cunsur muhiim ah oo ka mid ah tallaabadan.
- Tallaabadan waxa ku jira oo kale diyaarinta miisaaniyad sanadeed faahfaahsan, taasoo muujinaysa dhammaan raasamaalka iyo dakhliga soo noqnoqda iyo kharashaadka degmada ee sanadka soo socda.
- Iyada oo qayb ka ah tallaabadan, ilaha dakhliga ee kala duwan ee dagmada ayaa la qiimeeyaa, iyo sidoo kale lacagaha kale ee laga filayo dowladda dhexe.
- Qorshe hawleed sanadle ah aya la diyaariyaa, kaasoo faahfaahinaya arrimaha, kharashkooda tilmaamaya, sheegayana hawlaha degmadu qaban doonto sanadka soo socda.
- Hawlaha muhiimka ah ee ku jira tallaabadan waxa ka mid ah samaynta daraasad qiimayneed oo lagu samaynayo hawlaha la soo jeediyay in la qabto sanadka soo socda, iyo sidoo kale hubinta in uu jiro qorshe u yaalla howlaha iyo dayactirka hantida degmada la isticmaalo inta hawhsu socoto. Qorshaha wax iibsigu waa in uu faahfaahiyo dhammaan iibka (alaabaha, shaqooyinka iyo adeegyada) taasoo loo baahanayo si loo hirgaliyo qorshe hawleedka sanadlaha ah ee degmada.



## Layliga 4aad: Lafagurka Geeddi-socodka Qorsheynta Iyo Miisaaniyad Dejinta Degmada

Kulankan waxa ku jira agab kaa gacan siin kara fahamka Geeddi-socodka Qorshaynta iyo Miisaaniyad-dejinta Degmada, kaas oo ka kooban labadan qaybood ee soo socda:

- Qaabka Guud ee Horumarinta Degmada ee 5ta sanno ah (taasoo la diyaariyo 5tii sannoba mar).
- Geeddi-socodka Qorshaynta iyo Miisaanid-dejinta Degmada (oo la sameeyo hal mar sanadkiiba kuna jiraan miisaaniyadda iyo qorshe hawleedyada sanadlaha ah ee degmada).


Labadan qayboodka waxa loo sii qaybiyaa hawlo yaryar. Tababarahaagu waxa uu idiin qaybin doonaa kooxo waxaana uu idiin qoondayn doonaa qaar ka mida hawlahaan. Hawl kasta, waxa aad ka jawaabtaan su'alaahan soo socda:

1. Goormaa hawshan la qabtaa? (Tixraac **Jaantuska 3aad: Jadwalka P&B**)
  - Sanadkasta miyaa la sameeyaa mise hal mar 5tii sannoba?
  - Maxaa hawlo ka horeeya maxaase ka dambeeya hawshan?
2. Waa kuwee daneeyayaasha ugu muhiimsan hawshan?
  - Tilmaan daneeyayaasha degmada, bulshada iyo daneeyayaasha heer qaran iyo kuwa heer gobol ee qayb ku leh hawshan. (eeg **Jaantuska 4: Daneeyayaasha P&B**)
  - Tax doorarka u gaarka ah daneeye kasta dhanka hawshan (Tixraac **Tallaabooyinka Qorshaynta iyo Miisaaniyad-dejinta**)
3. Maxay yihiin Dokumentiyada muhiimka ah ee Qorshaynta iyo Miisaaniyad-dejinta ee xiiriirka la leh hawshan? (Tixraac **Shaxda 1aad. Dokumentiyada muhiimka ah ee Qorshaynta iyo Miisaaniyad-dejinta**)

Kooxdaadu waxa ay soo bandhigi doontaa wixii ay ogaatay. Tababaraha ayaa wixii tilmaan dheeraad ah loo baahdo bixin doona

## Jaantuska 3aad: Jadwalka DPP&BG Degmada ee —Qorshaynta Miisaaniyad-Dejinta

DPP&BG ka Degmada – Jadwalka qorshaynta iyo miisaaniyad-dejinta -Puntland





## Jaantuska 4aad: Daneeyayaasha Qorshaynta iyo Misaaniyad-dejinta



## Shaxda 1aad: Dokumentiyada Muhiimka Ah Ee Qorshaynta Iyo Miisaaniyad-dejinta

Waa maxay?	Waa maxay ujeeddadiisu?	Yaa soo saara goormaase la soo saaraa?	Sidee dokumentigani gacan uga gaystaa geeddi-socodka qorshaynta iyo miisaaniyad dejinta?
<p><b>Qaabka Guud ee Horumarinta Degmada ee 5ta sanno ah</b></p> <p>Dokumenti qorshayneed oo haga himilada, sida ay wax u kala muhiimsan yihiin iyo ujeeddooyinka degmada, sida caadiga ah waxa uu ku eegyahay muddo xileedka 5ta sanno ee Golaha Degmada?</p>	<ul style="list-style-type: none"> <li>Bixinta lafagurka xaaladda taagan ee degmada, iyada oo loo marayo Xogta Degmada.</li> <li>Qiimaynta xaaladda dhaqaale ee degmada iyo muujinta fursadaha Horumarinta Dhaqaalaha Maxalliga ah (LED), muddada 5ta sanno ah ee Qaabka Guud ee Horumarinta Degmada iyada oo loo marayo qorshaha LED.</li> <li>Tilmaamitaanka baahiyaha bulsho iyo sida ay u kala muhiimsanyihiin 5ta sanno ee soo socda, iyada oo loo marayo Wadatashi lala Samaynayo Bulshada.</li> <li>In qorshaynta degmada la waafajiyo qorshayaasha kale ee Heer Qaran, iyada oo muhiimad gaar ahna la siinayo qorshe waaxeedyada.</li> <li>Si loo sameeyo himiladii 5ta sanno ee degmada, waa in la tilmaamo meelaha muhiimka ah ee degmadu la tacaalayso, iyo sidoo kale ujeeddooyinka arrimahaa ee shanka sanno ee soo socda.</li> <li>In la sameeyo abbaaro iyo tilmaamayaal</li> </ul>	<p>Qaabka Guud ee Horumarinta Degmada (DDF) waxa la soo saaraa 5tii sannaba mar, kaasoo bilaabma bisha Maarso lana soo gabagabeeyo bisha Luuliyo (sanadka 1aad oo keliya).</p> <p>Qaabka Guud ee Horumarinta Degmada waa in dib-u-eegis lagu sameeyo sanadkiiba mar (bisha Luuliyo ee sanadaha 2-5), si loo hubiyo in waxyaabihii muhiimadda la siinayay weli muhiim yihiin, iyo in Xogtii Degmadu weli sax tahay. .</p>	<p>Qaabka Guud ee Horumarinta Degmadu waxa uu qaab guud u dejiyaa dhammaan horumarrada la qorshaynayo in laga hirgaliyo degmada 5ta sanno ee soo socda.</p> <p>Waxa uu bixiyaa qaab guud oo horumarin oo 'hawl-wadeennada' kalena ee horumarintu ku dhex shaqeyn karaan, si loo hubiyo in dhammaan hawlaha horumarka degmada ay waafaqsanaadaan baahiyaha iyo waxyaabaha muhiimka u ah degmada.</p> <p>Waxa laga helaa habkii qorshayaasha heer degmo loogu xiri lahaa kuwa heer gobol iyo kuwa qaran.</p> <p>Waxa uu suuragaliyaa in wadatashi buuxa lala yeesho bulshada si loo ogaado baahiyahooda iyo waxa u muhiimka ah.</p> <p>Waxa uu bixiyaa madashii la isugu wada keeni lahaa dhammaan xogta loo baahanyahay ee heer degmo, iyada oo qayb ka ah geeddi-</p>

Waa maxay?	Waa maxay ujeeddadiisu?	Yaa soo saara goormaase la soo saaraa?	Sidee dokumentigani gacan uga gaystaa geeddi-socodka qorshaynta iyo miisaaniyad dejinta?
	aasaas u noqda qaabka guud ee L&Q ee Degmada		socodka Xogta Degmada.
<p><b>Guudmarka Hawlaha Horumarineed ee Degmada</b></p> <p>Shax ay ku qoran yihiin dhammaan hawlaha horumar ee socda iyo kuwa la soo jeediyay, oo ay ku jiraan kuwa ay maalgaliyeen/hirgalisay cid shisheeye ah, ee aan ahayn kuwa Degmadu ay lafaahanteeda maalgalisay.</p>	<ul style="list-style-type: none"> <li>In uu bixiyo aragti guud oo ku saabsan arrimaha dhanka horumarka ee muhiimka u ah degmooyinka sanadka soo socda (ama 2 xiga hadday suuragaltahay), dhammaan waaxaha iyo dhammaan ilaha maalgalinta oo dhan (oo aan ahayn kuwa ay maalgalisay ama hirgalisay dowladda hoose oo keliya).</li> <li>Shaxad waxa ay ka kooban tahay xog ku saabsan hawlaha, qiimaynta kharashaadka, ilaha maalgalinta, iyo jadwalka.</li> </ul>	<p>Shaxdan waxa diyaariya Waaxda Qorshaynta, iyada oo ay weheliyaan daneeyayaal bisha Sebtember sanad kasta dib u eegis iyo waxka beddelna waa lagu samayn karaa 6dii biloodba. Sidan waxa loo yeelaa si degmadu xog sugan markasta uga hayso hawlaha socda (gaar ahaan kuwa ay maalgaliyaan isla markaana fuliyaan hay'ado dibadda ka yimaada, tusaale ahaan NGOyada).</p>	<ul style="list-style-type: none"> <li>Shaxdu waxa ay ka caawinayaa degmada in ay sawir buuxa ka hesho waxa qorshaysan iyo waxa ka socda degmada, ka hor Shirka Miisaaniyadda.</li> <li>Degmooyinku waxa ay noqon karaan qaar si istiraatiiji ah uga fekera arrimaha ay ahmiyadda siinayaaan dhanka hawlhooda, tusaale ahaan haddii NGO dhisayo dugsi hoose tuulada, looma baahna in degmadu isla tuuladaa ka dhiso dugsi.</li> </ul>
<p><b>Qiimayno/Daraasado</b></p> <p>Qiimaynta suuragalnimada mashruuc ama hawl.</p>	<ul style="list-style-type: none"> <li>Warbixinaha daraasadaha qiimaynta ayaa tilmaami doona haddii mashruuc sii soconayo iyo haddii kale. Baaxadda daraasaddu waxa ay ku xirnaan doontaa baaxadda mashruuca iyada oo mashaariicda waaweyni u baahan doonaan daraasado qotodheer in la sameeyo.</li> </ul>	<p>Qiimaynta/Daraasadaha mashaariicda dhismaha waxa sameeya Waaxda Hawlaha Guud (injineerka Degmada).</p> <p>Daraasadaha ay sameeyso Waaxda Hawlaha Guud ee</p>	<ul style="list-style-type: none"> <li>Daraasadaha suuragalnimadu waxa ay muujiyaan in mashruuc lagu dari karo sanadka soo socda Qorshe Hawleedkiisa, iyo in aaney suuragal ahayn fulintiisu.</li> </ul>

Waa maxay?	Waa maxay ujeeddadiisu?	Yaa soo saara goormaase la soo saaraa?	Sidee dokumentigani gacan uga gaystaa geeddi-socodka qorshaynta iyo miisaaniyad dejinta?
		<p>Degmada ayna taageeraan injineerrada Hawlaha Guud waxaa loo adeegsadaa mashaariicda waaweyn ee uu kharashkoodu ka badan yahay US\$ 100,000, tusaale ahaan waddooyinka laamiga ah. Mashaariicda kale ee uu kharashkoodu ka yar yahay lacagtaa waxaa loo baahan yahay in loo adeegsado foomka qiimeynta mashaariicda.</p>	
<p><b>Qorshaha Hawlgallada iyo Dayactirka (H&amp;D)</b> Qorshe ku saabsan qiyaasta kharashka hawlgallada iyo dayactirka ee hawlaha horumarinta iyo adeegyada ee la soo jeediyay in laga fuliyo degmada.</p>	<ul style="list-style-type: none"> <li>Qorshaha H&amp;D waxa uu hubin doonaa in wixii hanti cusub ah si wanaagsan miisaaniyad loogu qoondeeyo, si hantidaasi ugu shaqayso sidii loogu talagalay marka la dhamaystiro. Tusaale ahaan, xarun caafimaad waxa ay u baahanaysaa lacag ku filan shaqaalaha, qalabka iyo dayactirka, kuwanina waa in ay ka muuqdaan qorshaha H&amp;D.</li> </ul>	<p>Qorshaha H&amp;D waxa diyaariya bisha Sebtember ee sanadkasta, iyada oo qayb ka ah Dib-u-eegista Guud ee Hawlaha Horumarinta Degmooyinka, si wixii hawl qorshaysan sanadka soo socda si wanaagsan loogu sameeyo miisaaniyad dhanka H&amp;D .</p> <p>Kharashaadka H&amp;D ma waxa ay tahay inay u qiyaasato waax kastaa</p>	<ul style="list-style-type: none"> <li>Hawlaha waxa ay ka muuqan karaan miisaaniyadda degmada iyada oo tixgalin ku filanna la siinayo kharashaadka hawlgallada iyo dayactirka hantida ama bixinta adeegyada.</li> </ul>

Waa maxay?	Waa maxay ujeeddadiisu?	Yaa soo saara goormaase la soo saaraa?	Sidee dokumentigani gacan uga gaystaa geeddi-socodka qorshaynta iyo miisaaniyad dejinta?
		hawlaha la soo jeediyay, intaa ka dibna ay isku wada darto Waaxda Maamulka iyo Lacagtu?	
<b>Warbixinta Lafagurka wax-ku-oolnimada Kharashaadka Degmada</b>	Warbixintani waxa ay ka dhalataa Dib-u-eegista Kharashaadka Dowladda. Waxay lafagurtaa waxqabadka degmada dhanka hirgalinta miisaaniyaddii sanadkii tagay iyo qiimaaynta kharashaadka marka la eego ujeeddooyinkii iyo bartilmaameedyadii dejisnaa.	Kani waa waxa ka soo baxa dibu eegista kharashaadka dowladda, oo la sameeyo markasta bisha September.  Warbixinta waxa diyaarisa Waaxda Maamulka iyo Lacagta iyo Waaxda Qorshaynta.	T Dokumentigani waxa uu gacan ka gaystaa qorshaynta iyo miisaaniyad dejinta sanadka soo socda, isaga oo sidoo kalena sooci kara wixii horumar la sameeyey dhanka sidii loo isticmaalay iyo halkii lagu isticmaalay ilihii kheyraadka.
<b>Wareegtada Miisaaniyadda</b>	<ul style="list-style-type: none"> <li>Waxa la soo saaraa sanadkasta, waxa ku qoran awaamiirta bilowga ah ee haga miisaaniyad-dejinta degmada ee sanadka soo socda.</li> <li>Waxa ku jira awaamiir ku socda dowladaha hoose oo ku saabsan qaabka miisaaniyadda loo qoondaynayo , tusaale ahaan misaaniyadda lagu kharashgaraynayo mushahaarooyinka, kharashaadka hawlgallada, iyo mashaariicda horumarinta.</li> </ul>	Dokumentigan waxa diyaarisa Wasaaradda Maaliyadda waxaanay dirtaa bisha Bartamaha bisha Sebtember, Shirka Miisaaniyadda ka hor.	Wareegtada miisaaniyadda waa in ay ku qornaadaan tirooyin tilmaan ah ee sheegaya lacagaha dpwladada dhexe siin karto degmada, iyo sidoo kale tilmaanta sida loo diyaarinayo miisaaniyadda sanadka soo socda.
<b>Odoroska Dakhiga iyo Kharashaadka</b>	<ul style="list-style-type: none"> <li>Dokumentigani waxa uu bixiyaa odoros macquul ah oo ku saabsan dakhliga degmadu ka helayso Dowladda Dhexe,</li> </ul>	Dokumentigan waxaa diyaariya Waaxda	Qiyaasahan waxa si toos ah loogu adeegsan karaa diyaarinta

Waa maxay?	Waa maxay ujeeddadiisu?	Yaa soo saara goormaase la soo saaraa?	Sidee dokumentigani gacan uga gaystaa geeddi-socodka qorshaynta iyo miisaaniyad dejinta?
	<p>iyo sidoo kale ka ay ka heli karto Ilaheeda Dakhli ee u gaarka ah.</p> <ul style="list-style-type: none"> <li>• Dokumentiga waxa kale oo ku jira qiyaasta kharashaadka sanadka soo socda, oo ay ku jiraan kharashaadka soo noqnoqda iyo kharashaadka raasamaalka iyo meelaha lacagta hadda loo isticmaalo.</li> </ul>	<p>Maamulka iyo Lacagta, iyada oo xog ka helaysa Agaasimaayaasha Waaxaha dhanka qiyaasta kharashaadka waaxahooda. Waxa la diyaariyaa bisha Sebtember sanad kasta.</p>	<p>miisaaniyadda degmada.</p>
<p><b>Miisaaniyad-Sanadeedka Degmada</b></p>	<ul style="list-style-type: none"> <li>• Miisaaniyadda Guud ee Degmada waxaa ay ka kooban tahay odoroska miisaaniyad waaxeedyada.</li> <li>• Waxa jira saddex qaybood oo miisaaniyadda degmadu guud ahaan ka koobantahay: <ul style="list-style-type: none"> <li>○ Miisaaniyadda dakhliga</li> <li>○ Miisaaniyadda soo noqnoqota</li> <li>○ Miisaaniyadda horumarinta</li> </ul> </li> </ul>	<p>Dokumentigan waxa diyaariya Guddida Miisaaniyadda, iyaga oo gacan ka helaya Waaxda Maamulka iyo Lacagta bisha Oktoobar.</p>	<p>Miisaaniyaddu waxa ay tilmaantaa dhammaan kharashaadka degmada ee sanadka soo socda, waxaana ay bixisaa aasaaska qorshe hawleedka sanadka ee degmada.</p>
<p><b>Qorshe-Hawleedka Sanadlaha ah ee Degmada</b></p> <p>Raasamaalka iyo Kharashaadka soo soo noqnoqda</p>	<ul style="list-style-type: none"> <li>• Qorshe-Hawleedku waa qoraal sheega hawlaha degmadu ay dooneyso in ay qabato sanadka soo socda, khayraadka hawl kastaa u baahan doonto, iyo sidoo kale natiijada hawl kasta.</li> </ul>	<p>Kuwan waxa la soo saaraa bisha Oktoobar waxaana lagu lifaaqaa Miisaaniyadda Segmada.</p>	<p>Qorshe hawleedka waa in si joogto ah loo tixraaco inta lagu guda jiro fulinta miisaaniyadda, si loo hubiyo in hawlaha qorshaysani qabsoomaan laguna fuliyo lacagtii loogu talagalay iyo jadwalkii loo dejiyey.</p>
<p><b>Warqadda Qaabka Guud ee Miisaaniyadeed ee</b></p>	<ul style="list-style-type: none"> <li>• DBFP waa agab suuragaliya qorshayn iyo miisaaniyad dejin iskudhafan marka la samaynayo istiraatiijiyadda miisaaniyadeed ee shanta sanno ee</li> </ul>	<p>Cutubyada 1-3 ee dokumentigani waxa la diyaariyay Luuliyo-</p>	<p>Dokumentigani waxa uu xog siiyaa guud ahaan qorshaynta waxaanu faa'iido u leeyahay diyaarinta</p>

Waa maxay?	Waa maxay ujeeddadiisu?	Yaa soo saara goormaase la soo saaraa?	Sidee dokumentigani gacan uga gaystaa geeddi-socodka qorshaynta iyo miisaaniyad dejinta?
<p><b>Degmada (DBFP)</b></p> <p>Dokumenti soo kooba arrimaha muhiimka ah ee geeddi-socodka qorshaynta iyo miisaaniyad dejinta.</p>	<p>degmada.</p> <ul style="list-style-type: none"> <li>Waxa ku jira dakhliga iyo waxqabadka waaxaha, tilmaan saddex sanadle ah oo wixii loo qoondeeyey waaxda, qorshe hawleed sanadle ah, iyo qiyaasta miisaaniyadda.</li> <li>Waxa ay hubisaa u hoggaansamidda waxyaabaha qaranku ahmiyadda siinayo waxaana ay gacan ka geeysataa dejinta miisaaniyad macquul ah iyada oo loo marayo qaab hawleed miisaaniyadeed oo sanado badan ah.</li> <li>Taa waxa dheer, waxa ay gacan ka geeysataa in diiradda la saaro natiijadii loo baahnaa ee kharashaadka iyada oo la dejinayo ujeeddooyin, bartilmaameedyo lana cabbirayo waxqabadka.</li> </ul>	<p>Agoosto, qiyaastii xilliyada uu socdo shirka dib-u-eegista Qaabka Guud ee Horumarinta Degmada. Dokumentiga waxa la dhamaystiraa bishii Nofember, iyada oo lagu darayo Cutubyada 4-5, eeay ku diyaariyeen Waaxaha Qorshaynta, Maamulka iyo Maaliyadda iyo Guddiga Fulintu. Sidoo kale, xubnaha guddiga miisaaniyadda iyo Agaasimayaasha Waaxaha ayaa ka mas'uul ah diyaarinta miisaaniyadaha waaxaha.</p>	<p>dokumentiyada kale sida:</p> <ul style="list-style-type: none"> <li>Saadaasha dakhliga iyo kharashaadka</li> <li>Warbixinta Lafagurka kharashaadka Degmada</li> </ul>
<p><b>Qorshaha Wax-soo-iibsigaa</b></p>	<ul style="list-style-type: none"> <li>Qorshaha wax iibsigu/hanashadu waxa uu sheegaa dhammaan waxyaabaha loo baahanyahay in la soo iibsado, oo ay ku jiraan alaabaha, shaqooyinka iyo adeegyada.</li> </ul>	<ul style="list-style-type: none"> <li>Sidan waxa yeela waax kasta marka miisaaniyadda la ansixiyo ka dib (Nof-Disembar).</li> </ul>	<p>Marka qorshaha wax iibsi la dejiyo, degmooyinku waxa ay bilaabi karaan in ay hirgeliyaan hawlaha ku jira qorshe hawleedkooda.</p>

## Jaantuska 5aad: Tallaabooyinka Diyaarinta Qaabka Guud ee Horumarinta Degmada "DDF" (Sanadka 1aad oo keliya)

### DDF 1 & 2. Qorshee Geeddi-socodka DDF iyo La-shaqeynta Bulshada (Maarij)

Hawlaha, doorarka iyo wakhtiga loogu talagalay in lagu diyaariyo DDF waa in si cad loo sheego isla markaana la isku afgarto. Waxa ku jira:

- Hay'adihii dabogalka ku samayn lahaa geeddi-socodkadiyaarinta DDF.
- Wacyigalinta bulsho ee la samaynayaa nooca ay noqonayso si loo hubiyo in faham laga yeesho hadafka iyo geeddi-socodka DDF?
- Sida dadweynuhu uga qaybgalayo iyo hababka lagu hubinayo ka qaybgalkaas?
- Jadwalka dhanka wakhtiga ee diyaarinta DDF.
- Cidda arrin masuuliyadi ka saarantahay?
- Qaabka korjoogtaynta loogu samaynayo geeddi-socodka

### Hawlaha soo socda mar ayaa ay wada dhici karaan (Abril-Juunyo)

#### DDF 3a & b. Xogta Degmada

Dokumenti lagu ururinayo Xogta Degmada ayaa la diyaarinayaa, kaasoo xog guud ka bixinaya xaaladda busho iyo tan dhaqaale ee haatan jirta. Istiraatijiyadda horumarinta dhaqaale ayaa la diyaarinayaa iyada oo qayb ka ah hawshan

#### DDF 3c. La-tashiga Bulshada

In xog laga ururiyo bulshada, la eego himilada bulshada iyo tilmaanta waxyaabaha muhiimka u ah bulshada 5ta sanno ee soo socda.

#### DDF 3d. Isdhexgalinta Qorshayaasha qaran iyo kuwa Waaxeed

Waxyaalaha waaxda iyo qaranka muhiimka u ah ayaa la tilmaamayaa waana in la tixtaliyo arrimahan marka la tilmaamayo waxyaalaha muhiimka u ah degmada dhanka DDF.

### DF 4. Qorista iyo Dibu eegista dokumentiga DDF (Juunyo)

Xogta halkaa kore ka soo baxday waxa loo adeegsadaa diyaarinta DDF qabyo qoraalka ah, waxaana ka mid ah:

- Himilada degmada, taasoo qeexda halka degmadu rabto in ay ku gaarto 5 sanno.
- Meelaha muhiimka u ah degmada ee ay tahay in xoogga la saaro 5ta sanno ee soo socda.
- Ujeeddooyinka, tilmaamaya horumarka ay tahay in laga sameeyo arrimaha latilmaamay.
- Meelaha muhiimka ay tahay in wax laga qabto, ogow in kuwani yihiin arrimo guud ee aanay ahayn mashaariic gaar ah.
- Yoolalka iyo tilmaamayaasha, kuwani waa kuwa looga qiyaas qaadanayo guusha hab waafaqsan ujeeddooyinkii la dejiyay.

### DDF 5. Hubinta iyo Gebogabaynta DDF-ka (Jul)

Golayaasha Tuulooyinka waxa la siiyaa fursad ay ku hubin karaan warbixinna kaga soo celin karaan dokumentiga DDF iyada oo loo qabanayo shir uu soo qabanqaabiyay Golaha Degmadu.

DDF waxa wax-ka-beddel loogu sameeyaa hab waafaqsan wixii ka soo baxa shirkaa, iyada oo markaa uu sidaa ku qaadanayo Golaha Degmada kuna baahinayo.

## Qaabdhismeedka Horumarinta Degmada 5nta Sano oo Faahfaahsan

### Sheeko Guuleed: Qaabdhismeedka Horumarinta Degmada Abyan

DDFka waxaa loo sameeyey in uu noqdo qaabdhismeedka qorsheynta 5nta sano ee degmada, oo iftiiminaya mudnaanaha horumarinta ee 5nta sano ee soo socota oo ku salaysan xogta iyo aragtiyada bulshada.

Waa muhiim in qeybaha kale ee ka shaqeeya horumarinta ee degmada yimaadaa ay hubiyaan in tallaabooyinka ay ku salaysnaadaan DDFta degmada, si ayney u dhicin is dul-fuul dhinaca waxqabadka ahi. Tusaale ahaan, sababtoo ah adeegyada qaarkood ee la dhisey ayaa ah kuwa isku dhow-dhow (Sida laba goobood oo caafimaad oo isku xaafad ama tuulo ah), sababtoo ah si wanaagsan looguma dhaqmin Qaabdhismeedka horumarinta degmada. Degmada Abyan si guul leh ayey u wajahdey arrintaan, sida hoos ku xusan.

Degmada Abyan ma ahayn mid xaqiijin karta maalgelinta qaar ka mid mudnaanaha ku jira DDFta. Hay'ad horumarineed ayaa timi Degmada Abyan, waxayna soo bandhigtey daneynteeda maalgalined, iyo meelaha ay rabto in ay degmada ka caawiso. Si kabta ha ahaatee maamulkii degmadu waxuu u soo bandhigey DDFta degmada iyo mudnaanaha u qorsheysan oo aan maalgelinta haysan. Gudoomiyii wuxuu yiri, haddii aad dooneysaan in ku shaqeysaan qaabdhismeedka horumarinta degmada waxaad fulin kartaan wixii aad doontaa. Hay'adii horumarintuna waxay ka qaadey DDFta waxyaabihii ay rabtey in degmada ka caawiso.

## Qaabka Guud ee Horumarinta Degmada Ee 5ta Sanno

### DDF 1. Qorshaynta Geeddi-socodka DDF

<b>Goorta:</b>	Maarso (Sanadka 1aad oo keliya)	
<b>Hadafka:</b>	<ul style="list-style-type: none"> <li>Cayimidda mas'uuliyadaha iyo wakhtiga lagu diyaarinayo DDF-ka.</li> <li>Tilmaamidda/cayimidda hawlaha wacyigalinta bulshada la xiriira ee ay tahay in la qabto ka hor diyaarinta DDF, si bulshadu u fahanto hawsha la galayo.</li> <li>Ka heshiinta qaybaha Geddi-socodka DDF, oo ay ku jirto Xogta Degmadu, LED, La-tashiga Bulshada, iyo hubinta dhexgalinta Qorshayaasha Qaran/Gobol/Waax.</li> </ul>	
<b>Natiijada:</b>	Qorshe la isku wada raacsanyahay oo wata wakhtigiisa, masuuliyadaha iyo hawlaha wacyigalinta bulshada.	
<b>Cidda:</b>	Duqa	Ayaa fududaynaya kulanka lagu qorshaynayo diyaarinta geeddi-socodka DDF
	Xoghayaha Fulinta	Ayaa ka qaybgelaya kulanka lagu qorshaynayo diyaarinta Geeddi-socodka DDF.
	Guddi-hoosaadka	Ka qaybgalka kulanada lagu qorshaynayo diyaarinta geeddi-socodka DDF.
	Waaxda Qorshaynta	Diyaarinta qorshaha diyaarinta geeddi-socodka DDF
	Madaxda waaxaha	Ka qaybgalka kulanka lagu qorshaynayo diyaarinta geeddi-socodka DDF
	WAG	Casuumidda wakiilada ay khusayso si ay uga qaybgalaan kulanka.

### DDF 2. Ku-wacyigalinta Bulshada ee geeddi-socodka DDF

<b>Goorta:</b>	Maarso (Sanadka 1aad oo keliya)	
<b>Hadafka:</b>	<ul style="list-style-type: none"> <li>Samee hawlo la xidhiidha wacyigalinta bulshada ka hor diyaarinta DDF, si bulshadu u fahanto hawsha bilaabmaysa, waqtiga ay qaadaneysa, iyo sida dadku uga qayb qaadanayo.</li> <li>Si gaar ah waa in awooda loogu saaro in wacyigaliyta ay dhiirrigeliso in haweenka, dhalinta iyo kooxaha kale ee laga tiro badanyahay ka qayb galaan wadatashiyada bulsho iyada oo qayb ka ah geeddi-socodka DDF.</li> </ul>	
<b>Natiijada:</b>	Qorshe wacyigalin bulsho in la sii fuliyo xilli ka horaysa wadatashiga lala yeelanayo bulshada.	
<b>Cidda:</b>	Guddi-hoosaadka	La-socodka hawlaha wacyigalinta bulshada ee ku saabsan DDF iyo ka gacansiinta Waaxda Arrimaha Bulshada hawlahaan.

Waaxda Arrimaha Bulshada	Diyaarinta iyo fulinta hawlaha wacyigalinta ku saabsan DDF, iyaga oo adeegsana agabka habboon sida: <ul style="list-style-type: none"> <li>• Ogaysiisyo tvga iyo raadiyaha ka baxaya</li> <li>• Wargalino lagu dhejiyo goobaha caamka ah</li> <li>• Farriimaha moobilka</li> <li>• Websaytyada iyo wargeysyada degaanka</li> </ul> Ogow in habka la adeegsanayo ay tahay in lagu gaaro haweenka, dhalinta iyo kooxaha laga tiro badanyahay ee bulshada ka tirsan.
Golayaasha/Guddiyada Tuulooyinka iyo Kooxaha La Socodka Bulshada	Gacansiinta hirgalinta hawlaha wacyigalinta bulshada.
Dadweynaha Guud ahaan	Waxa ay faham wanaagsan ka qabi doonaan geeddi-socodka DDF soo socda iyo doorka bulshada ee dhanka la tashiga, iyada oo tanina ka dhalanayso hawlaha wacyigalinta.

### DDF 3a. Xogta Degmada

<b>Goorta:</b>	Aabriil-Juunyo (Sanadka 1aad oo keliya)	
<b>Hadafka:</b>	<ul style="list-style-type: none"> <li>• Uruurinta xog aragti guud ka bixin karta xaaladda dhaqan dhaqaale ee degmada.</li> <li>• Meelaha muhiimka ah waxa ka mid ah: Xogta Bulsho, Xogta Dhaqaale (oo ay ku jirto xogta ganacsiyada degaanka), Xogta Deegaanka, Qaab-dhismeedka Magaalada, Maamulka Dowladeed, Gaadiidka, iyo Kaabayaasha Farsamo.</li> </ul>	
<b>Natiijada:</b>	Dokumentiga Xogta Degmada, kaasoo la soo koobay si loogu daro DDF isla markaana loogaga shidaal qaato meelaha xoogga la saarayo 5ta sano ee soo socda oo ah muddada DDF.	
<b>Cidda:</b>	Waaxda Qorshaynta	<ul style="list-style-type: none"> <li>• Mas'uuliyadda geeddi-socodka xog ururinta.</li> <li>• Ururinta, hubinta iyo isku dubbaridka xogta laga helo waaxaha iyo hayadaha kale.</li> <li>• Diyaarinta iyo qorista Xogta Degmada.</li> </ul>
	Guddi-hoosaadka	La-socodka diyaarinta Xogta Degmada
	Agaasimayaasha Waaxaha Degmada	Bixinta xogta lagu darayo dokumentiga Xogta Degmada.
	Duqa/Xoghayaha Fulinta	Hagista ururinta xogta loogu talogaley dokumentiga Xogta Degmada.
	Xog Ururiyayaasha	In xog laga ururiyo ilo kala duwan cid kale oo dibadeed ayaa loo xilsaari karaa haddii loo baahdo.
<b>Tababarada La Xiriira:</b>	<i>Buugga 1aad ee DDF 5ta sanno :—Xogta Degmada</i>	

## DDF 3b. Horumarinta Dhaqaalaha Degaanka

<b>Goorta:</b>	Abriil-Juunyo (Sanadka 1aad oo keliya)	
<b>Hadafka:</b>	<ul style="list-style-type: none"> <li>• Horumarinta Dhaqaalaha Degaanku (LED) waa hab laga wada qayb galo, kusalaysan degaan oo dowladaha hoose, ganacsiyada, iyo bulshada madaniga ahi si wada jir ah ugaga wada shaqeeyaan adeegsiga ilaha maxalliga ah iyo itaalka si loo abuuro shaqo iyo dakhli.</li> <li>• Agabada LED-ka sida Qiimaynta Dhaqaalaha Degaanka (LEA) waxaa loo qaabeeyey in ay muujiyaan suuragalnimada kobaca dhaqaale ee degaanka, iyo sidii arrimaha dhaqaalaha muhiimka u ah loogu dari lahaa DDF ee 5ta sanno.</li> <li>• Ogow in uu jiro is dul fuul dhanka xogaha loo ururinayo degmada iyo xogta la ururinayo iyada oo qayb ka ah qiimaynta dhaqaale ee dagmada (LEA). Arrimaha waa in hore looga sii wada shaqeeyo, si loo hubiyo in aan xog isku mid ah laba goor la ururin.</li> </ul>	
<b>Natiijada:</b>	Istiraatijiyada LEA iyo LEDga, kuwaasoo labaduba wax ku kordhiya DDF.	
<b>Cidda:</b>	Waaxda Qorshaynta	<ul style="list-style-type: none"> <li>• Fududaynta wada xaajoodiyada ku saabsan Horumarinta Dhaqaalaha Degaanka (LED) ee dhex mara ganacsiyada iyo ururada bulshada rayidka ah (sida hay'adaha shaqaalaha, shaqo bixiyayaasha, ururada bulshada)</li> <li>• Samaynta lafagurka iyo xog ururinta Horumarinta Dhaqaalaha Degaanka (LED).</li> <li>• La shaqaynta bulshada marka la dejinayo istiraatijiyadda Horumarinta Dhaqaalaha Degaanka.</li> <li>• Hubinta in qaybaha istiraatijiyadda qiimaynta lagu daro DDF.</li> </ul>
	Gudd-hoosaadka	Fududaynta wada xaajoodiyada ku saabsan Horumarinta Dhaqaalaha Degaanka ee ganacsiyada iyo ururada bulshada rayidka ah (sida hay'adaha shaqaalaha, shaqo bixiyayaasha, ururada bulshada ku saleysan).
	Duqa/Xoghayaha Fulinta	<p>Hagista waxa DH ku darayso geeddi-socodka Horumarinta Dhaqaalaha Degaanka, oo ay ku jirto:</p> <ul style="list-style-type: none"> <li>• Qabashada shirar lagu bixinayo wacyigalinta ku saabsan qiimaynta oo lala yeelanayo ganacsiyada muhiimka ah iyo hogaamiyayaasha ururada bulshada si loo gaarsiiyo qaabka qiimaynta ee horumarinta dhaqaalaha.</li> <li>• Fududaynta shirarka qiimaynta si looga doodo isla markaana loo qorsheeyo hawlaha.</li> <li>• Abaabulka ilaha iyo isku dubbaridka lacagaha dowladda, maalgalinta ganacsiyada iyo ilahaha dadwaynaha si kor loogu qaado wax ku oolnimadadooda hawlaha qorshaysan.</li> <li>• Samaynta qiimaynta hawlaha qorshaysan.</li> <li>• Lasocodka iyo lafagurka waxqabadyada dhaqaalaha maxalliga ah (sida xaaladda maalgashi, helidda shaqaalaha iwm).</li> </ul>

	Bulshada Rayidka ah /NGO-yada	Ka qaybgalka wadaxaajoodiyada LED IYO shirarka Qiimaynta LED
	Ganacsiyada Gaarka Loo Leeyahay	Kala qaybqaadashada DH wadaxaajoodiyada dhexmaraya Dowladda iyo Ganacsiyada gaarka ah ee kusaabsan LED iyo shirarka LED, si loo fiiriyo loona hirgaliyo tallaabooyin la taaban karo oo gacan siinaya deegaan dhiirigalinaya ganacsiga. Tusaale ahaan, meelaha sida diwaangalinta ganacsiyada, waraaqaha oggolaanshaha dhismayaasha, helidda koronto, helidda deyn, bixinta cashuuraha, ilaalinta maalgaliyayasha, iyo dhaqangalinta qandaraasyada.
<b>Tabarrada La Xiriira:</b>	<i>Horumarinta Dhaqalaha Degaanka : Aaladda Waxqabtaha / Local Economic Development: Practitioner’s Toolkit</i>	

### **Geeddi-socodka LED oo faahfaahsan**

Geeddi-socodka LED ee degmadu waa habka Igu xoojinayokoboca dhaqaalaha ee heer degaan si kor loogu qaado dakhliga degmada iyo shaqo-helidda dhallinyradeed. Geeddi-socodka LED waxaa uu ka kooban yahay 7-da tallaabo ee soo socda:

Tallaabada 1aad. Dowladda Hoose ayaa looga baahan yahay in ay mas’uuliyadaha LED u xilsaarto sarkaalka iyo guddi.

Tallaabada 2aad. In la qoonsado daneeyayaasha iyo in al dhiso koox daneeyayaal ah oo dowladda hoose ala shaqeyya waxa loo baahan yahay in la sameeyo si loo dhiirrigeliyo LED.

Tallaabada 3aad. In la soo ururiyo malcuumaad iyo xog sida tirakoobka shaqada si loo fahmo dhaqaala degaanka ee waqtigan iyo xaaladda shaqo-helidda, waxbarashada iyo xirfadaha.

Tallaabada 4aad. In dadweynaha laga qaybgeliyo shirar lagu siinayomacluumaad iyo fikrado ku saabsan baahiyaha, arrimaha iyo fursadaha lagu kobcin karo dhaqaalaha degaanka.

Tallaabada 5aad. Lafoguris ay daneeyayaashu ku sameeyaan qaabka ay ku socoto hawsha qalaaha ee degaanka iyo arrimaha saameynta ku leh wanaagsanaantiisa iyo xumaantiisa.

Tallaabada 6aad. Dhammaan daneeyayaashu waa in ay wax ku biiriyaan nakhsahdeynta qorshe-hawleedyada iyo in mas’uuliyadaha hirgelinta loo kala qoondeeyo.

Tallaabada 7aad. Dowladda hoose waa in ay si joogto ah u ururisaa macluumaad iyo xog si ay kooxda daneeyayasha awood ugu siyaan in la socdaan ayant aageeraan fulinta qorshe-hawleedka.

**Macluumaadka lagu rururiyo Tallaabooyinka 3-7 waa ay sidoo lagu muujiyaa DDF-ka degmada iyo sidoo kale geeddi-socodka qorshaha iyo miisaaniyad-sanadeedda.**

### Sheeko guul tilmaameysa: Sida geeddi-socodka LED uu gacan uga geysan karo – dib-u-soo-nooleynta waaxda kalluumeysiga ee degmada Abyan

Degmada Abyan waa degmo xeebeed waxaana dadka deggan ay inta badan ku nool yihiin kallumeysi oo ah wax-soo-saarkooda ugu weyn ee ay ku nool yihiin. Kalluumeysatada degaanka ayaa waxaa curyaamiyey culeysyo ka dhashey qaab-dhismeedka dhulka degaanka iyo kuwo la xiriira kaabayaasha kuwaas oo xakameeyey awoodda ay u leeyihiin in ay soo jilaabtaan kalluun dad ku filan ayna suuq ugu helaan badeecadahooda. In kasta oo degmadu ay leedahay mid ka mid ah biyaha ugu weyn ee laga kalluumeysan karo ee xeebaha Soomaaliya, haddana wax-soo-saarka ayaa yaraa waxaana arrintan waxaana arrintaa gebi ahaanba sabab u ahaa in aan loo haynin suuqyo degdeg lagu gaari karo maaddaama ay tuuladu fog tahay, ay waddooyinkooduna liitaan, in aan ey jirin tas-hiilaad lagu hayo laguna qaboojiyo kalluunka iyo qalabka kalluumeysiga oo aan dad ku filneyn.

Sanadkii 2014kii, ayaa degmada iyo madasha LED waxaa ay qaabeeyeen mashruuc wax ka qabta dhibaatooyinkaas isaga oo taageerey abuurista iskaashato kalluumeysi oo maareysa arrimaha kalluumeysatada, sida keydka iyo suuq-geynta, bixisa qalab kalluumeysi oo ka wanaagsan kan hadda si loo sii wanaajiyo wax-soo-saarka oo soo iibisana baabuur qaboojiye leh oo kalluunka lagu geeyo suuqyada. Mashruuca ayaa isu keeney kalluumeysato 100 ah oo markoodii hore shakhsi shakhsi u shaqeysan jirey waxaana uu u qaabeeyey iskaashato ahaan, waxaa uu siiyey tababarro ku saabsan sida ay ugu shaqeynayaan iyaga oo urur mideysan ah, iyo sidoo kale in ay qaab dhismeed hoggaan soo xushaan si uu u kormeero maareynta arrimaha ururka.

### DDF 3c. La-tashiga Bulshada

<b>Goorta:</b>	Abriil-Juunyo (Sannadka 1aad oo keliya)	
<b>Hadafka:</b>	Fududaynta geeddi-socodka samaynta himilada ee bulshada dhexdeeda ka dhacda, si aragti looga qaato caqabadaha ugu waawayn, baahiyaha iyo arrimaha bulshadu danaynayso muddada fog si ay bulsho ahaan iyo dhaqaale ahaanba ugu horumaraan.	
<b>Natiijada:</b>	Qaabka Qiimaynta Waxyaabaha Muhiimka u ah Tuulada/Kutlada	
<b>Cidda</b>	Waaxda Arrimaha Bulshada	<ul style="list-style-type: none"> <li>• Isku dubbaridka hawlaha wadatashiyada bulshada.</li> <li>• Hubinta in haweenka, dhalinta iyo kooxaha kale ee laga tiro badanyahay si ku filan loo matalo inta geeddi-socodka wadatashiyada</li> </ul>

		bulshadu socdo.
	Guddi-hoosaadka	<ul style="list-style-type: none"> <li>Gacansiinta geeddi-socodka wadatashiyada bulshada</li> </ul>
	Waaxda Qorshaynta	<ul style="list-style-type: none"> <li>Gacansiinta geeddi-socodka wadatashiyada bulshada</li> </ul>
	Golayaasha/Guddiyada tuulada iyo Kooxaha La-socodka ee Bulshada	<ul style="list-style-type: none"> <li>Isku dubaridka abaabulka bulshada si ay uga qayb galaan wadatashiyada bulshada.</li> <li>Hubinta in haweenka, dhalinta iyo kooxaha kale ee laga tiro badanyahay si kulan loo matalo inta hawlaha wadatashiyada bulshadu socdaan.</li> </ul>
	Tababarka Tababarayaasha oo Heer Degmo ah (ka socda Waaxda Arrimaha Bulshada)	<ul style="list-style-type: none"> <li>Samaynta latashiyada bulshada, iyo tababarka Guddiyada Tuulooyinka iyo Guddiyada Korjoogteynta ee Bulshada inta lagu guda jiro la-tashiga bulshada.</li> </ul>
<b>Tababarka Khuseeya:</b>	<i>The 5-year DDF: Module 2—Community Consultations</i>	

### DDF 3d. Iskudarka Qorshayaasha Qaran iyo Kuwa Qaybta

<b>Goorta:</b>	Abriil-Juunyo (Sannadka 1aad oo keliya)	
<b>Hadafka:</b>	Hubinta in waxyaabaha muhiimka u ah DDF in la waafajiyo Qorshayaasha Qaran iyo kuwa Qaybta iyo taa ka soo horjeedkeeda.	
<b>Natiijada:</b>	Dokumenti koobsanaya waxyaalaha qaranka iyo qaybuhu xoogga saarayaan, kaasoo haga degmooyinka marka ay diyaarinayaan waxyaabaha ay ahmiyadda siinayaan dhanka DDF.	
<b>Cidda:</b>	Duqa/Xoghayaha Fulinta	<ul style="list-style-type: none"> <li>La tashi in uu la sameeyo daneeyayaasha heer Qaran/Qaybeed/Gobol dhanka arrimaha ahmiyadda la saarayo qaran ahaan iyo shuruudaha wasaaradaha qaybta si loogu daro DDF.</li> </ul>
	Waaxda Qorshaynta	<ul style="list-style-type: none"> <li>Diyaarinta dokumenti kooban (arrimaha muhiimka ah heer Qaran iyo Qaybtaba), tilmaanta waxyaalaha muhiimka u ah qaranka/qaybta/gobolka, iyada oo lagu salaynayo daraasad iyo wadatashi.</li> </ul>
	WAG	<ul style="list-style-type: none"> <li>Bixinta la socod iyo gacansiinta habraaca, oo ay ku jirto fududaynta wadatashiyada degmada, wasaaradaha qaybta iyo hayadaha heer gobol.</li> </ul>
	Wasaaradda Qorshaynta	<ul style="list-style-type: none"> <li>Ka qaybgalka wadatashiyada iyo lawadaagista degmooyinka qorshayaasha qaran ee dhanka horumarka iyo dokumentiyada kale ee khuseeya.</li> </ul>

	Wasaaradaha Qaybta	<ul style="list-style-type: none"> <li>• Bixinta xogta waxyaalaha qaybtu ahmiyadda siinayso dhanka sanduuqa.</li> <li>• Cusboonaysiinta qorshahooda istaraatijiyaded ee waaxda meesha looga baahdo si loogu saleeyo mudnaanaha DDF.</li> </ul>
	Maamulka Gobolka	<ul style="list-style-type: none"> <li>• In wixii tilmaan ah ee dhanka qorshaynta heer gobol ah la siiyo degmada, gaar ahaan isu xidhka arrimaha muhiimka u ah degmooyinka kala duwan.</li> </ul>
<b>Tababarrada Khuseeya:</b>	<i>The 5-year DDF: Module 3—Preparing the DDF</i>	

## DDF 4. Diyaarinta iyo Dib-u-eegista Qabyo-qoraalka DDF

<b>Goorta:</b>	Juunyo (Sanadka 1aad ee keliya)	
<b>Hadafka:</b>	Si la isugu dubbarido xogta laga soo uruurshay dokumentiga Xoga Degmada, LED, La-tashiyada Bulshada iyo Qorshayaasha Qaran/Qaybeed, iyo Diyaarinta DDF 5ta sanno.	
<b>Natiijada:</b>	Dokumenti DDF ah oo qabyo-qoraal ah	
<b>Cidda:</b>	Guddi-hoosaad	<ul style="list-style-type: none"> <li>• Samaynta himilada degmada</li> <li>• Tilmaanta waxyaalaha ahmiyadda la siinayo iyada oo lagu salaynayo xogta laga helay waaxda qorshaynta.</li> <li>• Dib-u-eegista dokumentiga DDF ee qabyo qoraalka ah.</li> </ul>
	Duqa/Xoghayaha Fulinta	<ul style="list-style-type: none"> <li>• Lasocodka diyaarinta qoraalka qabyada ah ee DDF.</li> <li>• Dibu eegista qoraalka qabyada ah ee DDF.</li> </ul>
	Agaasimayaasha Waaxaha Degmada	<ul style="list-style-type: none"> <li>• Tilmaanta arrimaha muhiimka ah iyo meelaha waxlaga qabanayo.</li> <li>• Dibu eegista qoraalka qabyada ah ee DDF</li> </ul>
	Waaxda Qorshaynta	<ul style="list-style-type: none"> <li>• Diyaarinta qoraalka qabyada ah ee DDF.</li> <li>• Diyaarinta xogta Guddi-hoosaadka Dhaqaalaha iyo Horumarintu u baahanyihiin si ay go'aano u qaataan.</li> <li>• Diyaarinta ujeedooyinka qabyo qoraal ah kuwaasoo ku salaysan arrimaha ahmiyadda la siinayo.</li> <li>• Diyaarinta tilmaamayaasha iyo bartilmaameedyada ujeedooyinka DDF.</li> </ul>
	WAG	<ul style="list-style-type: none"> <li>• Taageerista abuurista himilada degmada, iyo tilmaanta meelaha awoodda la saarayo, ujeedooyinka, iyo bartilmaameedyada.</li> </ul>
	Golayaasha/Guddiyada	<ul style="list-style-type: none"> <li>• Helidda nuqul qabyo= ah oo harmaris ah ka hor inta aan la isugu iman shirka hubinta</li> </ul>

	Tuulooyinka	DDF, si dibu eegis ugu sameeyaan faallana uga sameeyaan.
<b>Tababarrada Khuseeya:</b>	<i>The 5-year DDF: Module 3—Preparing the DDF</i>	

## DDF 5. Hubinta iyo Dhamaystirka DDF

<b>Goorta:</b>	Luuliyoo (Sannadka 1aad oo keliya)	
<b>Hadafka:</b>	Shir wax layskula eegayo kaasoo ay ka soo wada qaybgalayaan daneeyayaasha muhiimka ah ee degmada isla markaana lagaga faaloynayo falcelinna lagaga samaynayo DDF qabyo qoraalka ah.	
<b>Natiijada:</b>	Nuqul DDF kama dambays ah kaasoo ay ansixiyaan isla markaana meel mariyaan Golaha Degmada.	
<b>Cidda:</b>	Waaxda Arrimaha Bulshada	<ul style="list-style-type: none"> <li>• Diyaarinta iyo isku dubbaridka shirka hubinta ee wax la iskula eegayo.</li> </ul>
	Waaxda Qorsheynta	<ul style="list-style-type: none"> <li>• Gacansiinta diyaarinta shirka iyo isku dubbaridkiisa.</li> <li>• Isugaynta wixii xog laga helo shirkaasa iyo dibu eegista DDF qabyo qoraalka ah iyada oo lagu salaynayo xogtaa la helay.</li> <li>• Diyaarinta istiraatiijiyaddii lagu baahin lahaa DDF.</li> </ul>
	Duqa	<ul style="list-style-type: none"> <li>• Fududaynta shirka wax la iskula hubinayo.</li> </ul>
	Guddi-hoosaadka	<ul style="list-style-type: none"> <li>• Taageeridda shirka wax la iskula hubinayo</li> <li>• Ku soo bandhigista DDF qabyada ah shirka dhexdiisa.</li> </ul>
	Golayaasha/Guddiyada Tuulooyinka	<ul style="list-style-type: none"> <li>• Ka qaybgalka shirka hubinta iyo siinta wixii falcelin ah, iyada oo lagu salaynayo DDF qabyo qoraalka ah ee hor loogu keenay.</li> <li>• Hubinta himilada DDF, arrimaha ahmiyadda la siinayo, bartilmaameedeyada iyo tilmaamayaasha.</li> </ul>
Wasaaradda Qorshaynta/WAG/Wakiilada Gobolada	<ul style="list-style-type: none"> <li>• Ka qaybgalka shirka hubinta iyo falanqaynta.</li> </ul>	
	Golaha Degmada	<ul style="list-style-type: none"> <li>• Ansixinta iyo dhaqangalinta DDF, markii wixii wax ka badal ah lagu sameeyo ka dib.</li> </ul>
<b>Tababarrada Khuseeya:</b>	<i>The 5-year DDF: Module 3—Preparing the DDF</i>	

### **Sheeko ku saabsan guul la gaarey: Haween ka qaybgala geeddi-socodka horumarint adegmada**

Kulankii 1aad waxaan ku soo eegney qaar ka mid ah arrimaha soo wajaha haweenka iyo kooxaha la fogeeyo marka ay timaaddo ka-qaybgalka geeeddi-socodka horumarinta degmada. Haseyeeshee, degmooyinka qaar ayaa sanadihii dhowaa ay korodhey ka-qaybgalka ahweenka ee geeddi-socodka qorsheynta iyo aqoonsashada baahiyaha. Sheekadan soo socta ayaa muujineysa arrintan.

Degmada Abyan, ayaa haweenku waxaa ay si firfircoon uga qaybqaataan geeddi-socodka Qorshe-Hawleedka Sanadlaha ah, marka laga bilaabo wadatashiga ilaa hirgelinta mashaariicda. Dhab ahaantii, in ka badan 60% guddoomiyeyaasha tuulooyinka waa haween. Intaa waxaa dheer, waxaa jira sharikado ay haween madax ka yihiin oo ka-qaybgala tartamada qandaraasyada oo kuna guuleysto qandaraasyo la xiriira horumarinta kaabayaasha. Tusaale wanaagsan waxaa loo soo qaadan karaa sanadkii 2015kii in mashruuc dhagxanta marmarka ee dhismaha ay ku guulesatey sharikad ay madax ka tahay haweeney, iyo in sanadkii 2016kii mashruuc waddo laami ah ay ku guuleysatey sharikada ay madax ka tahay haweeney. Hoggaamiye tuulo ayaa sidan sheegey:

*"Haweenku waa lab-dhabarta horumarka bulsho kasta, laakiin Soomaalida ayaa ka-qaybgelintooda go'aamada arrimaha degaanka uu yar yahay, haseyeeshee arrintan ayaa si joogto ah ay u soo wanaagsanaaneysaa. Waxaa jira haween xubnho ka ah golaha degaanka degmada in kasta oo ay tiradoodu yar tahay, waxaa sidoo kale jira haween matala bulshooyinka degaanka iyaga oo ah hoggaamiyeyaal tuulo waxaana ay yihiin kuwo hadalkooda la dhegeysto arrin kasta oo laga hadlayo iyo geeddi-socod kasta oo ay fulineyso dowladda hoose, sababta oo ah waxaa loo tixgeliyaa in ay yihiin kuwo si weyn ula socda baahiyaha dhabta ah iyo arrimaha ka jira degmada."*

*Isha: Adapted from Story 2: Women's engagement in the district development process, JPLG Field Monitoring Mission Report, Jan 2017.*

# Jaantuska 6aad: Tallaabooyinka Geeddi-socodka Qorsheynta iyo Miisaaniyad-dejinta Sanadlaha ah ee Degmada (Sanadle)

Luuliyo-Agoosto

## 1-3. Wacyigleinta iyo Dib-u-eegista DDF

Waxa ku jira:

- Ku wacyigalinta bulshada geeddi-socodka miisaaniyad-dejinta iyo qorshaynta sanadlaha ah ee soo socota. Waxa loo mari karaa saxaafadda, qasab ma aha kulan dadweyne.
- Kulanno gudaha ah oo dib-u-eegis loogu sameeyo nuxurka DDF sanad kasta, si loo hubiyo in uu weli saxyahay waaqacana ka turjumayo, gaar ahaan dhanka baahiyaha degmada, beegsiyada iyo ujeeddooyinka.
- Qorshayaasha waaxaha iyo kuwa qaran waa in dib-u-eegis lagu sameeyo iyada oo qayb ka ah geeddi-socodkan.
- Xogta Q&L waa in la hubiyo, si loo eego horumarka la gaaray sanadkii tagay xagga ujeeddooyinkii iyo beegsiyada DDF. Natijadu waa in ay saamayn ku yeelato Guud ahaan Hawlaha Degmada ee Horumarka.
- Xilligan, Cutubyada 1-3 ee Qaabka Guud ee Miisaaniyadda

September

**Qorshaha H&D(Howlgelinta & Dayactirka) ee waxyaabaha la qorsheeyey waa in la diyaariyo marka la joogo tallabadan 4.**

Waxa ku jira:


- (4) -Kulan qorsheed laysugu yeero dhammaan daneeyayaasha ay khusayso, si la isula qaato dhammaan hawlaha ay tahay in ay qabato degmadu sanadka soo socda (waxa ku jira mashaariic iyo hawlo adeeg bixineed ay tahay in ay qabtaan kuwa matalayaasha kale ee horumarka ee ka hawlgala degmada sida INGOyada.)
- Hawlaha muhiimka ah ee kharashaadkooda la qiyaasay ayaa halkan lagu go'aamin karaa, gaar ahaan waaxaha wixii ka yimid.
- Qorshayaasha H&D ee hawlaha qorshaysan waa in la diyaariyo.
- (5)-Shirka Miisaaniyadda Degmada ee ay isugu imanayaan daneeyayaasha muhiimka ah waa in looga hadlo arrimaha muhiimka ah dhanka horumarka iyada oo lagu salaynayo miisaaniyadda lahayo.
- Qiyaasta waxa laga filan karo in laga helo dowladda dhexe, deeqbixiyayasha iyo NGO-yada.
- Wareegtada Miisaaniyadda ee la soo saaray ka hor Shirka Miisaaniyadda .

## 4-5. Kulan Ku saabsan Hawlaha Horumarinta Degmada & Shirka Miisaaniyadda

Waxa ku jira:

- Lafagurka kharashaadkii sanadkii tagay dhanka isticmaalka miisaaniyaddii sanadkii hore ee degmada.
- Qiimaynta kharashaadka degmada iyada oo la barbardhigayo ujeeddooyinkii iyo yoolkii waax kasta.
- Odoroska dakhliga oo loo diyaariyo dhammaan ilaha dakhliga, oo ay ku jiraan ilaha degmadu leedahay.
- Qiyaasta kharashaadka dhammaan waaxaha, qaybaha iyo unugyada, oo ay ku jiraan kharashaadka soo noqnoqda iyo meelaha miisaaniyadda loo qoondeeyey ee hawlhoodu socdaan.
- Qiyaasaha iyo odorosku waa in ay muujiyaan qiyaasta xisaabta 2 sanno oo soo socda hadday suuragaltahay

## 6-7. Dib-u-eegista Kharashaadka Dowladda & Odoroska Dakhliga iyo Kharashaadka



# Geeddi-socodka Qorsheynta Iyo Dejinta Miisaaniyad-Sanadeedka

## 1. Wacyigalinta ku saabsan Geeddi-socodka Qorsheynta iyo Dejinta Miisaaniyad-Sanadeedka

<b>Goorta:</b>	Luuliyo (Sanadkiiba mar)	
<b>Hadafka:</b>	<ul style="list-style-type: none"> <li>Kor u qaadista wacyiga bulshada ee ku saabsan hawlaha qorsheynta iyo dejinta miisaaniyad-sanadeedka. Waxa ka mid ah tilmaanta hawlaha qabsoomi doona, iyo sida dadweynuhu uga qaybgali doonaan.</li> <li>Waxa wacyigalunta la marin karaa saxaafadda — qasab ma aha in la isugu yimaaddo kulan dadweyne.</li> <li>Xubnaha dadweynuhu waxa ay fikraddooda ka soo gudbin karaan arrimaha khuseeya DDF sannadkii hore, kuwaasoo lagu soo qaadi karo shirka dibu eegista DDF ee soo socda.</li> </ul>	
<b>Natiijada:</b>	Arrimo door ah oo la xiriira wacyigalinta, kuwaasoo la qabtay bishii July bilawga habraaca qorshaha iyo miisaaniyadda sanadlaha ah.	
<b>Cidda:</b>	Guddi-hoosaadka	La socodka geeddi-socodka la xiriira wacyigalinta bulshada dhanka arrimaha qorshaynta iyo miisaaniyad sanadeedka, iyo ka gacan siinta Waaxda Arrimaha Bulshada ee hawlahaan
	Waaxda Arrimaha Bulshada	Diyaarinta iyo hirgalinta hawlaha wacyigalinta bulshada dhanka geeddi-socodka qorsheynta iyo dejinta miisaaniyad-sanadeedka iyada oo la adeegsanayo agabkii saxa ahaa sida: <ul style="list-style-type: none"> <li>ogaysiisyo la mariyo tv-ga iyo raadiyaha</li> <li>ogaysiisyo lagu dhejiyo meelaha dadku isugu yimaaddo</li> <li>fariimaha sms-ka</li> <li>Websiteyada iyo wargeystyada degaanka</li> </ul> Ogow in hababka la adeegsanayo ay tahay in ay gaaraan haweenka, dhalinta, iyo kooxaha kale ee laga tiro badan yahay bulshada dhexdeeda.
	Golayaasha/Guddiyada Tuulooyinka iyo Kooxaha La-socodka ee Bulshada	Gacansiinta hawlaha kor-u-qaadista wacyiga bulshada dhanka geeddi-socodka qorsheynta iyo dejinta miisaaniyad-sanadeedka.
	Dadweynaha	Faham wanaagsan oo ku saabsan geeddi-socodka qorshaynta iyo miisaaniyad dejinta sanadlaha ah, iyo wixii ay ku darsan karaan xubnaha bulshadu.
	CSO-yada/NGO-yada	Waxa ay faham wanaagsan u yeelan doonaan hawlaha miisaaniyad-dejinta iyo qorshaynta ee

		soo socda, iyaga oo fursad u heli kara inay fikrad ku kordhiyaan ururo bulsho ahaan.
<b>Tababarka Khuseeya:</b>	<i>Geeddi-socodka Miisaaniyad iyo Qorshe Dejinta Degmada ee Sanadlaha ah</i>	

## 2. Shirka Dib-u-eegista DDF

<b>Goorta:</b>	Luuliyo (Sanad kasta)	
<b>Hadafka:</b>	<ul style="list-style-type: none"> <li>In dibu eegis lagu sameeyo nuxurka DDF bilawga geeddi-socodka sanadlaha ah ee qorshaynta iyo miisaaniyad dejinta, si loo hubiyo in ay weli waaqaca ka turjumayaan, gaar ahaan himilada degmada, waxyaabaha muhiimka u ah, bartilmaameedyada iyo ujeeddooyinka.</li> <li>Iyada oo qayb ka ah hawshan, xogta degmada iyo qorshayaasha LED-ka waa in dib-u-eegis lagu sameeyo, si wixii isbeddel dhacay 12kii bilood ee u dambeeyey loogu daro.</li> <li>Qorshayaasha waaxda iyo kuwa qaybta waa in dib-u-eegis lagu sameeyo iyada oo qayb ka ah geeddi-socodkan, haddii wax isbeddel ah oo weyn la sameeyo waa in ay ka muuqdaan DDF.</li> <li>Xogta Q&amp;L waa in lagu soo bandhigo shirkan, si loo muujiyo horumarka la sameeyo dhanka ujeeddooyinkii iyo bartilmaameedyadii DDF-ka.</li> </ul>	
<b>Natiijada:</b>	<ul style="list-style-type: none"> <li>In la isku raaco wixii laga beddelayo DDF.</li> <li>Warbixinta Q&amp;L ee dhanka horumarkii loo sameeyay gaarista bartilmaameedyadii iyo ujeeddooyinka DDF.</li> </ul>	
<b>Cidda:</b>	Guddi-hoosaad	Ka-qaybgalka kulanka dib-u-eegista iyo in wixii talo ah ay ku kordhiyaan iyaga oo ka wakiil ah Golaha Degaanka.
	Waaxda Qorshaynta	Qabanqaabinta kulanka dib-u-eegista DDF. Diyaarinta xogta muhiimka ah ka hor shirka, xogtaas oo ay ku jirto: <ul style="list-style-type: none"> <li>Dib-u-eegista Xogta Degmada iyo LED-ka.</li> <li>Uruurinta xogta Q&amp;L iyo diyaarinta warbixinta lagu soo bandhigayo shirka.</li> <li>In laga codsado xogtii u dambaysay ee qorshayn heer qaran iyo wasaaradaha qaybta.</li> </ul>
	Duqa	Fududaynta Shirka Dib-u-eegista DDF.
	Xoghayaha Fulinta	Ka-qaybalka Shirka Dib-u-eegista DDF iyo gacansiinta geeddi-socodka dib-u-eegista.
	Agaasimayaasha Waaxaha Degmada	Ka-qaybalka Shirka Dib-u-eegista DDF iyo gacansiinta geeddi-socodka dib-u-eegista.
	Wakiilo ka socda dhammaan Waaxaha Degmada	Ka-qaybalka Shirka Dib-u-eegista DDF iyo gacansiinta geeddi-socodka dib-u-eegista.

	Wakiilo ka socda MOI, MoP, Wasaaradaha qaybta, iyo Maamulada Gobolada.	Ka-qaybalka Shirka Dib-u-eegista DDF iyo gacansiinta geeddi-socodka dib-u-eegista, iyaga oo ka duulaya xogta qorshayaashooda.
<b>Tababar Khuseeya:</b>	<i>Geeddi-socodka Qorshaynta iyo Diyaarinta Miisaaniyadda Degmada ee Sannadlaha ah</i>	

### 3. Diyaarinta Cutubyada 1-3 ee DBFP-ka

<b>Goorta:</b>	Agoosto (Sanad kasta)	
<b>Hadafka:</b>	<p>Warqadda Qabka Guud e Miisaaniyadda Degmada / District Budget Framework Papege (DBFP) waa dokumenti gacan ka siin kara degmada inay iskudubaridato qorshaynta iyo miisaaniyad dejinta. Waxa ay dhamaystir u tahay dokumentiga DDF 5ta sanno. Waxa loo adeegsadaa diyaarinta Cutubada 1-3 isla marka lasoo gebogabeeyo shirka dib-u-eegista.</p> <p>Macluumaadka ku Cutubyada 1-3 ee DBFP waxa la adeegsadaa marka la diyaarinayo dokumentiyada miisaaniyadda ee soo socda:</p> <ul style="list-style-type: none"> <li>• Warbixinta Lafagurka Wax-ku-oolnimada Kharashaadka Degmada (Sebtembar)</li> <li>• Odoroska Dakhliga iyo Kharashaadka (Sebtembar)</li> </ul> <p>Cutubyada 1-3 ee DBFP-ka waxa ku jira kuwan:</p> <ul style="list-style-type: none"> <li>• Cutubka 1aad: Dib-u-eegista wax-ku-oolnimada dakhliga (laga soo bilaabo sanadkii hore) iyo odoroska dakhliga muddada dhexe (shanta sanno ee xiga).</li> <li>• Cutubka 2aad: Guudmarka kharashaadkii hore ee degmada iyada oo loo eegayo miisaaniyadda, kharashaadka waaxda, guulihii la gaarey iyo caqabadihii lala kulmey.</li> <li>• Cutubka 3aad: Ujeeddooyinka muddada dhexe, waxyaabaha ahmiyadda la siinayo, maxsuullada iyo qoondaynta kharashyada (sadexda sanno ee soo socda).</li> </ul>	
<b>Natiijada:</b>	Diyaarinta Cutubyada 1-3 ee Waraaqda Qaabka Guud ee Miisaaniyadda Degmada.	
<b>Cidda:</b>	Waaxda Qorshaynta	Kala-shaqaynta Waaxda Maamulka iyo Lacagta dhanka diyaarinta DBFP.
	Waaxda Maamulka iyo Lacagta	Kala-shaqaynta Waaxda Qorshaynta Diyaarinta DBFP.
	Agaasimayaasha Waaxaha Degmada	Bixinta macluumaadka loo baahanyahay si loo diyaariyo cutubyada 1-3 ee DBFP.
<b>Tababarka Khuseeya:</b>	<i>Geeddi-socodka Qorshaynta iyo Diyaarinta Miisaaniyadda Degmada ee Sannadlaha ah</i>	

### **Waa maxay warqadda Qaabka Guud ee Miisaaniyadda Degmadu / District Budget Framework Paper (DBFP)?**

Dokumentigani waxa uu koobsadaa dokumentiyo kala duwan oo la diyaariyo iyaga oo qayb ka ah miisaaniyadda iyo qorshe-sanadeedka, waana dokumentiyo xiriir ka dhexeeyo kuwaas oo dhammaan gacan ka gaysta dejinta qorshayaal wax-ku-ool ah iyo kala qoondaynta ilaha/khayraadka degmada, sidaa daraadeedna waxa ay u baahanyihiin in ay wada shaqeeyaan ka hor inta aan la dhamaystirin qorshe-hawleedka sanadlaha ah iyo miisaaniyadda.

Cutubyada 1-3 ee DBFP waxa ku jira:

**Cutubka 1aad.** Odooroska iyo sida uu noqon doona dakhligu saddexda sanno ee soo socda:

**X-2 X-1 X X+1 X+2 X+3**

Iyada oo 'X' tahay sanadka lagu jiro.

Tani waxa ay la mid tahay barnaamijka saddex-sanadlaha socda ah ee maalgelinta, si kastaba ha ahaatee marka la fiirinayo wax-ku-oolnimada dakhliga dhanka DBPF, waxa aynu eegnaa wax-ku-oolnimada taariikhiga ah (X-2, X-1) si loogaga qiyaas qaato sida mustaqbalku noqonayo.

**Cutubka 2aad.** In la fiiriyo wax-ku-oolnimada waaxeed iyada oo la eegayo kharashaadka iyo bartilmaameedyada

Kharashaad qiyaas uun ah oo waaxeed kuwaasoo ah sanadaha X-0, X, X+1, X+2 and X+3 iyada oo laga soo qaadayo in aan ku jirno sanadka X;

**Cutubka 3aad.** Ujeedooyinka muddada dhexe, waxyaabaha xoogga la saarayo, Natijjooyinka iyo kharashaadka

Tilmaamayaal qiyaas u noqon kara wax bartilmaameedka saddexda sanno ee waaxuhu noqon karaan (maxsuul) sanadaha X-0, X, X+1, X+2 iyo X+3 iyada oo laga soo qaadayo in aan ku jirno sanadka X. Marka lagu daro in ay gacan ka gaysato tilmaanta kharashaadka waaxda waxa kale oo ay muhiim u tahay tilmaanta maxsuulada la bartilmaameedsanayo waaxaha sidoo kale. Hoos ka fiiri xog dheeri ah oo ku saabsan diyaarinta Cutubyada 1-3 ee DBFP.

## 4. Kulanka Guudmarka Hawlaha Horumarinta Degmada

<b>Goorta:</b>	Sebtembar (Sanad kasta)	
<b>Hadafka:</b>	<ul style="list-style-type: none"> <li>Kulan ayaa lagu qabtaa degmo kasta, si ay sawir uga helaan daneeyayaashu hawlaha ka dhacaya degmada (waqtigan iyo sidoo kale odoroska labada sanno ee soo socda haddii ay suuragal tahay).</li> <li>Geeddi-socodkan waxaa ka qaybgala tiro daneeyayaal ah kuwaasoo ku hawlan arrimaha degmada, sida NGO-yada, si dowladda hoose u hubiso in hawlaha horumarinta ee degmadu iswaafaqsan yihiin.</li> <li>Arrimaha ahmiyadda la siinayo oo la qiyaasay kharashka ay ku kici karaan ayaa halka lagu go'aamiyaa, iyo sidoo kale kharashaadka H&amp;D oo iyana la qiyaasay.</li> <li>Kulanku waa in uu ka soo hormaro Shirweynaha Miisaaniyadda</li> </ul>	
<b>Natiijada:</b>	<ul style="list-style-type: none"> <li>Shaxda 'Guudmarka Hawlaha Horumarinta Degmada' (waa in wax-ka-beddel lagu sameeyo sanadka oo dhan).</li> <li>Qorshaha H&amp;D, kaasoo muujinaya kharashaadka ay ku kacayaan hawlaha la soo jeediyay.</li> </ul>	
<b>Cidda:</b>	Xubnaha Golaha Degmada	Waxay kaqaybgal Kulanka Guudmarka Hawlaha Horumarinta ee Degmada
	Duqa	Wuxuu fududeeyaa Kulanka Guudmarka Hawlaha Horumarinta Degmada
	Xoghayaha Fulinta	Wuxuu ka-qaybgalaa Kulanka Guudmarka Hawlaha Horumarinta ee Degmada
	Waaxda Qorshaynta	Waxay iskudubariddaa Kulanka Guudmarka Hawlaha Horumarinta ee Degmada
	Agaasimayaasha Waaxaha Degmada	Ka-qaybgalka Kulanka Guudmarka Hawlaha Horumarinta ee ka socda Degmada iyo ku-darista wixii waaxdu ahmiyad siinayso sanadka soo socda.
	Wakiilada Waaxaha Degmada	Ka-qaybgalka Kulanka
	WAG	Ka-qaybgalka Kulanka
	Wasaaradda Qorshaynta	Ka-qaybgalka Kulanka
	Wasaaradaha Qaybta	Ka-qaybgalka Kulanka iyo ku-darista wixii hawlo horumar qoshaysan hadda iyo kuwa la rabo mustaqbalka.
	Deeq bixiyayaasha (NGOs, UN, cid kale oo gaar ah)	Ka-qaybgalka Kulanka iyo ku-darista wixii hawlo horumar qorshaysan hadda iyo kuwa la rabo mustaqbalka.
<b>Tababarka Khuseeya:</b>	<i>Geedisocodka Qorshaynta iyo Diyaarinta Miisaaniyadda Degmada ee Sannadlaha ah</i>	

### Sheeko tilmaameysa guul la gaarey: Maxay yihiin faa'iidooyin qorsheyn habboon oo ay yeeshaan degmooyinka?

Degmada Abyan ayaa leh meertadan soo socota ee 'Qorsheynta Laga Wada Qaybgalo iyo Maareynta Kharashaadka Dowladda' oo 5 sano ah. Waqtigaas, ayaa degmadu waxaa soo aad u wanaagsanaadey qorsheynta hawlaheeda. Tusaale ahaan, arrin mudnaan la siinayey sanadkii 2016kii ayaa hayd dhisidda suuq cusub, oo markii hore ahaa mid ciriiri ah, oo ay isku dagaalayaan ganacsatada. Waxaa loo aqoonsadey arrin qorsheyn oo mudnaan leh, waxaana la dhisey suuq cusub oo hadda ku wada filan dhamaan ganacsatada. Faa'iido dheeri ah ayaa ahayd in dakhliga degmadu uu kordhey sababta oo ah hadda waxaa suuragal ah oo fudud in lacagaha ujuurada suuqa laga qaado ganacsatada.

Xubin ka tirsan golaha degaanka ayaa yiri "Markii hore, qorsheyntu waxaa ay ahayd mid isku dhex yaacsan, baahiyaha dhabta ah ayaan la aqoonsan haddase waxaan gelinaa qorshaha wax walba oo mudnaan lehna diiradda ayaa ay inoo saaran yihiin *waxaana nahay kuwo lala xisaabtamo karo, qiilna waan u sameyn karnaa waxyaabaha aan dooranneys.*"

## 5. Wareegtada Miisaaniyadda & Shirweynaha Miisaaniyadda

<b>Goorta:</b>	Sebtembar (Sanad kasta)	
<b>Hadafka:</b>	<ul style="list-style-type: none"> <li>Wareegtada miisaaniyaddu waa dokumenti ay soo saarto Wasaaradda Maaliyaddu, kaasoo bixiya tilmaamaha bilawga ah ee haga miisaaniyadda degmada sanadka soosocda.</li> <li>Wareegtada Miisaaniyadda waa in la soo saaro ka hor Shirka Miisaaniyadda.</li> <li>Shirka Miisaaniyadda waxa isugu yimaada daneeyayaaha muhiimka ah si ay isula falanqeeyaan arrimaha ahmiyadda la siinayo iyo tilmaanta lacagaha qorshaha lagu darsan karo (bushqadda miisaaniyadda) ee ay soo jeedisay dowladda dhexe in ay bixiso, deeqbixiyayaashu iyo NGO-yadu bixiyaan sanadka soo socda, iyo labada sanno ee ku xiga haddii ay suuragaltahay.</li> </ul>	
<b>Natiijada:</b>	<ul style="list-style-type: none"> <li>Dokumentiga Wareegtada Miisaaniyadda, waxaa lasoo saaraa kahor Dhirka Miisaaniyadda.</li> <li>Xisaabo Qorshayneed oo Shirka Miisaaniyadda la soo hordhigo.</li> </ul>	
<b>Cidda:</b>	WM/WAG	<ul style="list-style-type: none"> <li>Diyaarinta iyo soo saarista Wareegtada Miisaaniyadda</li> <li>Qabashada Shirka Miisaaniyadda</li> <li>Soo-jeedinta Qiyaasaha Lacagaha Lagu Shaqeyn</li> </ul>

		Karo inta shirku socdo.
	Guddi Hoosaadka	Ka -qaybgalka Shirka Miisaaniyadda.
	Duqa / Xoghayaha Fulinta	Ka -qaybgalka Shirka Miisaaniyadda
	Agaasimayaasha waaxaha degamda	Ka -qaybgalka Shirka Miisaaniyadda
	Wakiilada Wasaaradda Qorshaynta	Ka-qaybgalka Shirka Siisaaniyadda iyo bixinta wixii macluumaad looga baahanyahay qorshaynta heer qaran iyo waxyaabaha miisaaniyaddu ahmiyadda siinayso.
	Wakiilada Wasaaradaha Waaxda	Ka-qaybgalka Shirka Miisaaniyadda iyo bixinta wixii macluumaad looga baahanyahay qorshaynta heer qaran iyo waxyaalaha miisaaniyaddu ahmiyadda siinayso
	Wakiilada Gobollada	Ka-qaybgalka shirka miisaaniyadda
	Deeq-bixiyayaasha	Ka-qaybgalka Shirka Siisaaniyadda iyo bixinta wixii macluumaad laga hayo maalgalinta loo filayo degmooyinka.
<b>Tababarka Khuseeya:</b>	<i>The District Annual Planning and Budgeting Process / Geedisocodka Qorshaynta iyo Diyaarinta Miisaaniyadda Degmada ee Sannadlaha ah</i>	

## 6. Dib-u-eegista Kharashaadka Dowladda

<b>Goorta:</b>	Sebtembar (Annually)	
<b>Hadafka:</b>	<ul style="list-style-type: none"> <li>Dib-u-eegista Kharashaadka Dowladdu (PER) oo bixisa lafagur lagu sameeyo xaaladda dakhliga iyo kharashaadka degmada ee sanadkii tagay.</li> <li>Dib-u-eegista oo wax ka qaadata macluumaadkii hore loogu diyaariyay Cutubyada 1 iyo 2 ee DBFP.</li> <li>Dib-u-eegistu oo bixisa talooyin wax-ka-beddel oo la tixgaliyo marka la dejinayo qoshaha iyo miisaaniyadda sanadka soo socda.</li> </ul>	
<b>Natiijada:</b>	Warbixinta 'Lafagurka Wax-ku-oolnimada Kharashaadka'.	
<b>Cidda:</b>	Waaxda Maamulka iyo Lacagta	Waxa ay diyaarisaa Warbixinta Lafogurka Kharashaadka.
	Waaxda Qorshaynta	Ka gacansiinta Waaxda Maamulka iyo Lacagta dhanka diyaarinta Warbixinta Lafagurka Kharashaadkii lagalay.
	Duqa / Xoghayaha Fulinta	Waxa loo keenaa Warbixinta Lafagurka Kharashaadkii lagalay.

	Guddi- Hoosaadka	Waxa loo keenaa Warbixinta Lafagurka Kharashaadkii la galay.
<b>Tababarka Khuseeya:</b>	<i>The District Annual Planning and Budgeting Process / Geedisocodka Qorshaynta iyo diyaarinta miisaaniyadda degmada ee sannadlaha ah</i>	

## 7. Odoroska Dakhliga iyo Kharashaadka

<b>Goorta:</b>	Sebtembar (Sanad kasta)	
<b>Hadafka:</b>	In sawir cad laga baxiyo dakhliga la filayo iyo kharashaadka sanadka soo socda.	
<b>Natiijada:</b>	Odoroska dakhliga iyo kharashaadka sanadka soo socda, kuwaasoo lagu salaynayo macluumaadka lagu diyaariyay Cutubyada 1 & 3 ee DBFP-ka, iyo sidoo kale qiyaasaha laga helay dowladda dhexe.	
<b>Cidda:</b>	Agaasimayaasha Waaxaha Degmada	Bixinta macluumaad ku saabsan qiyaasta kharashaadka waaxahooda, si ay gacan u siiyaan odoroska dakhliga iyo kharashaadka.
	Waaxda Maamulka iyo Lacagta	Diyaarinta odoroska dakhliga iyo kharashaadka.
	Waaxda Dakhliga	Gacansiinta odoroska dakhliga iyo kharashaadka
	Waaxda Qorshaynta	Gacansiinta odoroska dakhliga iyo kharashaadka
	Guddi- hoosaadda	Gacansiinta odoroska dakhliga iyo kharashaadka
	Duqa / Xoghayaha Fulinta	Gacansiinta odoroska dakhliga iyo kharashaadka.
<b>Tababarada khuseeya:</b>	<i>Geeddi-socodka Qorshaynta iyo Diyaarinta Miisaaniyadda Degmada ee sannadlaha ah</i> <i>Dadaalada Maxalliga ah ee Dakhli-uruurinta: Qaab-hawleedka iyo Tilmaanta Dakhli uruurinta</i> <i>Buugga Tababarka Hawlaha Sanduuqa Horumarinta Maxalliga ah</i>	

### **Waa kuwee ilaha u muhiimsan dakhliga degmada?**

Waxa jira afar dakhli oo muhiim ah oo ay heli karaan dowladaha hoose:

1. Deeqaha iyo lacagaha dowladda dhexe laga helo.
2. Dakhliga laga soo ururiyo bulshada iyo ganacsatada ku sugan inta dowladda hoose masuulka ka tahay (taasoo loo yaqaan maxalli ama Dakhliga Isha La leeyahay). Kuwani waxay ka koobnaan karayaan:
  - a. Canshuuro
  - b. Canshuur maalinle ah
  - c. Khidmada hantida maguurtada ah( Tusaale: Kirada guryaha)
  - d. Shatiyada
  - e. Ganaaxyada
3. Deeqaha tooska looga helo hay'adaha kala shaqeeya horumarka iyo NGO-yada.
4. Deeqaha laga helo muwaadiniinta caadiga ah

*Isha: Buugga Tabobaraha ee LRMI: Kulanka 1aad. Qabdhismeedka Sharci iyo OSRs*

### **Sidee degmadu u Abaabushaa Ilaheeda Dakhli??**

Waxaa jira shan hawlood oo muhiim ah oo khuseeya sida ay degmo u abaabusho dakhligooda:

1. Tilmaamitaanka iyo tirinta cashuur bixiyayaasha.
2. Qiimaynta cashuur bixiyayaasha iyo ku-darista diwaanada haddii loo baahdo.
3. Ururinta cashuuraha iyo lacagaha iyada oo loo xilsaarayo saraakiil aqoon iyo hawl-karnimo leh.
4. Wacyigelin iyo shaacin—loo saamaynayo guud ahaan bulshada iyada oo lagala hadlayo ahmiyadda iyo faa'iidada bixinta cashuuraha iyo lacagaha kale ee dowladda hoose.
5. Dhaqangalinta —tusaale ahaan, iyada oo dabagal lagu samaynayo kuwa cashuurta la baxsada, la samaynayo hubin joogto ah oo shatiyada ah si loo hubiyo in lacagihii la bixiyay.

*Isha: LG Financial Management Manual, 5. Revenue. / Buugga Maareynta Maaliyadda DH, 5. Dakhliga*

## 8. Kala Hormarinta Hawlaha Horumarinta iyo Samaynta Qiimaynta iyo Daraasado Lagu Hubinayo Suuragalnimadooda

<b>Goorta:</b>	Sebtembar (Sanad kasta)	
<b>Hadafka:</b>	Hawlaha ay soo jeediyaan qaybaha iyo waaxaha degmada waa la taxaa iyada oo la kala hormarinayo, laguna salaynayo macluumaadka la ururiyey intii lagu guda jiray shaxda odoroska dakhliga iyo kharashaadka iyo 'Sawirka guud ee Hawlaha Horumarinta Degmada'. Sanadka soo socda iyo 2-da xiga hadday suuragal tahay?	
<b>Natiijada:</b>	<ul style="list-style-type: none"> <li>Liis muujinaya hawlaha ahmiyadda la siinayo iyo kharashka ay ku kacayaan, si loogu daro miisaaniyadda qabyo-qoraalka ah ee sanadka soo socda.</li> <li>Daraasado Lagu Eegayo Suurtagalnimadooda waa in loo sameeyo mashaariicda ahmiyadda la siinayo, si loo eego haddii ay suuragal yihiin, ka hor inta aan lagu darin miisaaniyadda degmada.</li> </ul>	
<b>Cidda:</b>	Agaasimayaasha Waaxaha Degmada	Ka qaybgalka kala ahmiyadsiinta hawlaha.
	Guddi-hoosaadka	Ka qaybgalka kala ahmiyadsiinta hawlaha.
	Duqa / Xoghayaha Fulinta	Fududaynta geeddi-socodka kala muudnaansiinta hawlaha.
	Waaxda Qorshaynta	In la keeno wixii xog looga baahan yahay SHDga si loogaga shidaaal qaato hawsha kala ahmiyadsiinta.
	Waaxda Hawlaha Guud	Samaynta daraasadda (mashaariicda shaqooyinka ah).
<b>Tababarka Khuseeya:</b>	<i>The District Annual Planning and Budgeting Process / Geeddi-socodka Qorshaynta iyo Diyaarinta Miisaaniyadda Degmada ee sannadlaha ah</i>	

## 9. Diyaarinta Miisaaniyad Qabyo-Qoraal ah

<b>Waqtiga:</b>	Oktoobar (Sanad kasta)	
<b>Hadafka:</b>	In meel la isugu geeyo qiyaasaha waaxahu diyaariyeen iyada oo qayb ka ah odoroska dakhliga iyo kharashaadka, iyada oo la isugu gaynayo hal dokumenti oo qabyo qoraal miisaaniyadeed ah.	
<b>Natiijada:</b>	Miisaaniyadda degmada oo qabyo qoraal ah loona diyaariyay si dib-u-eegis loogu sameeyo.	
<b>Cidda:</b>	Waaxda Maamulka iyo	Diyaarinta foomka odoroska Dakhliga Miisaaniyadda.
		Diyaarinta miisaaniyadda guud iyada oo la adeeganayo

	Lacagta iyo Guddiga Miisaaniyadda	xogta laga helo foomamka Miisaaniyadda Kharashaadka iyo Dakhliga.
	Xoghayaha Fulinta	Soo saarista foomka qiyaasta kharashka miisaaniyadda iyada oo la siinayo agaasimayaasha waaxaha.
	Agaasimayaasha Waaxaha Degmada	Dhamaystirka foomka Qiyaasta Kharashaadka iyada oo la gelinayo qiyaasaha lacagaha loo baahan yahay si loo dhaqaajiyo qaybaha iyada oo la adeegsanayo laymanka shay-yada oo faahfaahsan (kuwa soo noqnoqda iyo kharashaadka raasamaalka/horumarka).
	Duqa	Korjoogtaynta hawlaha meel isugu geynta miisaaniyadda.
	Waaxda Qorshaynta	Gacansiinta meel isugu geynta miisaaniyadda.
<b>Related Training:</b>	<i>The District Annual Planning and Budgeting Process / Geedisocodka Qorshaynta iyo Diyaarinta Miisaaniyadda Degmada ee sannadlaha ah</i>	

## 10. Diyaarinta Qorshe Hawleedyada Sanadlaha Ah oo Qabyo Qoraal ah

<b>Goorta:</b>	Oktoobar (Sanad walba)	
<b>Hadafka:</b>	<ul style="list-style-type: none"> <li>• Diyaarinta qorshe hawleedka shaqooyinka soo noqnoqda iyo kuwa raasamaalka/horumarinta, iyada oo lagu lifaaqayo miisaaniyadda degmada.</li> <li>• Qorshe hawleedku waa qoraal muujiya hawlaha degmadu rabto in ay qabato sanadka soo socda, ilaha hawl kasta u baahantahay iyo sidoo kale natiijada/maxsuulka ka qorshaysan hawl kasta.</li> </ul>	
<b>Natiijada:</b>	<ul style="list-style-type: none"> <li>• Qorshe-Hawleedka sanadlaha ah ee kharashaadka Raasamaalka/Horumarinta</li> <li>• Qorshe hawleed sanadle ah oo ku saabsan Kharashaadka soo noqnoqda</li> </ul>	
<b>Cidda:</b>	Waaxda Maamulka iyo Lacagta	Diyaarinta Qorshe-hawleedka Sanadlaha ah oo qabyo qoraal ah (raasamaal iyo qaar soo noqnoqda )
	Duqa / Xoghayaha Fulinta	Fududaynta hawlaha diyaarinta Qorshe-hawleedka Sanadlaha ah
	Agaasimayaasha Waaxaha Degmada	Gacansiinta diyaarinta Qorshe-hawleedka Sanadlaha ah
	Waaxda Qorshaynta	Gacansiinta Qorshe-hawleedka Sanadlaha ah
	Guddi-hoosaadka	La-socodka hawlaha diyaarinta Qorshe-hawleedka Sanadlaha ah

<b>Related Training:</b>	<i>The District Annual Planning and Budgeting Process / Geeddi-socodka Qorshaynta iyo Diyaarinta Miisaaniyadda Degmada ee sannadlaha ah</i>
--------------------------	---

## 11. Dib-u-eegista Miisaaniyadda iyo Qorshe-Hawleedyada Sanadlaha ah

<b>Goorta:</b>	Oktoobar (Sanad kasta)	
<b>Hadafka:</b>	Fursad siinta daneeyayaasha degmada iyo kuwa bulshada si ay dib-u-eegis ugu sameeyaan faallana ugu darsadaan miisaaniyadda qabyo qoraalka ah iyo qorshe hawleedka sanadlaha ah ka hor inta aan la ansixin oo aanay ku hawlgalin Golaha Degmadu.	
<b>Natiijada:</b>	Nuqul miisaaniyad iyo qorshe hawleed sanadle ah oo dib-u-eegis lagu sameeyey	
<b>Cidda:</b>	Bulshada caam ahaan – Xubnaha bulshada	Lagu casuumo si ay aragti uga dhiibtaan miisaaniyadda iyo qorshe hawleedka sanadlaha ah ee qabyo qoraalka ah ka hor kulanka dadweynaha (sii 2 todobaad si ay u soo eegaan).
	Golayaasha / Guddiyada Tuulooyinka	Ka-qaybgalka kulanka dadweynaha ee ku saabsan miisaaniyadda iyo qorshe-hawleedka qabyo qoraalka ah (muddada 2da toddobaad ah ka dib), kaasoo sidoo kale la isku wargeliyo wixii cusub dhanka guulaha degmadu gaarey sanadkii hore (tusaale ahaan, horumarka laga sameeyay xaqiijinta ujeedooyinkii DDF iwm).
	Duqa	Fududaynta kulanka dadweynaha ee ku saabsan miisaaniyadda iyo qorshe hawleedka sanadlaha ah ee qabyada ah iyo soo bandhigidda miisaaniyad iyo qorshe hawleed qabyo qoraal ah.
	Xoghayaha Fulinta	Ka-qaybgalka kulanka dadweynaha ee ku saabsan miisaaniyadda qabyo qoraalka ah iyo qorshe hawleedyada sanadlaha ah.
	Guddi-hoosaadka	Ka-qaybgalka kulanka dadweynaha ee kusaabsan miisaaniyadda qabyo qoraalka ah iyo qorshe hawleedyada sanadlaha ah iyo soo bandhiga aragtida Golaha Degaanka Degmada ee dhanka arrimaha muhiimka ah ee ku jira qorshe hawleedka.
	Waaxaha Degmada	Ka-faaloodka qabyo-qoraalka miisaaniyadda iyo qorshe-hawleedyada.
	Waaxda Maamulka iyo Lacagta	Shaacinta qabyo-qoraalka miisaaniyadda iyo qorshe-hawleedyada iyada oo lagu dhejinayo meelaha ogaysiisyada lagu dhejiyo ee caamka ah iyo siyaabaha kale ee suuragalka ah sida internetka.  Ka-qaybgalka kulammada dadweynaha ee miisaaniyada qabyo qoraalka ah iyo qorshe hawleedyada sanadlaha ah.

		Ururinta xogta ka soo noqotay 2dii todobaad ee faallada ahaa iyo kulankii bulshada iyo samaysta wixii wax-ka-beddel ah ee muhiim ah ee ay u baahdaan miisaaniyadda iyo qorshe-hawleedka sanadlaha ah.
	Waaxda Qorshaynta	Ka-qaybgalka kulammada dadweynaha iyo soo bandhigidda wixii guulo la gaarey sanadkii tagay (sida horumarka laga saameeyey dhanka xaqiijinta ujeeddooyinkii DDF).
<b>Tababarka Khuseeya:</b>	<i>The District Annual Planning and Budgeting Process / Geeddi-socodka Qorshaynta iyo Diyaarinta Miisaaniyadda degmada ee sannadlaha ah</i>	



### Layliga 4b: Ka-qaybgelinta bulshada ee Geeddi-socodka Qorsheynta iyo Miisaaniyad-dejinta Degmada

Sida aan ku soo aragney Layligii 3aad, waxaa jiro tiro firsado kala duwan ah oo ku jira ka-qaybelinta bulshada ee geeddi-socodka qorsheynta iyo miisaaniyad-dejinta degmada. Middood ayaa lagu sharxay xagga qore ee **Tallaabada 11aad. Dib-u-eegista Miisaaniyadda iyo Qorshe-hawleeda Sanadlaha ah.**

Sanad kasta bisha Oktoobar, waxaa la qabtaa shir bulshadu ay yeelato, halkaas oo bulshada lagu wargelinaya guulihii la xaqiijiyey sanadkii hore, iyo waxyaabaha ku jira miisaaniyadda iyo qorshe-hawleedka la soo jeedinayo ee sanadka soo socda.

Qabta door-jilid lagu jilayo kulanka noocaas ah – iyada oo la adeegsanayo daneeyayaasha **Tallaabada 1aad. Dib-u-eegista Miisaaniyadda iyo Qorshe-hawleedyada Sanadlaha ah** kuwaas oo jilaya daneeyayaasha kala duwan. Maxay yihiin noocyada su'aalaha ay u badan tahay in ay weydiiyaan xubnaha bulshada? Macluumaad sidee ah ayaa ay tahay in wakiillada degmadu ay siiyaan bulshada?

## 12. Dhamaystirka Miisaaniyadda iyo Qorshe-Hawleedka Sanadlaha ah

<b>Goorta:</b>	Oktoobar (Sanad kasta)	
<b>Hadafka:</b>	Waxa jira geeddi-socod rasmi ah oo ay tahay in degmadu raacdo si ay hab rasmi ah ugu meelmariso uguna dhaqangeliso qabyo-qoraalka miisaaniyadda iyo qorshe-hawleedyada sanadlaha ah. Degmooyinku waa in ay u gudbiyaan miisaaniyadahooda la ansixiyaay iyo qorshe hawleedyadooda WAG ugu dambayn bartamaha bisha Oktoobar	
<b>Natiijada:</b>	Miisaaniyada kama dambaysta ahayd ee la ansixiyay iyo qorshe hawleedyadii loo gudbiyay WAG.	
<b>Cidda:</b>	Golaha Degmada	Waxa ay u kulmaan si ay u eegaan ansixinta kama dambaysta ah ee miisaaniyadda iyo qorshe

		hawleedyada. Aqbalaadda mooshinka lagu meelmarinayo miisaaniyadda iyo qorshe hawleedyada iyada oo loo marayo cod aqlabiyad ah.
	WAG	Miisaaniyaddii la meelmariyay ayaa loo diraa WAG si ay dib-u-eegis ugu samayso, u taageerto bartamaha bisha Nofember iyada oo dhammaan miisaaniyadaha degmooyinkana la isu geynayo loona gudbinayo Wasaaradda Maaliyadda si ay ugu darto miisaaniyadda qaranka.
	Waaxda Maamulka iyo Lacagta	Ku darista faahfaahinta miisaaniyadda iyo qorshe hawleedyada AIMS-ka.
	Duqa / Xoghayaha Fulinta	Kala talinta agaasimayaasha waaxaha dhanka kala qoondaynta miisaaniyadda iyo laymanka miisaaniyadda ee u gaarka ah, awoodaha dhanka kharashaadka ee waaxahooda.
<b>Tababarka Khuseeya:</b>	<i>The District Annual Planning and Budgeting Process / Geeddi-socodka Qorshaynta iyo Diyaarinta Miisaaniyadda Degmada ee Dannadlaha ah</i>	

### 13. Shaacinta Miisaaniyadda iyo Qorshe Hawleedyada Sanadlaha ah

<b>Goorta:</b>	Nofembar iyo wixii ka dambeya (Sanad kasta)	
<b>Hadafka:</b>	In si cad oo baahsan dadweynaha loogu wargeliyo miisaaniyadda iyo qorshe hawleedka la ansixiyay.	
<b>Natiijada:</b>	Habab dhawr ah oo lagu shaaciyo miisaaniyadda iyo qorshe hawleedyada degmada..	
<b>Cidda:</b>	Waaxda Maamulka iyo Lacagta	Shaacinta miisaaniyadda iyo qorshe hawleedyada la ansixiyay iyada oo la adeegsanayo hababkan: <ul style="list-style-type: none"> <li>• Tabeelayaasha caamka ah ee ogaysiisyada</li> <li>• Ogaysiiska raadiyaha</li> <li>• <i>Internet</i>-ka</li> <li>• u qaybinta dokumentiga oo waraaqo ah Guddiyada Tuulooyinka</li> </ul>
<b>Tababarka Khuseeya:</b>	<i>The District Annual Planning and Budgeting Process / Geeddi-socodka Qorshaynta iyo Diyaarinta Miisaaniyadda Degmada ee Sannadlaha ah</i>	

### 14. Dhamaystir Waraaqda Guud ee Miisaaniyadda Degmada

<b>Goorta:</b>	Nofembar (Sanad kasta)
----------------	------------------------

<b>Hadafka:</b>	Diyaarinta Cutubyada 4 iyo 5 ee Warqadda Qaabka Guud ee Miisaaniyadda Degmada, taas oo ay ku jirto miisaaniyadda iyo qorshe hawleedka sanadlaha ahi.	
<b>Natiijada:</b>	Warqadda Qaabka Guud ee Miisaaniyadda Dowladda oo la dhamaystiray (Cutubyada 1-5).	
<b>Cidda:</b>	Waaxda Maamulka iyo Lacagta	Dhamaytirka DBFP-ka iyada oo lagu darayo Cutubyada 4 iyo 5.
<b>Tababarka Khuseeya:</b>	<i>The District Annual Planning and Budgeting Process / Geeddi-socodka Qorshaynta iyo Diyaarinta Miisaaniyadda Degmada ee Sannadlaha ah</i>	

## 15. Diyaarinta Qorshayaasha Wax Iibsiga/Hanashada

<b>Goorta:</b>	Disember (Sanad kasta)	
<b>Hadafka:</b>	Diyaarinta qorshayaasha iibka loo baahan doono si loo dhaqangeliyo miisaaniyadda iyo qorshe-hawleedyada, oo ay ku jiraan dhammaan iibka alaabaha, shaqooyinka iyo adeegyada .	
<b>Natiijada:</b>	Qorshayaasha iibka ee degmo kata ee la ansixiyay.	
<b>Cidda:</b>	Agaasimayaasha Waaxaha Degmada	Diyaarinta qorshayaasha iibka ee waaxahooda, iyada oo lagu saleeyey miisaaniyadda iyo qorshe hawleedyada.
<b>Tababarka Khuseeya:</b>	<i>The District Annual Planning and Budgeting Process / Geeddi-socodka Qorshaynta iyo Diyaarinta Miisaaniyadda Degmada ee Sannadlaha ah</i>	

## Kulanka 3aad: Dhaqangelinta iyo Fulinta Miisaaniyadda

### Ujeeddooyinka Qaybtan:

Dhammaadka fadhigan ka-qaybgalayaashu waxa ay awood u yeelan doonaan in ay:

- Tilmaamaan hawlaha muhiimka ah ee ay ka kooban tahay tallaabada meelmarinta miisaaniyadda iyo maareynta lacagaha baxaya/kharashaadka, iyo cidda ka mas'uulka ah hawlahaas.
- Sharraxaad ka bixiyaan daadejinta adeeg-bixinta iyo horumarinta kaabayaasha inay ka mid tahay shaqooyinka loo igmaday dowladaha hoose, labadubana ay u baahan yihiin in la raaco meelmarin miisaaniyadeed iyo habraacyo maareyn kharasheed oo wanaagsan.

### Meelmarinta Miisaaniyadda iyo Maareynta Kharashaadka

Waxa ay koobsanaysaa:

- Kharashaad, Sunsunka lacagta Kaashka ah (Caddaanka), La-socodka iyo Waxkabeddalka Miisaaniyadda.
- Horumarinta Kaabayaasha
- Daadejinta Adeeg-bixinta
- Soo iibsiga, shaqooyinka, alaabooyinka iyo adeegyada
- Maamulidda/Maareynta Hantida ma guurtada ah & Maamulka Deymaha.



### Tallaabadani Maxay Koobsanaysaa?

- Tallaabadan oo ah mid ka tirsan mareegta DPP&BG ga waxa hoos imaanaya waxa dhaca marka miisaaniyadda iyo qorshe-hawleedka dowladda hoose la ansixiyo. Si kale haddii loo dhigo waxa ay ku saabsan tahay sida miisaaniyadda loo fulinayo, iyo sida geeddi-socodka oo dhan loo maareynayo.
- Tallaabadan waxa kale oo hoos imanaya hanashada shaqooyinka, alaabooyinka, iyo adeegyada, iyada oo la raacayo qorshaha hanashada ee lagu diyaariyay tallaabada Qorshaynta iyo Dejinta Miisaaniyadda.
- Iyada oo tallaabadan ka mid ah, ayaa ay fulinta shaqooyinka dowladda hoose tahay mid aad u muhiim ah, waxaana ka mid ah hawlaha mashaariicda iyo adeeg-bixinta.
- Qaybaha kale ee maareynta kharashaadka waxa ka mid ah, maareynta hantida dowladda hoose iyo deeymaha lagu leeyahay dowladda hoose.
- Inta badan waxqabadyada tallaabadan hoos imaanayaa waa kuwo u dhaca si joogto ah, iyaga oo ka bilaabmaya bilawga rubuca koowaad (Q1) ee sannadka miisaaniyaddiisa la meelmarinayo.

## **Waa Maxay Daadejinta Adeeg-Bixintu?**

Xeer Lr. 7 wuxuu dhigayaa in dowladaha hoose loo igmaday tiro hawlo ah. Hawlahani waxa ay la xiriiraan horumarinta kaabayaasha iyo weliba bixinta adeegga deegaankooda dhexdiisa. Waxa tusaale u ah hawlahaan:

### **Waaxda Arrimaha Bulshada**

- Nadiifinta, fayodhawlka, iyo qurxinta degmada
- Ka-shaqaynta fayodhawlka guud iyo ka hortagga cudurrada faafa.
- Diyaarinta, qorshaynta, hubinta, isu-dheelitiridda baahida loo qabo goobaha biyaha iyo helitaankooda.
- Dhisidda iyo maamulida xarumaha daryeelka hooyada iyo dhallaanka, iyo dugsiyada maareynta qoyska.

### **Waaxda Hawlaha Guud iyo Dhulka**

- In ay fuliso dhismayaasha iyo mashaariicda
- In ay cusboonaysiiso, dayactirto waddooyinka, beeraha, garoomada, iyo dhulka danta guud.
- In ay naqshadayso, dayactirtana dhismayaasha, waddooyinka, goobaha lagu nasto, garoomada, dugsiyada, xarumaha caafimaadka, xero-dhiigta, boosteejooyinka basaska ee deegaanka dowladda hoose.

Muddooyinkii dambe waxaa la bilaabay qorsheyaal bilow ah oo adeeg-bixinta loogu daadejinayo heer degmo, si waafaqsan siyaasadda adeeg-daadejinta. Taas waxaa uu macnaheedu yahay in shaqooyinkii ay wasaaradahad owladda dhexe qaban jireen lagu wareejiyey dowladaha hoose iyadoo la raacayo qaab adeeg bixinta (SDM). Waa kuwan tusaalayaal ka la xiriira waxbarashada iyo caafimaaf:

- Dowladaha hoose inay bixiyaan mushaharrada iyo gunnooyinka shaqaalahooda.
- Kabista mushaharka macalimiinta.
- Dayactirka, ballaarinta, iyo qalabaynta dugsiyada.
- Dayactirka adeegyada nadaafadda iyo fayodhawlka.

Arrinta sare lagu xusay waxa ay dowladaha hoose ee lagu bilaabay mashruucan daadejinta adeeg-bixinta awood dheeraad ah usiisay in ay si karti leh uga jawaabaan baahiyaha bulshooyinkooda.


Mustaqbalka waxaa la filayaa in la daadejin doono shaqooyin kale oo ay ka mid yihiin:

- Bixinta mushaharrada shaqaalada xirfadlayda (barayaasha, kalkaaliyaasha caafimaad, farmasiistayaasha iwm).
- Kormeerida iyo ka warhaynta waxbarashada iyo adeegyada caafimaad ee dowladda hoose bixiso.



## Horumarinta Kaabayaasha

Sida aynu kor ku soo xusnay, dowladaha hoose waxa xil ka saaran yahay dhisidda, cusboonaysiinta, iyo dayactirka hanti kuwaas oo ka mid ah kaabayaasha dowladda hoose. Kaabayaasha waxaa ka mid ah: waddooyinka, dugsiyada, xarumaha caafimaadka, iyo dhismayaasha dowladaha hoose.



Hannaanka loo mulkiyayo, fulinayo, loona maamulayo qandaraasyada "mashaariicda hawlaha dhismaha" ee noocan oo kale ah waxa lagu faahfaahiyay tabobarro kale. Mawduucyada tabobarradaas la xiriirana waxaa ka mid ah:

- Maamulidda, hanashada iyo qandaraasyada mashaariicda.
- Naqshadaynta, soo xulidda, kala doorbididda waddooyinka (la dhisaayo) iyo dayactirkooda.
- Tiknolojiyadda ku tiirsan shaqaalaha.



Shaqooyinkan horumarinta kaabayaasha iyo adeeg bixintu waxa ay ka mid noqonayaan DDF-ka shanta sano ee dowladda hoose, waxaana lagu qodobaynayaa miisaaniyadda sannadka ee dowladda hoose. Sidaas darteed, hannaanka wanaagsan ee fulinta miisaaniyadda iyo maareynta kharashaadku waxa ay si isku mid ah ugu dabbaqamaysaa hawlaha **Horumarinta Kaabayaasha** iyo kuwa **Adeeg-Bixinta** ee Dowladda Hoose.



## Layliiga 5aad: Falanqaynta Shaqooyinka

Idinka oo kooxo ah waxaad eegtaan shaqooyinka waaxaha dowladaha hoose sida ay dhigayaan Tilmaamaha Qoran ee Shaqadooda (ToRS), ee ku yaalla **Lifaaqa 1aad**. according to their ToRs, which appear in **Annex 1**. Doorta shan shaqo, kadibna kajawaaba su'aalahan mid kasta oo kamid ah:

1. Shaqadu ma waxa ay la xiriirtaa adeeg-bixin, horumarinta kaabayaasha, mise labadaba?
2. Waaxdee ayaa mas'uul ka ah shaqadan?
3. Ilaa heer intee le'eg ayaa dowladda hoose hawshan garabka u ridataa? Maxaa loo baahan yahay si dowladda hoose awood ugu yeelato inay mas'uuliyadda wada qaado?

Waxaad natiijooyinkiina ku gorfayn doontaan gole loo dhan yahay. Tababarihiina ayaa tilmaamo dheeraad ah idin siin doona

**Ogow in WAG: Xeer Ir. 7 uusan faahfaahinin hawlaha waaxaha kala duwan. Waxqabadkan waxaa uu u baahan yahay in Tilmaamaha Qoran ee Shaqada ee waaxda halka ay ka jiraan in lagu daro Lifaaqa 1aad.**

# Faahfaahinta Tallaabooyinka Fulinta iyo Maareynta Miisaaniyadda

## Maareynta Kharashaadka iyo Kaashka

<b>Goorta:</b>	Kadib ansixinta oddoroska miisaaniyadda (R1 ee Sanad-Miisaaniyadeedka (Sanadka X)	
<b>Ujeeddada:</b>	<ul style="list-style-type: none"> <li>In la hubiyo in kutalogalka miisaaniyada si hufan loo maamulo, iyo in lacag-bixintu ay marto geeddi-socodkii loogu talagalay.</li> </ul>	
<b>Natiijada:</b>	Lacagta waa in lagu bixiyaa alaabooyin, shaqooyin, iyo adeegyo iyada oo la tixraacayo miisaaniyad sanadeedka dowladda hoose, taas oo waraaqaheeda rasmiga ah la dhammaystiray, la saxiixay, si qumanna loo kaydiyay.	
<b>Cidda:</b>	Duqa	Wuxuu awood u leeyahay in uu qaado/galo kharashaad sida ku cad Qodob 93, Xeer In. 23
	Xoghayaha Fulinta	Wuxuu awood u leeyahay in qaado/galo kharashaad sida ku cad Qodob 93, Xeer In. 23  Mas'uuliyad ayaa ka saaran in kharashku waafaqsan yahay sharciga, miisaaniyada iyo dakhliga degmada.
	Xakameeyayaa-sha Codka	Waa Agaasimayaasha Waaxaha ee la siiyay awoodda qaadista/galista kharashaadka. Waxaa magacaaba Xoghayaha Fulinta sannad kasta. Waxaa la siiyaa Waaranno-Waaxeed (Eeg xagga hoose)
	Waaxda Maamulka iyo Maalyadda	Qabashada, xakamaynta, iyo xisaabinta dakhliga degmada. Dakhliga waxaa ku jira maalgelinta horumarka hay'adda ka caawiya. Waxay kale xakameysaa, maamushaa lacag bixinta degmada, iyo weliba hantida iyo qaamaha. Waxay masuul ka tahay hawlaha maareynta fulinta miisaaniyada sannad maaliyadeedka cusub, ee ay ka mid tahay furista: <ul style="list-style-type: none"> <li>Food-buugyada (Vote books)</li> <li>Buugaagta Kaashka</li> <li>Abstracts-yada</li> <li>Diiwaanada</li> <li>Akoonada bangiyada</li> </ul> Waxay mas'uul ka tahay diyaarinta iyo fulinta miisaaniyadda rubuclayda ee susunka kaashka (xagga hoose ka eeg) si loo hubiyo in degmadu ay haysato lacag kaash ah oo ku filan lacag-bixinteeda sannad maaliyadeedka oo dhan.
<b>Tabobarka Khuseeya</b>	Cutubyada tabobarka Maamulka Maaliyadda ee dowladdaha hoose	

## Budget Monitoring and Revision

<b>Goorta:</b>	Inta ay socoto Sanad-maaliyadeedka oo dhan. Warbixinta waxqabadka miisaaniyadda ayaa bil walba la soo saaraa.	
<b>Ujeeddada:</b>	<ul style="list-style-type: none"> <li>In la hubiyo in dakhliga dhabta ah iyo kharashaadka miisaaniyadda degmadu aanay u noqon kuwo aad uga duwan dakhliga iyo kharashaadka ay ka kooban tahay miisaaniyadda degmada ee la ansixiyay.</li> </ul>	
<b>Natiijada:</b>	Warbixinada billaha ah ee miisaaniyadda iyo codsiyada dib-u-eegidda miisaaniyadda meesha looga baahdo.	
<b>Cidda:</b>	Duqa / Xoghayaha Fulinta	Waxaa masuuliyadi ka saaran tahay hubinta in adeegyadii degmada la bixiyay iyada oo lagu salaynayo miisaaniyadda sannadlaha ah ee degmada. Waa inuu si dhow ula socdaa horumarka laga samaynayo dakhliga dhabta ah iyo kharashaadka sannadka oo dhan, islamarkaana uu tilmaamaa, tusaale ahaan mararka ay u muuqato in ay jiraan kala duwanaansho u dhexeeyo waxa ku jira miisaaniyadda iyo waxa xaqiiqo ahaan dhacaya. Tani waxa ay waafaqsan tahay mabda'a 'Miisaaniyad-sannadeedka' ee Kulankii 1aad.
	Agaasimayaasha Waaxaha	Sidoo kale doorar ayay ku leeyihiin la-socodka miisaaniyadda waaxahooda. Waa inay soo saaraan warbixinta miisaaniyadda ee billaha ah iyaqo oo la-socodsiiyaya Xoghayaha Fulinta/ Duqa, si ay gacan uga geestaan la-socodka miisaaniyadda iyo tilmaamidda haddii dib-u-eegis ay noqoto lagama maarmaan (xagga hoose ka eeg).
<b>Tabobar Khuseeya:</b>	<i>Local Government Financial Management Training Modules Cutubyada Tabobarka Maamulka Maaliyadda ee Dowladaha Hoose</i>	

## Agabyo u Muhiim ah Fulinta Miisaaniyadda iyo Maareynta Kharashaadka

### Waa maxay Vote maamule

Xoghayaha ayaa magacaabaya Vote Maamulayaal (Agaasime waaxeedyada), ka dib insixinta miisaaniyad Qiyaaseedka iyo bixinta warran waaxeedka, taas oo tilmaameysa xiddiga awoodsiinta kharash bixinta sanad gudihiis. Xoghayaha ayaa masuul ka noqon doona kharash gelid kasta ee degmo oo ka sareysa xiddiga waaranka waa in uu daba-galaa fulinteeda isagoo la shaqeynaya vote ilaaliyaasha

### Waa maxay Votebook?

Billowga sanad maaliyadeed kasta, miisaaniyad baahiyeedka loo ansixiyey Waaxda waa in la geliyaa document lagu magacaabo 'Votebuug') Formka votebuugga waxaa laga heli karayaa Buuga maamulka maaliyadda ee dowladaha hoose Form E6



### Waa maxay Waaran Waaxeed

Waa foom sheegaya in agaasime waaxeedku (Vote Maamule) loo awoodsiyey xaddi uu kharash-gareeyo sanad maaliyadeed kasta. Foomka waaran waaxeedka Buuga maamulka maaliyadda ee dowladaha hoose, foom E1

### Waa maxay miisaaniyadda Susunka kaashku?

Waa miisaaniyad ay diyaarisoo waaxda Maamulka Maaliyaddu rubuc-sanad kasta, taas oo qeexaysa lacagaha ay degmadu u baahantay rubuca sanadka (seddexda bilood) ee soo socda, hadday noqoto kharashaad soo noq-noqonaya iyo kuwo horumarinta oo gelaya miisaaniyadda degmada. Foomka waaran-waaxeed waxaa laga heli karaa *Buugga Maamulka Maaliyadda ee Dowladaha Hoose, Shaxda B8.*

### Waa maxay warbixinta billaha waxqabadka miisaaniyaddu?

Warbixintan waxaa diyaarinaya agaasimayaasha waaxaha, waxaana ay u gudbinayaan Xoghayaha Fulinta, si ay u muujiso farqiga u dhaxeeya miisaaniyadda asalka ahayd, wax ka beddel oggolaansho haysta, iyo macaamilka (lacagaha soo xarooday ama baxay) ilaa taariikhdaas. Tani waxay degmada ka caawinaysaa inay la socdaan in lacag bixintooda iyo dakhligoodu uu saxan yahay iyo inay dib u eegis u baahan tahay, tusaale ahaan dib-u-eegis miisaaniyadeed oo kale in loo baahanyahay. Foomka Miisaaniyadda Susunka Kaashka ee seddex biloodlaha ah waxaa laga heli karaa *Buugga Maamulka Maaliyadda ee Dowladaha Hoose, Shaxda B9.*

## Iibsashada/Hanashada Badeecadaha, Shaqooyinka, iyo Adeegyada

<b>Goorta:</b>	Waxay soconaysaa sannadka miisaaniyadda oo dhan. Waxay ka danbaysaa ansixinta miisaaniyadda iyo qorshaha hanashada/wax iibsiga ee degmada	
<b>Hadafka:</b>	<ul style="list-style-type: none"> <li>Hanashada badeecadaha, shaqooyinka, iyo adeegyada loo baahan yahay si loo fuliyo qorshaha sannad hawleed ee degmada. Waa inay waafaqdaa halbeegga la ansixiyay ee tilmaamaha hanashada dowladda hoose.</li> </ul>	
<b>Natiijada:</b>	Alaabo/badeeco, shaqooyin, iyo adeegyo la hantiyay/soo iibsadey, iyada oo la raacayo hannaanka u yaal, taas oo waraaqaheeda rasmiga ah la dhammaystiray, la saxiixay, si qumanna loo kaydiyay.	
<b>Cidda:</b>	Duqa / Xoghayaha Fulinta	Xoghayaha Fulintu wuxuu ka mas'uul yahay: <ul style="list-style-type: none"> <li>Dhisidda guddiga qandaraasyada</li> <li>Xayasiiska fursadaha qandaraasyada</li> <li>Magacaabista guddiga qiimaynta</li> <li>Baahinta go'aanada qandaraas-bixinta</li> </ul>


		<ul style="list-style-type: none"> <li>• Saiixidda heshiisyada qandaraasyada</li> <li>• Dabogelista cabashooyinka ka yimaadda la taliyayaasha, adeeg-bixiyaasha, iwm</li> <li>• Hubinta in qandaraasyada loo fuliyo sidii lagu heshiiyay.</li> <li>• Hubinta in lacag loo hayo hanasho/wax-soo-iibsasho kasta oo degmadu samayso</li> <li>• Hubinta in shaqaalaha hanashadu/wax iibsigu ay ku dhaqmaan buugga ay soo saartay WAG</li> </ul>
	Guddiga Qandaraaska ee Degmada	<ul style="list-style-type: none"> <li>• Oggolaanshaha cidda lagu darayo/laga saarayo diiwaanka la taliyayaasha, adeeg-bixiyayaasha, qalab-bixiyayaasha.</li> <li>• Ka-fiirsashada/eegista iyo ansixinta dokumentiyada la xiriira oo dhan inta aan geeddi-socod hanasho la bilaabin. Tusaale ahaan, dokumentiyada dhinacyada qandaraaska codsanaya.</li> <li>• Eegista warbixinnada qiimaynta, iyo ansixinta bixintaqandaraasyada.</li> <li>• Sharrixidda kooxda gorgortanka, ansixinta qorshaha gorgortanka, iyo natiijooyinkooda.</li> <li>• Dhawrista hadal-qoraalka iyo diiwaangelinta dhammaan go'aamada iyo soo-jeedimaha shirka.</li> <li>• 3 biloodba warbixin ka siin WAG (MOI) iyo PBA dhammaan hawlgallada hanasho ee degmada.</li> </ul> <p>Xubnaha Guddiga Qandaraasyada Degmada waxay ku muujisanyihiin hoos. (<b>Eeg jaantuska 7aad</b>)</p>
	Guddiga Qiimeynta	Xubnaha Guddiga Qiimeynta waa sarkaalka wax-soo-iibsigu, injineerka degmada, injineerka Mopw iyo xubin ka tirsan Guddiga Qandaraasyada ee Puntland. Geeddi-socodka qiimeynta ka dib waxaa ay u soo gudbiyaan guddiga qandaraasyada ee degmada si uu u ansaxiyo.
	WAG (MOI)	Mas'uuliyad ayaa ka saaran isku-duwidda guud, hagidda, iyo horumarinta dhaqannada iyo hannaanada hanashada dowladaha hoose.
	Hay'adda Wax-soo-iibsigu Dowladda / <i>Public Procurement Authority</i> (PPA)	<p>Waa hay'ad dhexe. Kaalin muhiim ah ayay ku leedahay la-socoshada hawlgallada degmooyinku wax ku hantaan/iibsadaan, kuwaas oo ay ka mid yihiin:</p> <ul style="list-style-type: none"> <li>• La-socoshada iyo dhaqan gelinta ku dhaqanka Xeerka Hanashada/Wax-soo-iibsigu.</li> <li>• La-socodka iyo kormeerka wax-soo-iibsigu dowladda.</li> <li>• Helidda macluumaad ku saabsan hanashada/wax-soo-iibsigu oo ay ka hesho hay'adaha wax-soo-iibsigu halka ay lagamamaarmaan tahay.</li> <li>• Xubin ka tirsan PPA oo lagu daro saxiixayaasha lacag-bixinta mashaariicda. Arrintan ayaa looga danleeyahay in lagu muujiyo in hay'addu ay ansaxisey hawlaha mashruuca.</li> </ul>
<b>Tababarka Khuseeya:</b>	<i>Local Government Procurement for Goods, Works and Services /</i> Hanashada Dowladaha Hoose ee Alaabta/Badeecooyinka, Shaqooyinka, iyo	

**Su'aalo La Gorfaynayo**

Su'aalahan soo socda u gorfeeya labo-labo, dabadeedna kaga hadla gole loo dhan yahay.

- Ilaa heerkee ayay diyaarsan yihiin nidaamyada hanashada/wax-soo-iibsiga (*procurement*) alaabta/badeecooyinka, shaqooyinka, iyo adeegyada ee degmadiinu? Miyaa loo maraa hab dhisan iyo tilmaamo cad iyo buug?
- Waa kuwee dhinacyada aad isleedahay waa laga horumarin karaa hannaanka hanashada ee degmadiina? Waa maxay aragtiyahaaga ku saabsan sidii loo horumarin lahaa?.

## Jaantuska 7aad. Guddiga Qandaraasyada ee Degmada



Sida kucad Buugga Hanashada/Wax iibsiga Dowladaha Hoose Qaybtiisa 2.5, Guddoomiyaha iyo xubnaha kale ee Guddiga waxaa magacaabaya Xoghayaha Fulintu si ay ushaqeeyaan muddo saddex sano ah. Dib ayaana loo magacaabi karaa xubnaha iyo guddoomiyaha.

Xubnaha waxaa lagu dooranayaa aqoontooda iyo xirfadooda. Waa inay kasoo baxaan xilka guddiga.

Xubnaha guddiga siyaasiyiin looma magacaabi karo, (Duqa Degmada iyo Xildhibaanada Golaha Deegaanka )

## Maareynta Hantida

<b>Goorta:</b>	Soconaysaa Sannad-Maaliyadeedka oo dhan.	
<b>Hadafka:</b>	Hubinta in hantida degmada loo maareeyo si saamaxaysa in faa'ideeda laga gun gaaro. Hantid waa il-dakhli oo muhiim ah oo degmadu leedahay (Tusaale ahaan kiro iyo ujuuro laga helo), Sidaa darteed waxaa muhiim ah in loo maamulo, loona dhawro si feejignaansho ku jirto.	
<b>Natiijada:</b>	Diiwaannada hantida ma-guurtada, oo caddaynaya magaca, meesha, lambarka tixraaca, waxa soo kordha ama baxa ee hanti kasta oo degmadu leedahay. Danta laga leeyahay diiwaannadaasi waa la-socoshada hantida iyo weliba diyaarinta iyo samaynta hawlaha dayactirka	
<b>Cidda:</b>	Waaxda Maamulka iyo Maaliyadda	<ul style="list-style-type: none"> <li>• Haynta/dhawrista Diiwaannada Hantida</li> <li>• Dhaqangelinta hababka xisaabinta duugoowga hantida Raacitaanka hannaanka loo marayo hantida aan loo baahnayn, khasaaraha, iyo xooritaanka/tuuritaanka.</li> </ul>
	Waaxda Dakhliga	Ururinta, iyo qabashada, kiraynta hantida degmada iyo dakhligooda.
	Guddiga Tirakoobka	<p>Tirakoobidda/sahaminta sannadlaha ah ee hantida degmada si go'aan looga qaato, loogana warbixiyo:</p> <ul style="list-style-type: none"> <li>• Hantida maqan.</li> <li>• Hantida dheeraadka ah</li> <li>• Xaaladda guud ee hantida, ma dayactiran tahay mise way dayacan tahay.</li> <li>• Hantida ay tahay in la yabooho ama la iibiyo, iyada oo la raacayo nidaamka saxda ah ee qandaraasyada iyo yaboohitaanka.</li> <li>• Hantida lagu wareejin karo ama loogu deeqi karo wakaalad ama hay'ad kale danta guud awgeed.</li> </ul>
<b>Tababarka Khuseeya:</b>	<i>Local Government Financial Management Training Modules / Cutubyada tababarka Maamulka Maaliyadda Dowladaha Hoose.</i>	

## Maareynta Deymaha iyo Amaahaha

<b>Goorta:</b>	<b>Waxay soconaysaa sannad miisaaniyadeedka oo dhan.</b>	
<b>Ujeeddada:</b>	<p>Lacagta degmada deeynta kaga maqan waa hanti aan laga faa'iidsan karayn maaddaama ay ka hor-istaagayso degmada inay bixiso adeegyo ama horumariso kaabayaal imminka. Sidoo kale waxa ay degmada ku adkaynaysaa inay si taabogal ah u fuliso miisaaniyadeeda.</p> <p>Sidaa darteed waxa muhiim ah in la yareeyo deymaha ka maqan degmada iyada oo lacagta lagu soo uruurinayo hab nidaamsan, degdeg ah, oo dardar leh.</p> <p>Sidoo kale waxaa muhiim ah deymaha ay degmadu u qaadato qaab dakhli ahaan. Waa in si taxaddar leh loola socdaa hannaanka qaanbaxa.</p> <p>Xaaladaha ay degmadu deeyn ku qaadani karayso waxaa lagu taxay hoos.</p>	
<b>Natiijada:</b>	<p>Qorshe cad oo lagu soo uruurinayo deymaha degmadu leedahay.</p> <p>Qorshe cad, iyo lacag lagu bixinayo qaamaha degmada wakhtigeeda marka la gaaro.</p>	
<b>Cidda:</b>	Waaxda Maamulka iyo Maaliyadda	<p>Waxa ay kala shaqaynaysaa Waaxda Dakhliga hubinta in deymaha degmada lagu soo xareeyo wakhtigooda.</p> <p>Diyaarinta jadwalka qaanbaxa degmada si Golaha Degmadu u ansixiyo. Jadwalka qaanbaxa waxaa loo samaynayaa deeyn kasta oo degmadu gasho.</p>
	Waaxda Dakhliga	Daba-socodka iyo ururinta cashuuraha aan soo xaroon ee sannadihii hore.
	Golaha Degmada	<p>Ansixinta jadwalka qaanbaxa ee degmada ee loo samaynayo deeyn kasta.</p> <p>Bixinta oggolaansho qoraal ah marka la qaadaniyo deeynta qaddarkeedu u dhaxeeyo 10-20% dakhliga gaarka ee degmada ee sannad maaliyadeedkaas.</p>
<b>Tababarka Khuseeya:</b>	<i>Local Government Financial Management Training Modules / Cutubyada tababarka Maamulka Maaliyadda Dowladaha Hoose.</i>	



### Su'aalo La Gorfayno

Eeg qoraalka hoose ee tilmaamaya qaamaha degmada ee laga soo xigtay Siyaasadda Maaliyadda ee Dowladaha Hoose.

- Maxaa tusaale u noqon kara xaaladaha ay degmooyinku xaq u leeyihiin inay lacag amaahato?
- Waa kuwee xaaladaha ay kula tahay inaan degmooyinku xaq u lahaynd inay lacag amaahdaan? Waayo?

## **Qaamaha/Deeymaha Degmada**

*Laga soo xigtay siyaasadda Maaliyadda ee Dowladaha Hoose.*

### **8.5 Lacag Amaahashada Golaha Degmada**

8.5.1. Xaalad ayaa iman karta Golaha Degmada ku qasbaysa inay lacag amaahdaan, sida xaalad degdeg ah, masiibo dabiici ah, ama xaalad amni.

8.5.2. Siyaasad #1: Golaha Degmada wuxuu lacag ka amaahan karaa oo keliya hay'adaha maaliyadeed ee la aqoonsan yahay, diiwaan gashansharciiyerysana.

8.5.3. Siyaasad # 2: Xoghayaha Fulinta Degmadu waxa uu qoraal oggolaansho ah ka helayaa Guddiga Fulinta haddii deeyntu ka yartahay 10% dakhliga gaarka ah ee degmada. Haddii deeyntu u dhaxayso 10-20%, waxaa qasab ah inuu oggolaansho ka helo Golaha Degmada. Xaddiga qaantu ee sannad maaliyadeed waa inaanay ka badan 20% dakhliga gaarka ah ee degmada.

8.5.4. Siyaasad #3: Waxa fiican lacagta la amaahday in sannad maaliyadeedka soo socda lagu bixiyo. Haddii ay suurto gali weeydo waa in aanay qaantu dhaafin afar sano.

8.5.5. Siyaasad #4: Jadwalka qaanbaxa waa in Golaha Degmadu ansixiyo.

8.5.6. Siyaasad #5: Lacagta la amaahday maareynteeda waa in loo maraa hannaanada iyo sharciyada maaliyadeed ee u yaal degmada. Golaha Degmadu waxa uu ansixinayaa miisaaniyad kaabid tilmaamaysa halka ay ku baxayso lacagta la amaahday.



## **Layliga 6aad: Daneeyayaasha Fulinta Miisaaniyada iyo Maareynta Kharashaadka**

Layligaan idinka ayaa la idiin diyaariyey si aad si dhow ugu eegtaan masuuliyadaha kala duwan ee tallaabada fulinta iyo ku dhaqanka miisaaniyadda ee halkaan kore ku faah-faahsan.


Qeybt kasta oo ka mid ah fulinta iyo ku dhaqanka miisaaniyadda caddie cidda ku lugta leh hoos ku qor. U shaqeeya kooxo yar-yar soo gudbiya warbixinta kooxihiina.

Qeybuhu waa:

- Maamulka kharashka iyo qul-qulka lacagta
- Dakhli Ururin
- Dabagalka miisaaniyadda iyo ku noqoshadeeda
- Soo iibsiga
- Maamulka hantida
- Maamulka amaamaha iyo deymaha

# Xaashida Layliska 1aad: Daneeyayaasha Fulinta Miisaaniyada iyo Maareynta Kharashaadka

Daneeyayaasha DPP&BGGA Dhaqangalinta miisaaniyadda (Puntland) **Meelmarinta iyo Maarynta Miisaaniyadda**



Daneeyayaal

Golaha degaanka							
Duqa							
Xoghayaha Fulinta							
Agaasimayaasha Waaxaha Degmada							
Waaxda Maaliyadda iyo Maamulka							
Waaxda Dakhliga							
Waaxda Qorshaynta							
Waaxda Hawlaha guud							
Waaxda Arrimaha Bulshada							
Wasaaradda Arrimaha Gudaha							

## Kulanka 4aad: Warbixinta Xisaabaadka iyo Maaliyadda

### Ujeeddooyinka Kulanka:

Dhammaadka kulankan, ka qaybgalayaashu waxa ay awood u yeelan doonaan in ay:

- Tilmaamaan shaqooyinka ugu muhiimsan ee la xiriira tallaabada War-bixinta Xisaabaadka iyo Maaliyadda, iyo cidda ka mas'uulka ah hawlaha.
- Sharraxaan asalka xisaabaadka iyo xisaabinta (*book-keeping*) degmooyinka iyo in ay sharraxaad ka bixiyaan cunsurada (*elements*) ugu muhiimsan labada qayboodba.
- Sharraxaan baahida loo qabo in dowladaha hoose iyo tan dhexeba adeegsadaan Halbeegga Jadwalka Xisaabtirsiiyeyada/xisaabtirsiyada.
- Sheegaan warbixin maaliyeed ugu muhiimsan ee looga baahan yahay degmada.

### Xisaabaadka iyo Warbixinaha Maaliyadda

Waxaa ka mid ah:

- Xisaabaadka, Diiwaangelinta, iyo Warbixinta Maaliyadda
- Nidaamka Maareeynta Maaliyadda iyo Macluumaadka Isku dhafan, AIMS, BIMS
- Jadwalka/Jaantuska Xisaabtirsiyada



### Tallaabadan Maxay Koobsanaysaa?

- Tallaabadan mereegta DPP&BG ga ka tirsani waxa ay koobsanaysaa dhinacyo badan oo la xiriira xisaabaadka iyo warbixinnada ay tahay in degmadu adeegsato si ay u fuliso miisaaniyadda, kharashaadkana u maarayso.
- Waxaa lagu dulmarayaa barnaamijka xisaabaadka ee la adeegsanayo.
- Waxa kale dulmarayaa bilawga xisaabaadka iyo danta laga leeyahay, iyo weliba nidaamka xisaabinta ee la adeegsanayo.
- Waxa kale tallaabadan ku jira horudhaca Jaantuska/Jadwalka Xisaabtirsiyada.
- Warbixinnada Maaliyadeed iyaga waa lagu sharxay- warbixinta billaha, seddex biloodlaha, iyo warbixinta sannadka.

### **Waa maxay ujeeddada xisaabaadka degmada**

Waxaa jira sababo badan oo ka dhigaya xisaabaadka degmada muhiim, si loo:

- Muujiyo in sharciga la raacay, oo la buuxiyay shuruudihii loo baahnaa.
- Muujiyo dakhliga ay uruurisay degmadu.
- Suurtogeliyo in dadweeynuhu kula xisaabtamaan degmada sida loo isticmaalay lacagta ay cashuurta u bixiyaan.
- Caddeeyo sida loogu siman yahay isticmaalka hantida degmada.
- Muujiyo awoodda dhaqaale ee degmada, hantida ay leedahay (t.a. lacagta kaashaka ah) iyo qaamaha lagu leeyahay.
- Muujiyo xaaladda maaliyadeed ee degmada.
- Caddeeyo sida hantida loogu bixiyay adeegyada kala duwan.
- Adeegsado tixraac ahaan miisaaniyad samaynada mustaqbalka.
- Caddeeyo in siyaasadihii la hirgaliyay si karti iyo karaan leh.
- Siiyo macluumaad daneeyayaasha.

### **Barnaamijkee ayaa loo adeegsanayaa xisaabaadka degmada**



Degmooyinka qaar waxa ay hadda isticmaalaan AIMS iyo BIMS (*Accounting and Information Management System and Billing Information Management System*). Waa xirmo barnaamij ay fududdahay in la isticmaalo. Waxa ay suurto gelisaa in xisaabgelinta oo dhan iyo soo saarista warbixinta maaliyadda kombiyuutar lagu sameeyo. Wakhti ayaa lagu dhawrayaa adeegsiga barnaamijyada noocaas oo kale ah waxaana ay noqon karaan kuwo ka hufan xisaabaadka gacanta lagu sameeyo.

Heerka dowladda dhexe, waxa la bilaabay barnaamij Nidaamka Maamulka Maaliyadda iyo Macluumaadka Isku Dhafan ee IFIMS, oo loo daadajin doono heerka degmooyinka.



### **Su'aalaha Gorfaynta**

- Waa noocma nidaamka xisaabaadka iyo xisaab-haynta ee hadda laga isticmaalo degmadiina?
- Sidee baa loo diiwaangeliyaa macluumaadka, ma barnaamij kombiyuutar, mise gacanta?
- Waa maxay waxtarka nidaamka hadda aad isticmaasaan? Waa kuwee meelaha u baahan hagaajinta iyo sare u qaadista?

## Waa Maxay Seeska Xisaabaadka Degmadu

Degmooyinku hadda waxay isticmaalaan nidaam xisaabeed uu aasaas yahay kaash (caddaan). Taasi waxay ka dhigantahay waxa dakhli la aqoonsanayaa, la xaraynayaa/diiwaangelinayaa marka lacag caddaan (kaash) ah la qabto. Sidoo kale waxaa kharash la aqoonsanayaa oo la diiwaangelinayaa marka lacag caddaan (kaash) ah la bixiyo.

Markay timaaddo warbixinta, kharashaadka iyo dakhliga waxaa lagu qorayaa warbixinnada maaliyadeed ee hadda lacagta caddaanka (kaashka) ah ee la qabtay ama la bixiyay.

Nidaam-xisaabeedka ku dhisan caddaanka waxay ku fiicantahay arrimo dhawr ah oo ay ka mid tahay in adeegsigiisu fudud yahay, kharash ahaanna uu jaban yahay. Dhanka kale, wax uu ku xunyahay baa jira. Tusaale ahaan, qofka adeegsanaya akoonka ma ogaan karo kharashaadka guud ee degmada sannadka oo dhan maaddaama aan kharashaadka qaar weli la bixin.

Sidaas darteed, waxa la filayaa in degmooyinku u guuri doonaan nidaamyadan:



### **Nidaamkee xisaab-hayn ayaa ay degmooyinku isticmaalaan?**

Xisaab-hayntu (*book-keeping*) waa diiwaangelinta nidaamsan ee dhammaan macaamilka degmada, *markay dhacaan*.

Waxaa la isticmaalaa Nidaamka laba-jeer gelinta, oo si fudud marka loo sheego ah, in tacaamul kasta (Tusaale ahaan lacag dirid) labo dhaqaaq ayaa la diiwaangelinayaa:

- Lacagta ka baxaysa hal akoon
- Lacagta ku dhacaysa akoonka kale.

### **Diiwaanadee ayay tahay in diyaariyaan Degmooyinku?**

- Diiwaan xisaabeed (Journal)
- Buugaagta Lacagta Caddaanka/kaash (Cash books)
- Buugaagta Baaqi-tuska (Votebook),
- Buugaagta lafogurka Lacagta Caddaanka/cillanaadyo/ (cash analysis books)
- Diiwaanka guud Xisaabtirsiga iyo kaabaha (*general ledger and subsidiary ledger*)
- Diiwaanno: sida Hantida, Qandaraasyada, iyo Dakhliga.

Waxa masuuliyadda ilaalinta diiwaannadan iska leh Waaxda Maamulka iyo Maaliyadda.

### **Waa Maxay Jadwalka Xisaabtirsiyadu?**

Jadwalka xisaabtirsiyadu waa liis lagu uruuriyo magacyada iyo sumadaha (code) xisaabtirsiyada kala duwan oo lagu isticmaalo Maamulka Maaliyadda Guud PFM. Dowladaha Hoose waa inay isticmaalaan sumadayn midaysan markay diyaarinayaan miisaaniyadahooda, xisaabtirsiyadooda, iyo warbixinadooda.

Jadwalka waxaa soo saara Xisaabiyaha Guud, waxaana ku dabaqmaysaa dowladaha hoose iyo dhexe.

Taas waxa ay ka dhigan tahay:

- Ma jirayo jahawareer ka dhalanaya in heerarka kala duwan ee dowladdu adeegsadaan sumado kala duwan.
- Waxaa la is barbar dhigi karaa heerarka kala duwan ee dowladda iyo dowladaha hoose laftarkooda.
- Xawilaadda lacagaha dowladda dhexe siiso degmooyinka ayaa fududeynayaa
- Hirgalinta nidaamka IFMIS ayaa la fudaydinayaa.

Jadwalka Xisaabtirsiyada waxaa laga heli karaa *Tusaha Maamulka Maaliyadda Dowladaha Hoose., Lifaafa 1aad.*

### **Waa Maxay Warbixinaha Maaliyadeed ee Degmooyinka Laga Rabo?**

Ujeeddada diiwaangelinta tacaamulku maaliyadeed waa in la helo hab isla xisaabtan maaliyadeed ee khuseeya maareeyayaasha iyo shaqaalaha heerarka kala duwan ee degmada. Natiijada kama dambaysta ah ee Nidaam Xisaabaad waa inuu ku gabagaboobo warbixinno maaliyadeed oo waafi ah oo lagu kalsoonaan karo. Warbixinaha waxaa akhrinaaya daneeyayaasha kala duwan si ay go'aanno u gaaraan.

Degmooyinku waa in ay soo saaraan warbixinno maaliyadeed oo bille ah, saddex-biloodle ah, iyo sannad-guuro iyaga oo raacaya habka ku dhisan lacagta caddaanka (kaashaka). Waaxda Maamulka iyo Maaliyadda ayaa ka mas'uul ah diyaarinta warbixinta si Xoghayaha Fulintu u gudbiyo.

### **Warbixinnaha Maaliyadeed ee Billaha ah:**

Xoghaye Fulin oo kasta waxaa laga rabaa in uu diyaariyo warbixinno maaliyadeed oo bille ah 15ka bisha soo socota wakhti aan ka danbaynin, una gudbiyo Guddida Fulinta. Warbixintu waa kuwan:

1. Warbinta Waafiga ee Lacag Qabasada iyo Bixinta ee Degmada, (*District Consolidated Statement of Cash Receipts and Payments*).
2. Warbixinta isbarbardhigga Miisaaniyadda iyo Lacagta Dhabta ah ee Degmada, (*District Statement of Comparison of Budget and Actual Amount*)
3. Warbixinta Kharashaadka Mashaariicda/Shaqooyinka ee Degmada, (*District Statement of Payments by Programmes / Activities/ Functions*):
4. Warbixinta Waafiga ee Susunka Caddaanka/kaashka ee Bisha, (*District Consolidated Cash Flow Statement for the month*).

### **Warbixinnaha Maaliyadeed ee Seddex biloodlaha ah**

Xoghaye Fulin oo kasta waxaa laga rabaa in uu diyaariyo warbixinno maaliyadeed oo saddex biloodle ah 15ka bisha xigta (3da bilood markay dhammaato) wakhti aan ka danbaynin, una gudbiyo Guddida Fulinta. Warbixinnada waa kuwan:

1. Warbinta Waafiga ee Lacag Qabasada iyo Bixinta ee Seddexda Bilood.
2. Warbixinta isbarbardhigga Miisaaniyadda iyo Lacagta Dhabta ah ee Seddexda Bilood..
3. Warbixinta Kharashaadka Mashaariicda/Shaqooyinka ee Seddexda Bilood.
4. Warbixinta Waafiga ee Susunka lacagta Caddaanka/kaashka ah ee Saddexda Bilood.

### **Warbixinnaha Sannadlaha ah**

Xoghaye Fulineed oo kasta waxaa laga rabaa inuu soo saaro warbixinno maaliyadeed oo sannadle ah saddex bilood gudahood marka ammin xisaabaadku dhamaado. Warbixinaha wuxuu u gudbinayaa Hantidhawraha Guud, Waa inay ka koobnaata:

1. Warbixinta Waafiga ee Lacag Qabasada iyo Bixinta ee Degmada
2. Warbixinta isbarbardhigga Miisaaniyadda iyo lacagta Dhabta ah ee Degmada.
3. Warbixinta Kharashaadka Mashaariicda/Shaqooyinka ee Degmada.
4. Warbixinta Waafiga ee Susunka Caddaanka/kaashka ee Degmada.



## Layliga 7aad: Mabaa'diida Nidaamka Xisaabaadka Wanaagsan

Tabobarro dheeraad ah ayaa la siinayaa dadka toos ugu lug leh hannaanka xisaabaadka degmooyinka iyo warbixinada maaliyadeed. Haseyeeshee waa muhiim in dhammaan hawl-wadeennada iyo wakiillada degmadu ay fahmaan mabaa'diida nidaam xisaabaadka wanaagsan.

Labo-labo u shaqeeya oomid kasta oo ka mid ah mabaa'diida (bidix ku yaalla) ku hagaajiya qeexitaankiisa ku habboon (dhinaca bidix):

### 1. Isu-dheellitirka Waxtarka iyo Qiimaha

A. Hab xisaabaadku waa inuu dabacsanaada si uu dabooli karo baahiyaha soo kordha. Tusaale ahaan, halbeeg xisaabeed sida IPSAC wuxuu u baahan karaa warbixin naqshad cusub leh.

### 2. Dabacsanaan uu ku qaabili karo baahiyaha mustaqbalka

B. Dadka isticmaalaya macluumaadka laga helo nidaamka xisaabaadka degmadu waxay ku tiirsan yihiin warbixinno kala duwan oo ka yimid nidaam xisaabeedka, waxaana loo baahan yahay warbixinnada in loo helo si dhakhso ah oo lagu kalsoonaan karo. Waa in sidoo kale xisaabta lagu darsadaa

### 3. War-siin Taabogal ah

C. Nidaam Xisaabeed hufani waa inuu sidoo kale hubiyaa inaan gefaf/khaladaad iyo khayaamo wa ku helid dhicin.

### 4. Xakamayaal daakhli ah

D. Nidaam xisaabeed waxaa loo sameeyay inuu xog siiyo dadka isticmaalaya. Haddana ma aha in kharashka samaynta nidaamka iyo warbixin kala bixitaanku ka bato dheefta adeegsadyaashu ay ka helayaan.

## Kulanka 5aad: Hantidhowrka iyo La-socodka & Qiimeynta (L&Q)

### Ujeeddooyinka Kulanka:

Marka uu dhammaado kulanku, ka-qaybgalayaashu waxa ay awood u yeelan doonaan:

- Sharrixidda shaqada hantidhawrka degmada iyo doorarka iyo mas'uuliyadaha kala duwan ee hannaanka hantidhawrka.
- Fahanka faraqa u dhaxeeya hantidhawrka iyo kormeerka iyo qiimaynta (L&Q)
- Qeexidda qaab-dhismeedka la-socodka iyo qiimaynta ee loo baahan yahay si loo qiimeeyo natiijooyinka waxqabadyada horumarineed ee degmada, oo ay ku jirto la-socodka saamaynta ka-qayb-qaadashadu.

### Hantidhowrka iyo L&Q

Waxay koobsanaysaa:

- Hantidhawrka Gudaha iyo Guddiga Hantidhawrka
- Hantidhawrka hawlaha Hanashada/wax-soo-iibsiga)
- Nidaamka Kormeerka iyo Qiimaynta Degmada, hannaankooda, iyo agabkooda.
- La-socodka Saamaynta ee Ka-qaybqaybgalka ku-dhisan/loo dhan yahay



### Tallaabadan Maxay Koobsanaysaa?

- Tallaabadan ka tirsan mareegta DPP&BG waxay sharraxaad ka bixinaysaa faraqa u dhaxeeya Hantidhawrka Dakhliga ah ee Degmada iyo La-socodka & Qiimaynta (L&Q)
- Waxa kale oo ay soo bandhigaysaa guddiga hantidhawrka gudaha iyo hantidhawrka hanashada/wax-soo-iibsiga.
- Waxay sharaxaad ka bixinaysaa nidaamka la-socodka iyo qiimaynta oo ay ku jirto ka-qaybgalka bulshadu, sida la-socodka saamaynta ka-qaybgalka ku-salaysan.



Hantidhawrka iyo L&Q (La-socodka iyo Qiimayntu) waxaa la iskaga dhigay hal tallaabo inkasta oo ay yihiin labo shaqo oo kala duwan, oo leh ujeeddooyin kala duwan, sida aynu hoos ku arki doonno.

Inkasta oo ay u muuqdaan labadan shaqo tallaabada ugu dambaysa ee mareegta DPP&BG haddana waxaa la qaban karaa hawlahaan xilli kasta. Tusaale ahaan, qiimaynta mashruuca waxaa la qaban karaa marka lagu guda jiro "Fulinta Miisaaniyadda," halka hantidhawrka daakhiliga ahna ay wadayso hawshiisa unugga qaabilsan inta ay socoto mareegta DPP&BG ga oo dhan



### **Waa Maxay Unugga Hantidhawrka Guduhu?**

Ujeeddada unugga hantidhawrka guduhu waa inuu ka caawiyo degmada gaarista yoolalkeeda istiraatiijiga ah. Unuggu wuxuu noqonayaa laan madax bannaan oo ka tirsan maamulka degmada. Shaqadeedu waxa ay noqonaysaa inay samayso shaqada hantidhawrka, hubinta, la talinta, iyo dabagelista shaqooyinka si loo hubiyo in hannaanadu ay u shaqaynayaan sidii loogu talagalay si loo gaaro yoolalka degmada. Waxa kale unuggu samaynayaa soo-jeedinno lagu horumarinayo hawlgallada degmada.

Gaar ahaan, shaqada unuggu waxaa ka mid ah:

- Dib-u-eegista nidaamyada jira si loo hubiyo inay u shaqaynayaan si taabagal ah, iyo sidii loogu talagalay.
- Qabashada indho-indhaynta lagu hubinayo in sharciyada iyo hannaanada sidooda loo raaco, iyo waajibka hantidhawrka.
- Samaynta hantidhawrka ka hor iyo kadib xawilaadaha.
- La-socoshada/kormeerista hirgelinta soo-jeedimihii hore.
- Shaqooyin la-talin ah.
- Samaynta baaritaanno kedis ah.

### **Waa maxay nidaamka La-socodka & Qiimaynta Degmadu**

Ujeeddada La-socodka iyo Qiimayntu ee degmadu waa la-socoshada iyo qiimaynta natiijooyinka adeeg-bixinta iyo horumarinta kaabayaasha ee ka midka ah DDF-ka iyo Qorshe-Hawleedka Sannadka ee degmada, si loo ogaado inay yeesheen saamayntii loo baahnaa ee ahayd hagaajinta/horumarinta nolosha muwaadiniinta.

Tusaale ahaan:

- Dugsi cusub hadday degmadu dhistay, waa maxay saamayntiisa marka laga eego dhanka iskuul isqorista iyo xaadiriska xiisadaha?
- Haddii la sameeyay barnaamij lagu maamulayo qashinka adkaha ah (waste solid management), maxay noqotay saamayntiisa la-xiriira yaraynta mushkiladaha caafimaad ee qashinka adkaha ah sababo, sida cudurrada faafa?

Saamayntaas haddaan la cabbirin, way ku adkaanaysaa degmada inay ogaato in lacagta ku baxday mashaariicdaas laga faa'iiday iyo in ay wanaagsanaan lahayd in meel kale la geliyo.


### **Maxay tani ina tusaysaa?**

Tusaalayaasha sare waxa ay muujinayaan kala duwanaanshaha Hantidhawrka Gudaha iyo La-socodka iyo Qiimaynta. Hannaanka hore (Hantidhawrka Gudaha) wuxuu u fiirsanayaa habsami u-socodka maamulka degmada hay'ad (urur) ahaan, si loo ogaado qaabka loo horumarin karo, si degmadu u gaaro yoolalkeeda.

Hannaanka kale isagu wuxuu eegayaa saamaynta hawlgallada degmadu ee waafaqsan DDF-ka iyo Qorshe Hawleedka Sannadka. Wuxuu isku dayaa inuu cabbiro ilaa heerka waxqabadyadaasi ay u hagaajiyeen nolosha bulshada degmada.

# Hantidhawrka Gudaha ee Degmada

## Jaantuska 8aad: Qaab-dhismeedka Hantidhawrka Gudaha ah ee Degmada



### Dhismaha Guddida Hantidhawrka Gudaha ee Degmada

- Tirada xubnuhu waxa ay u dhaxaysaa saddex ilaa toddobo (Degmooyinka darajada A, waxa ugu yaraan kara 5 xubnood)
- Muddo-xileedku waa 3 sano, waxaana qofka dib loo magacaabi karaa mar kale (3 sano). ( Waxaa soo jeedaya Guddoomiyaha waxaana ansixiya Golaha degaanka).
- Xubnaha guddida waxaa magacaabaya Duqa degmada.
- Xubnaha guddidu waxa ay sharraxayaan Guddoomiye iyo Xoghaye.
- Shuruudaha iyo arrimaha la tixgalinayo xubinnimada waa:
  - Ugu yaraan hal xubin ayaa laga dooranayaa hawl-wadeenada sarsare ee degmada (Agaasime Waaxeedyada)
  - Labo xubnood waxa ay ka imanayaan degmada dibaddeeda.
  - Ugu yaraan hal xubin waa inuu aqoon u leeyahay xisaabaadka iyo hantidhawrka.
  - Waa inay xubnuhu aragti ka haystaan habdhaqanka wanaagsan, kana go'an tahay horumarinta joogtada ah ee waxqabadka degmadu.

## **Doorarka qeybta hanti-dhowrka ee degmada iyo guddiga hanti-dhowrka gudaha**

### **Doorarka madaxa hanta-dhowrka gudaha**

Madaxa Waaxda/qeybta hanta-dhowrka guduhu waa in uu :

- (i) Ka shaqeeyo si guud maamulka hanti-dhowrka Gudaha.
- (ii) Sameeyo qorshaha fulineed masuuliyadaha kala duwan ee Waaxda/qeybta hantidhowrka Gudaha.
- (iii) Qoro habraacyadii lagu hagi lahaa hantidhowrka Gudaha.
- (iv) Sameeyo barnaamij lagu hormarinayo shaqaalaha hanti-dhowrka Gudaha.
- (v) Isku xiro howlaha hanti-dhowrka Gudaha.
- (vi) Sameeyo iyo daryeelano qaab lagu hubiyo tayada iyo mid lagu qiimeeyo howlaha shaqaalaha hanti-dhowrka Gudaha.

### **Doorarka Hanti-dhowrayaasha gudaha**

Si ay u sameeyaan howlgalo hanta-dhowr hanta-dhowrayaasha guduhu waxay sameyn karaan:

- Dib u eegaan nidaamka si ay u hubiyaan in ay u shaqeynayaan sidii wanaagsaneed ee la rabey;
- Sameeyaan hubin u hogaasamidda nidaamka iyo shaqada hanta-dhowrka;
- Hore u hubin iyo gadaal ka hubin hanti-dhowr ee dhaqaaqa maaliyadeed;
- Dabagalid fulinta talo soo jeedin hore ee laysa gartey;
- Shaqo la tashi iyo fikir la qeysbi , hubin sugan iyo baaris.
- Waxaa looga baahanyahay hanta-dhowrayaasha Gudaha in ay si habboon u qorsheeyaan, u gutaan, u diiwaan-geliyaan howshooda hanti-dhowrista Gudaha.

### **Doorarka guddiga hanti-dhowrka Gudaha**

Guddiga hanti-dhowrka-guduhu waa hay'ad korjoogteyn madax-banaan oo degmadu u sameysatay qaabdhismeedka ee maamulka dowladnimo. Gole deegaan ahaan guddi hanti-dhowrka guduhuv waxuu ciyaaraa door la talineed sida ku cad jabtarka 11 ee sayaasadda maaliyadda ee dowladaha hoose.

Guddiga hanti-dhowrku waa in uu caiyaaro door la talin oo guud ahaan ka caawiyaa degmada gaaridda waxyaabaha soo socda:

- (i) Haajinta isla xisaabtanka;
- (ii) Xoojinta bey'ada ilaalinta Gudaha iyo;
- (iii) ka caawinta golaha degaanka iyo/ ama saraakiisha xisaabaadku u buuxiyaan aaminimadooda, hogaaminta iyo masuuliyahooda maaliyad ilaalineed.

*Xigasho: shaxda xeerka hanti-dhowrka Gudaha ee buugga hanti-dhowrka ee Puntland iyo buugga guddiga hanti-dhowrka*

## Noocyada Hanti-dhowrka

Tirada noocyada kala duwan hanti-dhowrka iyo howlgalada hubinta uu sameynayo hanti-dhowraha guduuhu waxay isugu jiraan, laakiin kuma, xaddidna:

- (i) **Hanti-dhowrka ku dhaqanka-** Dib u eegista ku dhaqanku wuxuu geexaa xaddiga ku dhaqanka ama ku dheganaanshaha shuruucda, xeerarka iyo siyaasadaha hanti-dhowrka Gudaha iyo kan dibada iyo habraacyadooda.
- (ii) **Hanti-dhowrka hababka-** Waa qiimeynta dejinta howlgallada ee hababka degmadu u shaqeyso iyo qaababka oo aan ahayn saldhigyada ama waaxyaha. Waxay hubisaa ama dabagashaa howlaha ka socda degmada si jog u tax ah. Habraacu wixuu hubiyaa sida taabagalka ah ee loo dejiyey kor-jooqteynta iyo maareynta khataraha si loo hubiyo in yoolalkii la lahaa la gaarey.
- (iii) **Qiimaha lacagta/ Hantidhowridda tayada-** Dib u eegid hababka si loo hubiyo in lacata/hantida loo isticmaaley sii ugu qiima yareyd , ugana taabagalsaneyd dhaqaale ahaan.
- (iv) **Hanti-dhowridda xogta** - Habka dib eegista xogtu wuxuu xooga saraa ilaalinta beya'adda Gudaha ee xogta ku jirta kumbiyuutarada qaabka loo abla-ableeyo xogtaa iyo sida dadku u isticmaalo hababkaas. Habka dib u eegista xogtu wuxuu qiimeeyaa xogta laga gelinayo iyo midda laga soo saarayo kumbiyuurada, iyo ilaalinta qaabeynta xogta; sameynta hab keydin xog iyo sameynta qorshaha xogta dib loogu heli lahaa haddii xogtu dhunto/lunto iyo habka nabad gelinta dokumentiyada.
- (v) **Dib u eegista/ hanti-dhowridda maaliyadda** - Dib u eegidda maaliyadeedi waxay qiimeysaa sax ahaansha dhaqdhaqaaqa xisaabaadka iyo warbixinada. Ujeedada dib eegista caynkaan ahi waa in la caddeeyo in dhaqdhaqaaqa maaliyadeed ee qeyb(unit) uu si sax ah uga tarjumayaan warbixinada maaliyadeed iyo in xisaabaadka diiwaangashani iyo dukumentiyada maaliyadeed ay la mid yihiin ama ay caawinayaan warbixinaha maaliyadeed.
- (vi) **Hanti-dhowridda Howgaleed-** Dib u eegidda howgalku wuxuu baaraa sida loo isticmaaley hantida ay leedahay hay'addu sidoo kale waxay qiimeysaa in hantidaas loo isticmaaley sidii ugu habbooneyd uguna taabagalsaneyd si loo gaaro howlgaladda iyo ujeedooyinka la degsadey. Gaarista yoolalka iyo hadafyadu waa arrinta leh tixgelinta ugu weyn marka laga hadlayo dib u eegista howlgaladda.
- (vii) **Hanti-dhowridda wax soo iibsiga** - Dib u eegista wax soo iibsiga waa loo qaabeeyey in lagu qiimeeyo madax-banaanida, caddaanta iyo daacadnimada wax soo iibsiga waaxyaha.  
( Hoos ka fiiri faah-faahin dheeri ah).

Marka la sameenayo hanti-dhowr, hanti-dhowrka guduuhu waa in uu baaraa wax ku oolnimada qaabka kormeeridda /ilaalinta Gudaha , isagoo soo jeediya halbeeygo lagu xoojinayo qaabkaas

*Xigasho: Buuga Hanti-howrka gudaha DD/H e e Puntlandgudjh===== (2015).*

### Waa Maxay Hantidhawrka Wax-soo-libsashadu/hanashadu?

Hantidhawrka hanashadu/wax-soo-iibsashadu waa nooc hantidhawrka ka mid ah oo loo sameeyo in lagu qiimeeyo wax iibsiga degmadu yahay mid madaxbannaan, hufan oo xalaal ah oo loo siman yahay. Hantidhawrka hanashadu waxa uu muhiim ugu yahay degmada sida lagu xusay Tusaha Hantidhawrka Hanashada ee Dowladda Hoose:

*Hay'adaha Dowladdu waxa ay bixiyaan lacago badan iyaga oo ku iibsanaya hawlo, adeegyo, ama alaabooyin. Maaddaama lacag bixintaas ay khatar u tahay wax-isdaba-marin, waxaa lama huraan ah in meel la dhigo nidaam lasocoshu iyo xakamayneed, si hantida guud looga faa'idaysto si buuxda. Nidaamkaas xakamaynta waxa ka mid ah in lagu sameeyo qiimayn madax bannaan hawlgallada hanashada heerarkiisa oo dhan, laga bilaabo sheegista baahida, ilaa dhamaystirka heshiisyada qandaraaska.*

*Qiimayntan madaxabannaan, oo loogu yeero Hantidhawrka Hanashada/wax-soo-iibsiga, waxaa laga rabaa inuu tilmaamo aagagga aan la waafaqin xeerarka, nidaamka, iyo hannaanka hanashada, xakamaynta dabacsan, farqiga awoodaha, iwm, soona jeediyo sidii lagu horumarin lahaa.*



### Su'aalaha Gorfaynta

Badanaaba fikradda hantidhawrka waa laga baqaa, laakiin waxay in badan ka qaybqaadan karaysaa sare u qaadista sida hay'adi (urur) u shaqeeyo.

- Ma leedahay degmadiinu hantidhawre gudaha ah? Haddii ay leedahay, waa maxay kaalintiisu?
- Waa maxay siyaabaha la taaban karo ee hantidhawre gudaha ahi sare ugu qaadi karo habka ay u shaqayso dowladda degmadiinu?



Dokumentiyada haga geeddi-socodka hantidhawrka gudaha ee degmooyinku

waa:

- Tusaha Guddida Hantidhawrka Dowladaha Hoose (2016)
- Tusaha Hantidhawrka Daakhiliga ah ee Dowladaha Hoose (2016).
- Tusaha Hantidhawrka Hanashada ee Dowladaha (2015)

## La-socodka iyo Qiimaynta (L&Q) Degmada

### Waa Maxay La-socodka iyo Qiimaynta Degmadu

**La-socod:** waa ururinta macluumaad kasta oo ku saabsan horumarka mashruuc ama shaqooyin cayiman. Geeddi-socodyada la-socodka waxaa loo isticmaali karaa:

- Hilaadinta/la-socodka horumarka (habsami-u-socodka) mashruuc.
- Ogaanshaha mushkiladaha iyo caqabadaha soo waajaha mashruuca inta uu socdo.
- Ka-qaadashada go'aamada waxbeddelka ama xalalka mushkilado hadday jiraan.
- Sida ugu wanaagsan oo looga faa'iidaysto khayraadka
- Dhawrista tayada shaqada
- Ilaalinta daah-furnaanta iyo isla-xisaabtanka.

**Qiimayn:** waxaa la qabtaa dhammaadka hannaanka/hawsha, si loo ogaado arrimaha lagu guulaystay, meelaha ay tahay in la hagaajiyo, iyo meelaha ay tahay in wax laga beddelo. Tusaale ahaan, mashruuc marka ay la xiriirto, qiimaynta waxaa la iswaydinayaa:

- Mashruucu ma qabtay wixii laga rabay?
- Ma uqalmay in la sameeyo?
- Si fiican ma loo qabtay, mise sidan si ka wanaagsan ayaa loo qaban karay/ ama qarash intan ka yar ayaa lagu qaban karay?
- Miisaaniyaddii loo qorsheeyay gebi ahaan miyaa la bixiyay, wakhtigeedi miyaa lagu bixiyay, manfac u dhigma ma laga helay lacagta?
- Mashruuca ma lagu dhameeyay wakhtigii loogu talagalay, qandaraasluhu siduu waxa u qabtay, kormeerka mashruucu ma hagaagsanaa, mashaakilkii soo kordhay intuu socday mashruucu si wanaagsan ma loola tacaamulay?
- Nidaam joogto ah ma la aasaasay?

Qiimaynta waxaa loo sameeyaa qaab waqtiyo go'an leh, tusaale ahaan kalabarka mashruuca ama dhammaadka mashruuca, halka kla-socodku uu si joogto ah u socon karo, tusaale ahaan maalin kasta, iyadoo la eegayo nooca mashruuca.



### Su'aalaha Gorfaynta

Adiga oo ka shidaal qaadanaya sharraxaadda laga bixiyaya la-socodka iyo qiimaynta, tusaale ma ka bixin kartaa aagga shaqadaada meelo ka faa'iidi lahaa la-socod iyo qiimayn?

U gorfeeya labo-labo, dabadeedna gole loo dhan yahay ku wadaaga aragtiyihiina.



## Shaxda 2aad: Faraqa u Dhaxeeya La-socoshada iyo Qiimaynta

	La-socodka	Qiimaynta
<b>Muxuu yahay Hadafku?</b>	Si loo ogaado in fulinta waxqabadku waafaqsan tahay qorshaha loo dhigay. Tusaale, horumarin kaabe, ama adeeg-bixin.	Si loo ogaado heerka laga gaaray xaqiijinta yoolalka waxqabadka.
<b>Goormaa la qabtaa?</b>	Inta ay socoto fulinta waxqabadku oo dhan.	Qiimeynta waxaa la qabtaa xilliyo gaar ah. Tusaale, kalabarka waxqabadka, dhammaadkiisa, bilo, amaba sannado kadib dhammaadka.
<b>Maxay yihiin macluumaadka la uruuriyo iyo sababta?</b>	Xogo iyo macluumaad ku saabsan natiijooyinka waxqabadka iyo waxa la geliyay ( <i>inputs</i> ) si loo eego in ay waafaqsan yihiin qorshaha la dhigay.	Ka faahfaahsan yihiin kana bartilmaamsi roon yihiin, si loo ogaado in la xaqiijiyay yoolalka waxqabadka
<b>Sidee macluumaadka loo adeegsadaa?</b>	Si loo xaliyo mashaakil, loona sii wanaajiyo fulinta waxqabadka hadda iyo mustaqbalkaba.	Guddoominta saamaynta waxqabadka ama adeeg bixintu ku yeelatay bulshada la bar-tilmaamsanayay, iyo ka go'aan-qaadashada mashaariicda mustaqbalka.

### Waa Maxay Cunsurrada Muhiimka ah ee L & Q Degmadu

Nidaamka la-socodka iyo qiimaynta degmadu waa inuu diiradda saaraa arrimahan:

#### La-socodka Qaabka Guud ee Horumarinta Degmada (DDF)

Degmadu waxaa looga baahan yahay inay la-socoto yoolalka u dhigan ee DDF-keeda ku qoran, shanta sano ee DDF-ka oo dhan. Sidaas waxay degmadu ku qiimayn kartaa horumarka ay ka samaysay yoolalkeeda Qaabka Guud ee Horumarinta Degmada (DDF) ee muddadaas.

#### La-socodka Qorshe-Hawleedka Sannadlaha ah:

Qorshe-Hawleedka Sannadlaha ahi waxa uu faahfaahinayaa dhammaan waxqabadyada degmadu ay rabto inay samayso sannad-maalayadeedkaas, oo isugu jira horumarinta kaabayaasha iyo hawlaha adeeg-bixinta. Badanka la-socodkan waxa uu kamid yahay warbixinnada maaliyadeed ee aynu kusoo aragnay Kulankii 4aad.

#### Kaqayb-qaadashada Bulshada

Kooxaha La-socodka ee Bulshada ayaa laga samaynayaa degmooyinka si ay ula socdaan habsami usocodka hawlaha degmooyinka, ha noqoto horumarinta kaabayaal, ama adeeg bixinba.

### Arrimaha Jinsiga iyo L&Q

Waa muhiim in tixbelin la siiyo sida rag iyo haweenba ay uga qaybqaadan karaan ayna uga faa'iideysan karaan geeddi-socodka horumarinta. Waxaa muhiim ah in la sameeyo tilmaamayaal iyo qalab korjoogteyn oo lagu cabbiro ilaa xadka ay haweenku ka faa'iideystan karaan adeeg-bixinta iyo horumarinta kaabayaasha. Waxaa ay u baahan tahay in la fahmo sida baahiyaha haweenku ay uga duwan yihiin kuwa ragga, iyo sida arrimahan loogu muujinaya waxqabadyada la-socodka iyo qiimeynta.

## Doorarka iyo Masuuliyadah L&Q ee Degmada

### Wasaaradda Arrimaha Gudaha

- Masuul waxay ka tahay kormeerka L&Q, iyo kaalmaynta degmooyinka.
- Waxay hagaysaa samaynta hannaanka la-socodka Qaabka Guud ee Horumarinta Degmada (DDF)
- Dib u eegista iyo ansixinta natiijooyinka la-socodka

### Waaxda Qorshaynta ee Degmada

- Uruurinta isu geynta xogaha ka imanaya waaxaha iyo hay'adaha kala duwan ee la xiriira qorshaynta horumarka, la-socodka, iyo qiimaynta.
- Abuurista iyo dhawrista nidaamyada xog uruurinta iyo xog maareynta.
- Kormeerista iyo ka warbixinta qaybta horumarinta ee Qorshe-Hawleedka iyo Miisaaniyadda degmada, iyo guud ahaan habsami usocodka arrimaha mudnaanta uu siiyay Qaabka Guud ee Horumarinta Degmada (DDF).
- Ku matalaada degmada golayaasha guud iyo wadatashiyada, waxay xiriir la yeelanaysaa hay'adaha heer gobol iyo qaran.
- Gudanaysaa shaqooyinka ku cad Xeer In 23, Qodob 17aad.

### Kooxaha Bulshada ee La-socodka

- Mas'uul ka yihiin la-socoshada fulinta Qaabka Guud ee Horumarinta Degmooyina (DDF), xagga bulshada, iyo waliba kormeerista hawlo cayiman ee degmada (horumarinta kaabayaasha iyo adeeg-bixinta).
- Masuul ka yihiin kormeerista iyo ka warbixinta Qaabka Guud ee Horumarinta Degmada iyo mashaariicda.
- Waxay adeegsanayaan kaarka Cabiridda ee bulshada (*community scorecard*) iyo agabka kale ee qiimaynta saamaynta ka qaybqaadashada.



## Layliga 8aad: Hantidhawrka iyo La-socodka iyo Qiimaynta

Shaqooyinka soo socda oo dhan, sheeg inay tahay shaqo Hantidhawr **'H'**, ama la-socod iyo qiimayn **'L&Q'**. Kadib sheeg cidda ka masuul ka ah. U shaqeeya labo-labo, kadibna la wadaaga natiijadiina golaha dhan.

Shaqada/waxqabadka	H mise L&EQ	Mas'uuliyadda?
Dib-u-eegista nidaamyada degmada si loo hubiyo inay si hufan u shaqaynayaan.		
Cabbiridda saamaynta mashruuc dhisid dugsi, marka la eegayo kororka iskuul isqorista		
La socoshada maalinlaha ah mashruuc dhisidda waddo degmada gudaheeda.		
Ku-samaynta qiimayn madaxbannaan dhammaan hannaanka hanashada/wax-soo-iibsiga, laga bilaabo soo sheegista baahida, gudogalka hannaanka hanashada, ilaa heerka dhammaystirka qandaraaska hanashada		
Uruurinta iyo isugeeynta xogo ka yimi waaxo kala duwan si loo hago qorshaynta horumarinta degmada		

## Kulanka 6aad: Gebogebo

### Ujeedooyinka Kulanka

Kulanka dhammaadkiisa, kaqaybgalayaashu waxay awood u yeelanayaan:

- Soo koobista mawduucyada lagu dhigay Cutubka Guudmarka
- Muujinta fahanka guud ee macluumaadka lagu gudbiyay cutubka, waxay ku muujinayan laylis qiimayn
- Qiimaynta Cutubka, iyagoo ka bixinaya falcelin tabobarka ay dhammaysteen, iyaga oo kajawaabaya su'aalo qoraal ah

## Cutubka oo Kooban


Cutubkan Guudmarka ah waxa aynu kubaranaay:

- Mareegta DPP&BG ee degmada iyo qaar kamid ah mabaadi'da haga.
- Daneeyayaasha waaweyn ee mareegta DPP&BG iyo doorarkooda kala duwan.
- Sida lagu hubin karo in bulshadu, gaar ahaan haweenka iyo qaybaha kale ee la faquuqo/liido/yaso ay uga qaybgeli kari lahaayeen mareegta DPP&BG
- Shaqooyinka la xiriira tallaabada qorshaynta iyo miisaaniyad-ddejinta, oo ay ka mid yihiin abuurka Qaabka Guud ee Horumarinta Degmada (DDF), iyo Qorshe-Hawleedka Sannadka, iyo geeddi-socodka miisaaniyad-dejinta.
- Shaqooyinka la xiriira tallaabada fulinta miisaaniyadda iyo maareynta kharashaadka, oo ay ka midyihiin kormeerista iyo dib u eegista miisaaniyadda, hanashada/soo-iibsiga, iyo maamulidda hantida.
- Qaybaha waaweyn ee tallaabada xisaabaadka iyo warbixinnada maaliyadda oo ay ku jirto aasaaska hab xisaabaadka iyo xisaab-haynta degmada iyo barnaamijka ay degmada isticmaasho.
- Qayba ugu muhiimsan ee Hantidhawrka Gudaha ee Degmada, nidaamka L&Q ee degmada, oo kamid ah tallaabada ugu danbaysa ee mareegta DPP&BG.

## Daraaseyn iyo Qiimayn (*assessment and evaluation*)

- Waxaa la idinka codsanayaa in aad dhamaystirtaan hawl gaaban oo la idinku qiimaynayo, si loo hillaadiyo/qiimeeyo fahankiina Cutubka Guudmarka ah.
- Waxa kale oo la idinka codsanayaa in aad ka jawaabtaan su'aalo qoraal ah, si loo uruuriyo falcelinta ka-qaybgalayaasha ee ku aaddan tabobarka.

Waad ku mahadsan  
tihin ka-qaybgalka



# Qaamuuska Ereybixinta

*Isha: Local Government Financial Management Manual and PEM 1. Overview Module. Tusaha Maamulka Maaliyadda ee Dowladaha Hoose iy PEM 1. Cutubka Guudmarka*

<b>Isla-xisaabtan</b>	Mid kamid ah tilmaamaha mareegta DPP&BG ee xooggan. Isla-xisaabtanku waxa ay saamaxaysaa in masuuliyiinta lagula xisaabtamo xilka loo dhiibay. Ma aha keliya in masuuliyiinta miisaaniyaddu, iyo wasiiradu meel mariyaan isticmaalka lacagaha, laakin waa in lagala xisaabtami karaa si xun u adeegsiga lacagaha.
<b>Hanti</b>	Hanti ay degmadu leedahay ku hanatay macaamil hore, oo hadda dheef dhaqaale ama waxtar adeeg-bixin u leh degmada. Dhammaan hantida ku diiwangashan Maamulka Maaliyadda Guud ee Degmadu waa hanti dhaqaale (qiimo ayay leeyihiin). Xaqa mulkiyadeeda waxaa socodsiinaysa Degmada, faa'iido dhaqaale waxaa lagaga samayn karaa in la hayo ama in la adeegsado muddo.
<b>Buugaagta Xisaab-haynta</b>	Diiwaannada lagu qoro macaamilka maaliyadeed ee degmada.
<b>Miisaaniyad</b>	Qorshaha hantida la hayo iyo sida looga faa'iidaysan lahaa muddo sannad ah (Sannad-Maaliyadeed), oo loo qoray qaab lacageed.
<b>Hab-xisaabeed Kaash ku saleysan</b>	Hab xisaabaad macaamilka aqoonsada marka lacag caddaan/kaash ah la qabto ama la bixiyo.
<b>Waax</b>	Laan ama qayb maamul ka tirsan degmada oo sarkaal sare (agaasime) hoos timaada, sida Waaxda Maamulka iyo Maaliyadda.
<b>Xoghayaha Degmada</b>	Xisaabiyaha Degmada, sarkaalka ugu sarreeya ee ka masuulka ah maamulka iyo maareynta degmada. Waxaa magacaaba Wasiirka Arrimaha Gudaha, waxaana ansixiya Golaha Deegaanka.
<b>Kharashaad Anshax Maaliyadeed</b>	Siyaabaha kala duwan ee lacagaha loo qoondeeyo oo loo bixiyo Ku sargooynta kharashaadka awoodda dakhli soo xaraynta, iyo ku ilaalinta qaamaha heer aan wax u dhimaynin adeegyada
<b>Hanti Ma-guurta ah</b>	Hanti kasta, la taaban karo, ama aan la taaban karin, oo degmadu u hanatay si ay u caawiso Maamulka Degmada.
<b>IPSAS</b>	<i>International Public Sector Accounting Standards (IPSAS):</i> Halbeegga Caalamiga ah ee Xisaabaadka Guud. Waa xirmo halbeegyo ah oo ay soo saartay Guddida IPSAS, si ay u adeegsadaan Laamaha Dowladuhu ee dacallada adduunku markay soo saarayaan warbixinno maaliyadeed. Waxay ku dhisan tahay Halbeegga Calamiga ah ee Warbixinnada Maaliyadeed IFRS, oo ay soo saarto

Guddida Caalamiga ah ee Halbeegyada Xisaabaadka / the International Accounting Standards Board (IASB).

- Dakhli** Wadarta guud ee dakhliga dhaqaale ama adeeg-bixin suuragal ah ee soo gasha degmada muddo-xisaabeed marka ay natiijadeedu tahay koror ku dhaca hantida degmada.
- Daahfurnaan** Mid kamid ah tilmaamaha nidaamka PPPFK-ka caafimadka qaba. Nidaamka DPP&BG daahfuran waxa uu leeyahay hage muujinaya sida hantida loo isticmaalayo iyo natiijooyinka laga sugayo. Warbixinuhu waa inay sidoo kale suurtoogelinayaan kormeerista waxqabadka oo la barbar dhigayo doonista yoolalka la qeexay ee dowladda.
- Qiime Lacagta laga helo** Gaarista heer wax ku oolnimo iyo dhaqaale marka hantida guud la isticmaalayo, si loo xaqiijiyo yoolalka la rabo iyada oo la adeegsanayo kharashaadka ugu yar.
- Qorshe-hawleedyo** Jadwalka hawlaha ay tahay in la qabto oo leh bartilmaameedyo iyo yoolal cad, oo leh wakhti cayiman oo ay tahay in lagu xaqiijiyo.

# Akhris dheer ah

Lawson, A. (2015). Public Financial Management. GSDRC Professional Development Reading Pack no. 6. Birmingham, UK: GSDRC, University of Birmingham.  
<http://www.gsdrc.org/professional-dev/public-financial-management/>

Puntland Local Government Finance Policy (2016).

Puntland Local Government Financial Management Manual (2016).

Puntland Local Government Procurement Manual (2015).

Puntland Local Government Audit Committee Manual (2016).

Puntland Local Government Internal Audit Manual (2016).

Puntland Procurement Audit Manual for Local Governments (2015).

# Lifaaqyada

## Lifaaqa 1aad: Shaqooyinka Waaxaha Degmada iyo DPP&BG-ka

### Waaxda Qorshaynta:

- Ka caawisaa Golaha Deegaanka aqoonsiga baahiyaha bulshooyinka miyi ama magaalo.
- Ka caawisaa Golaha Deegaanka inuu mudnaan kala siiyo baahiyo qaab wadatashi ah.
- Hormuud ka noqdo ka wadashaqaynta bulshooyinka, ururrada rayidka ah, iyo hay'adaha dawliga ah arrimaha maalgashiga/horumarinta.
- Inay samayso qiimaynta xaaladaha iyo uruurinta xogta asaasiga ah ee dhaqan-dhaqaaleed.
- Uruurinta iyo meel isugu geeynta xogaha waaxaha kala duwan si loogu adeegsado qorshaynta, la-socodka, iyo qiimaynta.
- Abuurto, dhawrto xog uruurinta loo baahanyahay iyo nidaamka maamulka xogta.
- Isku duwista samaynta iyo cusboonaysiinta Nidaamka Horumarinta Degmada DDF.
- Ka qaybqaadashada samaynta Qorshe Hawleedka iyo Miisaaniyada, iyo inay isku xidho hawlaha maalgashiga/horumarinta iyo Qorshe Hawleedka.
- Kormeeritaanka , ka warbixinta fulinta qaybta horumarinta kaabayaasha ee Qorshe Hawleedka iyo Miisaaniyadda, iyo waliba habsamisocodka guud ee DDFka.
- Diyaarinta hannaanka maamulka mashaariicda ( aqoonsiga mashruuca, qorshaynta, fulinta, la-socodka, qiimaynta), iyo hormuud ka noqoshada dhaqangalintiisa.
- Baadhitaanka fursado lagula shaqaynayo ganacsiga gaarka ah, hay'adaha aan dawliga ahayn ee maxalliga ama caalamiga ah, deeqbixiyayaasha iyo hay'adaha Qaramada Midoobay.
- In la hubiyo ka hortagga colaadaha iyo yarayntooda si waafi ah loogaga baarandagay siyaasadaha iyo qorshayaasha degmada.

### Waaxda Maamulka iyo Maaliyadda

- *Xaqiijinta, diyaarinta, keydinta iyo fulinta miisaaniyada Dowladda Hoose ee Degmada.*
- *Diyaarinta, xafidaadda, keydinta dokumentiyaasha maamulka iyo miisaaniyadda.*
- *Maaraynta iyo ilaalinta khayraadka, fududeeyayaasha keydinta iyo xaffiisyada Golaha*
- *Keydinta iyo hubinta dokumentiyada qandaraasyada/heshiisyada ay dowladda hoose iyo degmadu qayb ka yihiin (ku lug leeyihiin).*
- *Diiwaangelinta hantida guurtada ah iyo tan ma guurtada ah ee Dowladda Hoose ee Degmada.*
- *Qandaraas ku bixinta daabacaadda, keydinta, iyo bixinta lacagta caddaanka ah, cashuurta, shidaalka iyo keydinta qoraalada/boonooyinka ay wax ku baxeen (receipts).*
- *Is barbardhigga dakhliga iy kharashka bil walba.*
- *Diyaarinta xisaab-xirka bille, rubuc-sannadle, nus-sannadle iyo sannadle.*
- *Soo iibinta, diiwaangelinta iyo keydinta alaabooyinka.*
- *Xaqiijinta si maalinle ah, bile ah, iyo si sannadle ah dakhli ururinta.*

### **Waaxda Dakhliga**

- Soo urutinta cashuuraha Dowladda Hoose ee Degmada.
- Abuuridda iyo sahrinta ilo dhaqaale oo cusub.
- La socoshada iyo xaqiijinta canshuuraha aan sannadkii hore la qaadin.
- Baaridda suuqyada iyo kormeeridda shaqaalaha cashuur-ururinta.
- Qiimaynta shaqaalaha cashuur-ururinta iyo shaqo-ku-tababarkooda.
- Diiwaangelinta iyo cashuur ka qaadidda hantida ma guurtada ah ee degan Degmada, sida dhismayaasha (dhismayaasha dhagaxa ah ama kuwa dhoobada ah), sandaqaadaha, beeraha, baabuurta, iwm.
- Talo ka bixinta arimaha la xiriira shaqada iyo shaqaalaha waaxyaha.
- Qiimaynta sannad kasta noocyada cashuuraha kala duwan.
- Soo ururinta ijaarka hantida iyo waxyaabaha wax soo saarka leh ee Dowladda Hoose.
- Samaynta sahan iyo daraasadeyn iyo diiwaangelinta meelaha wax ka soo galaan.
- Ururinta dakhliga maalin-laha ah.
- Soo jeedinta talooyin la xiriira abuuridda iyo dib-u habaynta cashuuraha.

### Waaxda Arrimaha Bulshada

- Nadaafadda, caafimaadka iyo qorxinta degmada
- Horumarinta bay'ada/degaanka iyo khayraadka dabiiciga ah ee degmada.
- Horumarinta farshaxanka, ciyaaraha, suugaanta iyo dhaqanka.
- Kor u qaadidda iyo dhiirigelinta qiimaha islaanimada, ummadnimada iyo caalam ahaanba.
- Daryeelka iyo hagaajinta nadaafadda guud iyo ka hortagga waxii cuduro keeni kara.
- Raridda/daad guraynta dadweynaha marka dhibaato iyo halis laga qaxaa ay timaado.
- Dhisidda iyo dayactirka dugsiyada hoose/dhexe, dugsiyada quraanka iyo masaajidda.
- Dhisidda iyo maamulidda xarumo daryeelka hooyada iyo carruurta iyo weliba dugsiyada maaraynta qoyska.
- Diyaarinta, qorsheynta, xaqiijinta iyo isu dheelitirka baahiyaha baraha biyaha laga dhaansado iyo helitaankooda.
- Maaraynta iyo ka ilaalinta ilduufka talaabooyinka horumarineed ee laga qabanayo miyiga.
- Hagaajinta howlaha aaska iyo qabuuraha.
- Diyaarinta kalatanka farmashiyaasha iyo xarumaha daryeelka caafimaadka hooyada.
- Kormeeridda iyo la socodka habboonaanshaha isticmaaka daawada iyo cuntada

## Waaxda Hawlaha Guud

- *Fulinta mashaariicda iyo dhismayaasha.*
- *Cusboonaysiinta dhismayaasha Dowladda Hoose ee Degmada.*
- *Howl gelinta iyo adeegidda baabuurta, guryaha, xafiisyada, iyo qalabaynta dowladda hoose.*
- *Soo gudbinta liisaska baabuurta cusub ee loo baahanyahay.*
- *Cusboonaysiinta iyo dayactirka jidadka, goobaha lagu nasto ee dadweynaha ka dhexeysa, garoomada ciyaaraha iyo goobaha dadweynaha.*
- *Diyaarinta iyo gudbinta qorshayaal si maalinle ah oo la xiriira shidaalka, olyada, iyo garaasada ay baabuurta, matoorada, iyo matoorada waaweyn ee Golaha u baahanyihiin.*
- *Maamulidda/maaraynta Hoosooyinka Farsamada, garaashyada iyo qalabkooda.*
- *Meelmaritna qoshayaal ku lug leh dhulka oo eh ahdaaf mabd'a.*
- *Meelmarinta sharciyada dhulka iyo awaamiirta.*
- *Diiwaangelinta kirada dhulka, lahaanshaha, dhismayaasha gaarka loo leeyahay, meelaynta dhulka iyo sahminta dhulka.*
- *Xaqijinta iyo tixgelinta iyo qorsheynta nidaamyada dhulka dadweynaha.*
- *Naqshadaynta iyo dhowrida dhismayaasha golaha degmada, waddooyinka, goobaha madadaalada, goobaha ciyaaraha, dugsiyada, xarumaha caafimaadka, booshariyada, goobaha basaska laga raaco, iwm..*

